

ABUURISTA ISU-TANAASUL


DARAASEYNTA FURSADAHA KALA DUWAN EE KA-QAYBGAL-SI-YAASADEED IYO DHIIRRIGELINTA DHAMMAAN FIKRADAHA KALA DUWAN EE SOOMAALIDA

FEBRAAYO 2014



Qorayaasha | Nanako Tamaru, Paul Simkin, Mukhtar Ainashe, Kirsti Samuels iyo Roger Middleton

Mahadnaq | Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa suurageliyey oo looga mahadcelinayaa caqli-ku-biirintii iyo dhinac kale ka tusiddii wada-hawlgalayaal badan oo Soomaali ah. Qorayaashu waxaa ay u mahadcelinayaan Aaron Stanley oo lafagur iyo dib-u-eegis ku biiriyey, iyo Elizabeth Wright oo gacan ka geysatay cilmi-baarista iyo dib-u-eegista iyo Gerard Mc Hugh, oo hoggaaminayey oo kormeerayeyna mashruuca. Conflict Dynamics waxaa ay jeceshahay in ay u mahadnaqdo Dowladda Norway oo u soo marisey Wasaaraddeeda Arrimaha Dibadda iyo Dowladda Switzerland oo u soo marisey Waaxda Arrimaha Dibadda ee Federaalka taageeradooda deeqsinimada lahayd ee ay siiyeen hindisaha, “Supporting Somali approaches to political accommodation for stability and peace” oo Qoraankan Xog-warranka ah lagu soo saarey. Fikradaha lagu muujiyey halkaan khasab ma ahan in ay ka turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee deeq-bixiyayaashan midkoodna.



Soo-koobidda nuxurka

Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa uu soo bandhigeyaa qaabab, qalabyo (qoraallo) iyo tiro 'noocyo fursado/ikhtiyaarro' lix ah oo ah qaabab is-waafajin kara danaha iyo aragiyaha siyaasadeed ee dadka Soomaaliyeed iyo wakiilladooda haddii ay tahay tan u dhaxaysa Soomaaliya iyo Somaliland ama mid walba gudaheeda.

Ikhtiyaarrada hordhaca ah ee halkan lagu soo bandhigey waxaa ay isugu jiraan hal dal oo shakhsiyad caalami ah leh (t.a. nidaam federaali ah) ilaa dalal badan oo xiriir kooban oo siyaasadeed leh (t.a. dhowr dal oo kala madax bannaan oo ku wada tacaamulaya heshiisyo ay galaan). Fursadahan/ikhtiyaaradan waxaa ay bixinayaan habab lagu dhisayo heshiisiinta danaha kala duwan ee dadka.

“*Is-waafajin siyaasadeed waxaa soo hoosgelaya ujeedooyinka, qaababka, geeddi-socodyada, iyo natiijoyinka is-waafajinta danaha iyo aragiyaha kala duwan ee dadka.*”

Dhaqan-gelintii Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah iyo doorashadii dowladda cusub ee bilihii Agoosto iyo Sebtembar 2012 kala dhacay waxaa ay keeneen fursad cusub oo Soomaaliya ay nabad iyo barwaaqo ku gaari karto. Marka laga soo tago guulahaan, arrimaha siyaasadda iyo amniga ee ka dhashey dhammaanshihii ku-meelgaarnimada ayaa fududeeyey bilaabidda wada-hadal dhex mara Soomaaliya iyo Somaliland. In kasta oo horumarkan uu rajo weyn dad gelinayo, haddana waxaa jira welwel laga qabo arrimo muhiim ah oo la xiriira amniga, maamulka dowladeed, dhaqaalaha, iyo bulshada oo halis gelin kara guulahan la gaarey oo keeni karana sii socoshada ama soo laba-kacleynta colaadaha. Sii ambaqaadidda horumarkan la gaarey waxaa ay u baahan tahay in la sameeyo qaabab maamul-dowladeed oo si taabogal ah isugu keeni kara danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee kala duwan ee guud ahaan Soomaaliya iyo Somaliland.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee 2012 waxaa uu dhigayaa oo keliya qaabab kooban oo loo dhisi karo maamulka dowladeed, noocyada kala duwan ee fursadaha/ikhtiyaarrada ah ee lagu soo bandhigey Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa loo qaabeeyey in uu gacan ka geysto habab Soomaali leedahay oo loo sameeyo loona hirgeliyo qaabab keeni kara in si taabogal ah loo heshiisiyo (la isu waafajiyo) danahooda iyo aragtiyahooda siyaasadeed.

Hannaanka iyo habka

Is-waafajin siyaasadeed waxaa ay bixineysaa hannaan qaabeysan oo loo daraaseeyo fursado/ikhtiyaarro lagu gaaro heshiisiinta danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed. Hannaanka waxaa uu eegayaa lix 'dhinac', ama arrimo diiradda la saaro, kuwaas oo is-waafajin siyaasadeed lagu gaari karo iyada oo loo marayo hab-maamul dowladeed (eeg *Jaantuska 2aad – Dhinacyada Is-waafajinta Siyaasadeed*): (1) Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta; (2) Nidaamka (nidaamyada) doorashada; (3) Laanta fulinta; (4) Laanta sharci-dejinta; (5) Ka-qaybgalka dadweynaha; iyo (6) Arrimaha dhaqanka, dhinacyadaan ayaa diiradda lagu saarayaa qoraalkan xog-warranka ah. Tiro saddex dhinac/*strands* oo geeddi-socodka ku saabsan oo la xiriira sida loo qaabeynayo geeddi-socodka iswaafajinta siyaasadeed ayaa sidoo kale la daraaseeyey: (A) Qaabeynta geeddi-socodka; (B) Ka-qaybgalka; iyo (C) Hababka dhaqanka.

Iyada oo la eegayo dhinacyadan (*strands*) ayaa hannaanku waxaa uu fursadaha/ikhtiyaarada u kobcinayaa isaga oo:

Marka hore, daraaseynaya qaabka is-waafajinta siyaasadeed ee hadda ka dhex jira Soomaaliya, iyo kuwa u dhexeeya Soomaaliya iyo Somaliland.

Marka labaad, isaga oo danaha siyaasadeed ee qaybaha muhimka ah u kooxaynaya mowduucyo iyo arrimo.

Marka saddexaad, isaga oo aqoonsanaya meelo ay ka jiraan fursado lagu sameeyo is-waafajin siyaasadeed; kuwaas oo kala ah; waa kuwee meelaha mid ka mid ah dhinacyada oo dhammaantooda ay ka suuroobi karto in si uun loo heshiisiyo?

Marka afaraad, iyada oo lagu saleynayo xaaladda Soomaaliya in la aqoonsado waxyaabaha ay tahay in mas-kaxda lagu hayo marka laga fekerayo qaabab maamul-dowladeed oo la sameeyo mustaqbalka.

Marka shanaad, in la sameeyo fursado/ikhtiyaaro ay tixgeliyaan dadka iyo hoggaamiyeyaasha Soomaalida ah. Sameynta fursadaha/ikhtiyaarada kala duwan waxaa ay si weyn wax uga soo qaadaneysaa danaha ay tahay in la iswaafajiyo (Tallaabada 2aad), casharrada laga baran karo qaababka hadda jira (Tallaabada 1aad), danaha ay tahay in la tixgeliyo (Tallaabada 2aad), noocyada meelaha ay ka jirto fursad ayaa la daraaseynayaa iyo ar-rimaha ay tahay in la tixgeliyo (Tallaabooyinka 3 & 4), iyo qaababka farsamo ee laga soo qatey xaalado kale.

Marka lixaad, fursadaha/ikhtiyaarrada la sameeyey iyada oo la adeegsanayo hannaankan ayaa lagu xaqiijinayaa iyada oo loo geynayo qaybo badan oo dad kala duwan ah. Midda Toddaad, hirgelinta fursadaha/ikhtiyaarrada ay suurowdey in ilaa xad lagu heshiyo.

Fursado is-waafajin siyaasadeed looga sameyn karo dhinac (*strand*) kasta

QAAB-DHISMEEDKA SIYAASADEED IYO AWOOD-BAAHINTA: Iyada oo la xulanayo qaabab maamul dowladeed oo baahiya awoodda, oo dheellitira awoodda fulinta iyada oo la hubinayo in awoodda maaliyadeed loo baahiyo si daahfuran oo hufan, iyo in la dhiso dowlad-goboleedyo u habboon awoodaha heerarka kala duwan, dadka Soomaaliyeed ay ku dhisi karaan maamullo ku habboon.

NIDAAMKA (NIDAAMYADA) DOORASHADA: Iyada oo la tixgelinayo fikradaha sida codeyn wareegyo kala duwan dhacda; degaanno doorasho oo leh kuraas badan ama kursi keliya; adeegsiga shuruudo tirada ugu yar ah, kuwootooyin, iyo habab kale oo wax lagu qaybiyo; doorashooyin dad badan ama magacaabis; doorashooyin iskuxiran oo ay ku wada jiraan heerarka kala duwan ee dowladeed ayaa bixin kara habab lagu hubinayo in doorashooyinka ay muujiyaan kala duwanaanta bulshooyinka iyo danaha.

LAANTA FULINTA: Tallaabooyin lagu dhisayo qaab-dhismeedyo fulineed oo loo dhan yahay waxaa ka mid ahaan kara – laan fulin oo xubno badan ka kooban ama mid lagu kaltamo; sameynta qaabab lagu kormeero laguna dheellitiro go'aan-gaaridda laanta fulinta; in madaxda dhaqanka lagu biiriyo laanta fulinta; hubinta u daahfurnaanta dadweynaha; iyo tallaabooyin lagu dhiirrigelinayo matalaad ay helaan dadka laga tiro badan yahay iyo haweenka.

LAANTA SHARCI-DEJINTA: Si ay uga wada muuqdaan kooxaha danaha kala duwan iyo iyada oo loo marayo laanta sharci-dejinta ayaa dadka Soomaaliyeed ay tixgelin karaan in ay adeegsadaan habab tacaamul dadweyne; kaalin ay ku yeeshaan shakhsiyaad caan ah oo si dadban loo soo doorto; habab go'aan-qaadasho oo daahfuran; iyo tallaabo lagu hubinayo in ay matalaad helaan danaha dowladaha xubinta ka ah federaalka.

KA-QAYBGAL DADWEYNE: Tani waxa ay door weyn ka ciyaari kartaa hubinta is-waafajin siyaasadeed. Xiriir lala yeesho kooxaha bulshada degaanka; ka-qaybgalka dejinta siyaasadaha iyo shuruucda; waxbarasho wacyigelin dadweyne oo laga wada-qaybqaato (*interactive civic education*); iyo tallaabo si rasmi ah hoggaamiyeyaasha dhaqanka ay uga mid noqonayaan nidaamka maamulka dowladeed ayaa dhisi kara is-waafajinta iyo sharciyadda.

ARRIMAHA DHAQANKA: In golayaal la-talin oo hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada ah la dhexgeliyo laamaha fulinta iyo sharci-dejinta; iyo in la qaado tallaabooyin si rasmi ah arrimaha dhaqanka loo dhexgelinayo hannaanka dowladeed ayaa gacan ka geysan kara xoojinta is-waafajinta iyo sharciyadda.

Fursado/ikhtiyaarro is-waafajin siyaasadeed looga sameyn karo Soomaaliya iyo Somalil-and dhexdooda iyo mid walba gudaheeda

Mid kasta oo ka mid ah noocyada fursadaha/ikhtiyaaradda kala duwan ee hoos lagu sheegey waxaa ay dhammaan lixda dhinac (*strands*) isugu xireyaa qaab dowladeed oo isla jaanqaadaya. Wadajir ahaan fursadaha/ikhtiyaaradda lixda ah waxaa ay bixinayaan qaab taxan oo iskuxigxiga oo wax loo dhisi karo, mana aha talo-soojeedin; waxaa keliya oo looga danleeyahay in lagu muujiyo habab keeni kara is-waafajin siyaasadeed. Fursad/ikhtiyaar kasta waxaa uu muujinayaa faa'iidooyinka iyo halisaha siyaasadeed uu ku yeelan karo is-waafajinta, waxaana uu muujinayaa sida xulashooyin isla jaanqaadaya looga sameeyn karo guud ahaan lixda dhinacba (*strands*).

Fursadda/ikhtiyaarka nooca A waxaa ay muujineysaa Dal mideysan (dowlad dhexe oo xooggan) oo awoodda la baahiyey iyada oo loo marayo nidaam awood-baahin, aasaasiyan loo marayo sharci-dejin.

Tusaalayaal daraasad xaaladeed: Ghana; Indonesia; Ingiriiska (United Kingdom)

Fursadda/ikhtiyaarka nooca B waxaa ay muujineysaa federaal ay xubno ka yihiin dowlado, kaas oo muujinaya qaab-dhismeed la barbar-dhigi karo qaababka maamul dowladeed ee ku jira Dastuurka Federaalka Ku-meel-gaarka.

Tusaalayaal daraasad xaaladeed: Argentina; Ciraaq; Malaysia

Fursadda/ikhtiyaarka nooca C waxaa uu muujinayaa dal mid ah oo aad awoodda loo baahiyey, waana kan awoodda sida ugu badan loo baahiyey oo ah dal keliya. Fursadda/ikhtiyaarka noocan ah waxaa uu mas'uuliyado tiro yar siinayaa dowladda dhexe ee dalka, halka dowlad-goboleedyadu ay awood u leeyihiin arrimahooda guudaha.

Tusaalayaal daraasad xaaladeed: Midowga dalalka Serbia-Montenegro (2003-2006); Imaaraadka Carabta ee Midoobey

Fursadda/ikhtiyaarka nooca D waxaa uu muujinayaa qaab is-sheegasho ikhtiyaari ah, oo la dhex gelin karo mid kasta oo ka mid ah noocyada ikhtiyaaradda/fursadaha ee kala duwan. Is-sheegashada waxaa ay abuureysaa xiriir rasmi ah oo dhex mara Dal weyn iyo dal sheegta, halka dalka cid sheeganaya uu caadi ahaan is-xukun-hoosaad ballaaran uu u leeyahay arrimihiisa gudaha waxaana Dalka la sheegteyna uu maareeyn karaa gaashaandhigga iyo siyaasadda dibadda iyo mas'uuliyado kale oo la isla aqoonsadey.

Tusaalayaal daraasad xaaladeed: Bougainville oo sheegatey Papua New Guinea; New Caledonia oo sheegatey Fransiiska

Fursadda/ikhtiyaarka nooca E waxaa ay muujineysaa qaab ay isugu yimaadaan dalal badan (halkaan oo Dalalka xubnaha ka ah ay leeyihiin shakhsiyad caalami ah) waana midow qaabeysan ama konfederaal ka kooban dalal xor ah oo siyaadana leh oo laba ama ka badan ah oo leh hay'ado iyo qaabab rasmi ah oo fududeeya tacaamulka siyaasadeed iyo kan dhaqaale.

Tusaalayaal daraasad xaaladeed: Axdigii Is-dhexgalka Masar iyo Suudaan (1982); Midowga Benelux Union; Midowga Yurub; Beesha Bariga Afrika

Fursadda/ikhtiyaarka nooca F waxaa uu sidoo kale isna muujinayaa hab ka kooban dalal badan, haddana aan lahayn qaabab maamul dowladeed oo rasmi ah. Tacaamulka dhaqaale iyo kan siyaasadeed waxaa maamulaa keliya mucaahaddooyin iyo shirar ay yeeshaan hoggaamiyeyaasha dalalka iyo wasiirrada iyo wakiillada wasaaradaha ee u habboon.

Meelaha ay ka jiraan fursado iyo ikhtiyaarrada lagu soo bandhigey qoraalkan ma ahan kuwa keliya ee jira ama kuwo duuduub lagu liqo; tusaale ahaan inta ikhtiyaarrada noocyada kala duwan wax laga soo qaato ayaa mid gaar ah laga dhigi karaa.

Tusmo

Soo-koobidda nuxurka.....	i
1. Hordhac	1
1.1 Hadafka.....	2
1.2 Sida Loo Adeegsado Qoraalkan Xog-warranka ah.....	2
2. Hab qaabeysan oo loo wajaho is-waafajin siyaasadeed	5
2.1 Macnaha is-waafajin siyaasadeed	5
2.2 Hab qaabeysan oo loo sameeyo is-waafajin siyaasadeed	6
3. Daraaseynta Qaababka Markaa Jira	9
3.1 Qaababka Hadda Jira ee taabanaya guud ahaan lixda ‘dhinacba’.....	9
4. Sharaxaadda fursadaha is-waafajinta siyaasadeed	33
4.1 Tixgelinta sameynta noocyada kala duwan	33
4.2 Culeysyada iyo fursadaha.....	37
4.3 Daraasad-xaaladeedyo La-isbarbardhigayo	43
5. Noocyada kala duwan ee la isku qaadan karo	45
5.1 Noocyada fursadaha jira ee is-waafajinta siyaasadeed.....	45
5.2 Mowduucyada wada khuseeya.....	70
6. Gebogebo	73
Tixraacyada	75

Tusayaal & Jaantusyo

Jaantuska 1aad – Is-waafjainta siyaasadeed marka laga eego dhinacyada nabad-dhisidda, qaran-dhisidda, iyo umad-dhisidda	6
Jaantuska 2aad – Dhinacyada Is-waafjainta Siyaasadeed	7
Jaantuska 3aad – Wada-tacaamulka siyaasadeed	46
Jaantuska 4aad – Fursadda nooca A: Dowlad dhexe oo xooggan oo awoodda la baahiyey	48
Jaantuska 5aad – Fursadda/ikhtiyaarka B: Federaal ay dowlad-goboleedyo xubno ka yihiin	52
Jaantuska 6aad – Fursadda/ikhtiyaarka nooca C: Midnimo qaran oo aad awoodda loo baahiyey	56
Jaantuska 7aad – Fursadda/ikhtiyaarka nooca D: Is-sheegasho khiyaari	60
Jaantuska 8aad – Fursadda/ikhtiyaarka nooca E: Midow qaabeysan ee Dalal Madax-bannaan	64
Jaantuska 9aad – Fursadda/ikhtiyaarka nooca F: Tacaamul dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo ay yeeshaan Dalal madax-bannaan oo siyaado leh	69
Tusaha 1aad – Wuxuu is-barbardhigayaa qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	12
Tusaha 2aad – Is-barbardhigga qodobbada la xiriira nidaamyada doorashooyinka	17
Tusaha 3aad – Is-barbardhigidda shuruucda la xiriira hay’adda fulinta	20
Tusaha 4aad – Is-barbardhigga qodobbada ka hadlaya laanta sharci-dejinta	24
Tusaha 5aad – Is-barbardhigidda qodobbada la xiriira ka-qaybgalka dadweynaha	28
Tusaha 6aad – Is-barbardhigidda qodobbada ku saabsan arrimaha dhaqanka	30

1. Hordhac

Dhaqan-gelintii Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah iyo dhisiddii dowladda cusub ee bilihii Agoosto iyo Sebtembar 2012 kala dhacay waxaa ay keeneen fursad cusub oo Soomaaliya ay nabad iyo barwaaqo ku gaari karto. Marka laga soo tago guulahaan, arrimaha siyaaasadda iyo amniga ee ka soo if-baxay dhammaanshihii ku-meelgaarnimada ayaa fududeeyey bilaabidda wada-hadal dhex mara Soomaaliya iyo Somaliland. In kasta oo horumarkan uu rajo weyn dad gelinayo, haddana waxaa jira welwel laga qabo arrimo muhiim ah oo la xiriira amniga, maamulka dowladeed, dhaqaalaha, iyo bulshada kuwaas oo halis gelin kara guulahaan la gaarey oo keeni karaana sii socoshada ama soo laba-kacleynta colaadaha. Arrin muhiim u ah ka-faa'iideysashada horumarkan la gaarey waa in la sameeyo qaabab maamul-dowladeed oo si taabogal ah isugu keeni kara danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee kala duwan ee dadka Soomaaliyeed, ee guud ahaan Soomaaliya iyo Somaliland.

Iyada oo gobollo Soomaaliya ka tirsan ay ka soo baxeen gacanta kooxaha hubeysan, ayaa dhinacyo kala duwan ay doonayaan in la dhegeysto waxa ay doonayaan. Puntland oo muddo toban sano ka badan jirtey iyada oo aaney kormeereynin dowladda dhexe, ayaa sidoo kale muujisey shaki ay ka qabto kala dhantaalid lagu sameeyo is-maamul-hoosaadkeeda. Dadaallada lagu doonayey in dowlad-goboleedyo xubin ka ah federaalka looga dhiso koonfurta ayaa mararka qaar ahaa kuwo lagu kala fikrado duwan yahay. Wixii ka horreeyey heshiiskii Addis Ababa ee lagu dhisayey Maamulka Ku-meelgarka ah ee Jubba (27kii Agoosto 2013), ayaa iskudaygii lagu doonayey in lagu dhiso 'Jubaland' ay diiddaneyd dowladda federaalka. Marka laga soo tago oggolaanshaha iyo jawaab-kabixinta danahan siyaasadeed ee marba marka ka dambeysey codka dheer lagu soo gudbinayey, ayaa dowladda federaalku waxaa soo wajahaya arrimo mudnaan leh iyo codsiyo kala duwan oo loo soo jeedinayo, kuwaas oo ay ka mid yihiin tabantaabinta bulsho Soomaaliyeed oo isku-dhex-jirta, xallinta dhulalka ay dhinacyada kala duwan kala sheeganayaan, iyo yareynta geeddi-socodyo is-barbar-socda oo lagu dhisayo maamullo gobol iyo kuwo degaan.

Is-ximinta soo-jireenka ah ee u dhaxaysa Soomaaliya iyo Somaliland, oo ku lug leh arrimaha la xiriira siyaasadada iyo dhulka, ayaa sidoo kale weli ah culeys mug leh oo jira. Tan iyo markii ay madax-bannaanida ku dhawaaqdey sanadkii 1991, ayaa Somaliland waxaa ay sheeganeysey siyaadadeeda buuxda, halka Dowladda Dhexe ee Soomaaliya ay weli u qareemeyneyso midnimadii dhuleed ee ay Soomaaliya lahayd ka hor 1991kii.

Heshiiskii Higsiga Cusub (*New Deal Compact*) ee Soomaaliya ee ka soo baxay shirkii Bruselles bishii Sebtembar 2013 waxaa uu xoogga saarayaa muhiimadda ay siyaasad ka-wada-qaybgal ku dhisan ay u leedahay xasiloonnida iyo barwaaqada mustaqbalka. Kooxaha la fogaayo oo ay ka mid yihiin barokacayaal hal malyan ka badan ayaa waxaa gaar ahaan haysta dhibaatooyin bani'aadamnimo iyo kuwo xuquuqaha aadanaha la xiriira oo ba'an.

Waqtigaan laga baxay ku-meelgaarnimada waxaa uu bixinayaa fursad/ikhtiyaar ah in Soomaaliya iyo Somaliland ay yeeshaan wada-hadallo kale ayna sameeyaan qaab-dhismeed guud iyo habab maamul oo siyaasad ahaan is-waafaqaya. Qaababka maamul ee uu dhigayo Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah ee 2012 waxaa ay muujinayaan jiritaanka qaabab suuragal ah oo baaxad ahaan yar, maaddaama Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah uu ka tegey arrimo badan isaga oo aan xallin. Hadafka laga leeyahay Qoraalkan Xog-warranka ah waa in dadka Soomaaliyeed lagu siiyo habab ay isku waafajin karaan danahooda siyaasadeed; geeddi-socodka kasta oo isku dayayaa in uu wax ku biiriyo dhalinta nabad waarta iyo barwaaqo ay ku naalloodaan dhammaan dadka Soomaaliyeed waa in uu ahaadaa mid loo dhan yahay oo wakiillana lagu wada leeyahay.

Erey-bixinta Muhiimka ah: Soomaaliya iyo Somaliland

Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa uu soo bandhigayaa qaabab kala duwan oo la isu waafajin karo danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee kala duwan ee shakhsiyaadka, bulshooyinka, iyo kooxaha. Qaar ka mid ah qaababkan kala duwan waxaa ay ku xisaabtamayaan Somaliland oo ah dal madax bannaan halka qaabab kale ay ku xisaabtamayaan Somaliland oo qayb ka ah maamul baahsan oo Soomaaliya ay leedahay. Sidaa daraaddeed “Soomaaliya” waxaa loola jeedaa dhulkii Jamhuuriyaddii Dimuqraadiga ee Soomaaliya ee hore (wixii ka horreeyey 1991) AMA dhulkaas oo laga soo reebey Somaliland sida ay maanta u jirto, taas oo hadba ku xiran xaaladda laga hadlayo.

1.1 Hadafka

Hadafka laga leeyahay Qoraalkan Xog-warranka ah, iyo cilmi-baaristii iyo wada-tashiyadii salka u ahaa, waa in wax weyn lagu biiriyo nabadda iyo barwaaqada Soomaaliya iyo Somaliland. Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa uu soo bandhigayaa qaabab iyo qalabyo/qoraallo ay Soomaalidu u adeegsan karaan in ay ku sahamiyaan, ay ku soo saaraan, ayna ku hirgeliyaan siyaabo kala duwan oo si taabogal ah la isugu keeni karo danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee badan ee guud ahaan Soomaaliya iyo Somaliland.

Annaga oo daba-joogna hadafkaan guud, ayaa ujeedooyinka hawshani laga leeyahay waxaa ay yihiin:

1. In la bixiyo qaab-dhismeed guud iyo qalabyo/qoraallo lagu daraaseynayo/sahamiyo qaababka kala duwan ee is-waafajinta siyaasadeed.
2. In la soo ururiyo lana daraaseeyo qaababka kala duwan ee hadda jira ee soo hoosgala qaab-dhismeedka guud ee is-waafajinta siyaasadeed ee heerka qaran iyo heerarka ka hooseeya kan qaranka.
3. In la bixiyo qoraallo/qalab iyo ereyo muhiim ah si loo fududeeyo wada-hadal ay dhinacyada kala duwan ay gudahooda ama dhexdooda kaga yeeshaan qaabab maamul dowladeed mustaqbalka loo sameysan karo.
4. In la soo bandhigo lana daraaseeyo noocyada fursadaha/ikhtiyaarrada kala duwan ee aasaasiga ah ee is-waafajin siyaasadeed looga sameyn karo Soomaaliya dhexdeeda iyo mid u dhaxaysa Soomaaliya iyo Somaliland.
5. In la wadaago oo qaab-dhismeedyadan oo fursadahan/ikhtiyaarrada kala duwan “la dhexgeliyo” geeddi-socodyada wada-hadallada iyo wada-tashiyada socda iyo kuwa la qorsheeyey.

1.2 Sida Loo Adeegsado Qoraalkan Xog-warranka ah

Qoraalkan xog-warranka ah waxaa looga dan lahaa in uu noqdo “hage” uu akhristaha kala soo dhex bixi karo fikrado gacan ka siiya fududeynta is-waafajinta siyaasadeed ee Soomaaliya gudaheeda iyo midda Soomaaliya iyo Somaliland dhexdooda. Guud ahaan, qoraalkan waxaa uu si ku talagal ah u adeegsanayaa ereyga “*option/ fursad/ikhtiyaar*” halkii uu ka adeegsan lahaa “*solutions/xalal*” ama “*recommendations/talooyin*”. Qaababka ay yeelaneyso is-waafajin siyaasadeed waxaa dejin kara oo go’aansanna kara dadka Soomaaliyeed, iyada oo loo marayo geeddi-socod siyaasadeed oo loo dhan yahay lagana wada-qaybqaato. Sidaa daraaddeed, Qoraalka Xog-warranka ah, waxaa uu soo bandhigayaa tiro fikrado ah oo loogu talogaley in ay dardar-geliyaan wada-xaajooyada iyo wada-hadallada. Hadafka laga leeyahay waa in la taageero dadaalka dadka Soomaalida ah ay ku sameynayaan ayna ku hirgeliyaan qaabab is-waafajin kara danahooda. Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa loo kala qaybiyey lix qaybood:

Qaybta 1aad waxaa ay sawir guud ka bixineysaa hawsha iyo hadafka qoraalka

Qaybta 2aad waxaa ay sharxaysaa habka gudbinta, qaab-dhismeedka guud, iyo qalabka/qoraallada kale ee qaybta ka ah hab waaqici ah, qaabeysan oo loo sameeyo is-waafajin siyaasadeed.

Qaybta 3aad waxaa ay tibaaxaysaa qodobbada la xiriira is-waafajinta siyaasadeed ee ku jira qoraallada Sharci ee muhiimka ah ee Soomaalida – oo ay ka mid yihiin Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012),¹ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012), Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001), iyo Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960) – waxaana ay daraaseyneysaa sida qaababkaasi ay suuragal uga tahay in ay dhiirrigeliyaan heshiisiinta iyo is-waafajinta danaha siyaasadeed.

Qaybta 4aad waxaa ay isku-biirineysaa macluumaad lagu soo ururiyey wadatashi baahsan iyo cilmi-baaris ballaaran, waxaana ay aqoonsaneysaa waxyaabo ku gaar ah Soomaalida oo ay tahay in la tixgeliyo, meelo ay fursado/ikhtiyaaro ka jiraan, iyo qaybo kale oo loo adeegsado in ay hagaan sameynta noocyada fursadaha/ikhtiyaarrada kala duwan.

Qaybta 5aad waxaa ay soo bandhigeysaa noocyada fursadaha/ikhtiyaarrada qaabab dowladeed looga sameyn karo Soomaaliya gudaheeda ama ay u sameyn karaan Soomaaliya iyo Somaliland.

Qaybta 6aad waxaa ay bixineysaa gebogebo ku saleysan waxyaabaha lagu ogaadey Qoraalka Xog-warranka.

Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa loogu talogaley shakhsiyaadka ku hawlan ama xiiseynaya dadaallada lagu gaarayo is-waafajinta danaha siyaasadeed ee Soomaaliya iyo Somaliland, oo ay ka mid yihiin: Dowladda Federaalka ee Soomaaliya; Dowladda Somaliland; Dowladda Puntland; wakiillada siyaasadeed iyo kuwa kale ee Somaliland, Puntland, iyo maamullada soo-ifbaxaya; xisbiyada/ururrada kale ee siyaasadeed; kooxaha hubeysan ee aan ciidamada qaranka ahayn; qaybaha bulshada radyidka ah (oo ay ku jiraan aqoonyahannada, ururrada xirfadlayaasha, iyo ururrada haweenka iyo ururrada dhallinyarada); Qaramada Midoobey, Midowga Afrika iyo taageerayaasha iyo fududeeyayaasha goboleed ee kale (t.a., IGAD, Midowga Yurub); Dalalka taageera; iyo kooxaha iyo shakhsiyaadka kale ee daneynaya.

¹ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya waxaa la qorey sanadkii 2088dii waxaan si rasmi ah loo ansaxiyey sanadkii 2012. Tarjumaaddisii Ingiriisiga ahayd oo la adeegsadey markii la diyaarinayey qoraalkan waxaa la sanadkii 20009kii soo saarey National Democratic Institute (NDI) Somalia Program.

2. Hab qaabeysan oo loo wajaho is-waafajin siyaasadeed

Qabtan waxaa ay si kooban u sharxaysaa hababka loo fuliyo is-waajinta siyaasadeed (faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan habkan waxaa laga heli karaa Lifaafa II). Habka waxaa ka mid ah geeddi-socod toddoba tal-laabo ka kooban oo lafagura danaha siyaasadeed oo sameeyana fursado/ikhtiyaaro xaaladda ku gaar ah oo ah is-waajin siyaasadeed. Habkaan waxaa uu baaraa lix 'dhinac' ama qaybood oo diiradda la saarey oo bixin kara haykal/qaab-dhismeed danaha loogu tarjumi karo fursado/ikhtiyaaro maamul dowladeed oo isku xiran.

2.1 Macnaha is-waafajin siyaasadeed

Is-waajinta siyaasadeed waxaa looga danleeyahay in ay fududeyso dib-u-heshiisiinta danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee kala duwan. Habkaani waxaa uu dhiirrigelinayaan is-waafajin laba dhinac ah, ama heshiisiinta dhammaan danaha kala duwan, gaar ahaan meelaha ay wax ka dhimman yihiin, laakiin aan guud ahaan wada maqneyn, is-waafajin/heshiisiin guud. Ereyga Is-waafajin siyaasadeed waxaa soo hoosgelaya ujeedooyinka, qaababka, geeddi-socodyada, iyo natiijooyinka is-waafajinta danaha iyo aragtiyaha kala duwan ee dadka.²


Is-waafajin siyaasadeed waxaa ay keeneysaa faa'iidooyin mug leh oo ka badan kuwa ay keeni karaan habab kale ee wada-tacaamulka siyaasadeed:

- **Is-waafajin siyaasadeed waxaa ay bixineysaa fursado la isku waajinayo danaha siyaasadeed ee kala duwan oo ay xataa suuragal tahay in ay iska-soo-horjeedaan** marka la barbar-dhigo tan ay keeni karaan marka si gaar ah diiradda loo saaro "awood-wadaagista" ama habraacyo go'aan-qaadasho sharci-dejineed, iyada oo is-dhexgelineysa tiro "Dhinacyo/*Strands*" isku-soohan (Eeg *Qaybta 2.2.1*).
- **Is-waafajinta siyaasadeed waxaa ay dhaaf-siinsan tahay geeddi-socodyada ama hababka ay dadka wax haysta keliya ay hor socdaan** waxaana ay bixineysaa qaabab loo dhan yahay oo dadku ay wakiillo ku leeyihiin.
- **Is-waafajinta siyaasadeed kuma koobna nooc gaar ah oo qaab-dhismeed dowladeed ah** sidaa daraad-deedna waxaa ay daneeyayaasha siineysaa fursad ay ku wada hadlaan waxaana ay bixineysaa jajab-naanta looga baahan yahay in lagu kobciyo qaab-dhismeed maamul dowladeed oo suuragal ah oo ku gaar ah baahiyaha iyo danaha dadka Soomaaliyeed.

Is-waafajinta siyaasadeed waxaa ay gaar ahaan hab waxtar leh u tahay bulshooyinka ka soo kabanaya colaadaha. Waxaa ay qaran-dhisidda iyo ummad-dhisidda wax ugu biirin kartaa siyaabo hubinaya in ay is-dhammeystiraan ayna taageeraan nabadka; qaran-dhisidda iyo ummad-dhisidda waxaa ka dhalan kara degbanaansho-la'aan haddii aanu mid kasta lahayn meelo la iska waajin karo.

² Qeexidda Is-waafajinta siyaasadeed ee halkaan lagu bixiyey waxaa laga soo qaatay Brain Barry, "Political Accommodation and Consociational Democracy," *British Journal of Political Science* 5, no. 4 (1975): 477-505.

Jaantuska 1aad – Is-waafjainta siyaasadeed marka laga eego dhinacyada nabad-dhisidda, qaran-dhisidda, iyo umad-dhisidda



Si ay u wada shaqeeyaan saddexdaan geeddi-socod waxaa ay u baahan tahay in la s-waajiyo danaha siyaasadeed ee iska soo hor

2.2 Hab qaabeysan oo loo sameeyo is-waafajin siyaasadeed

Waaqici ahaan, is-waafajin siyaasadeed waxaa ay u baahan tahay in la helo hab is-daba-taxan oo ka kooban tallaabooyin isku wada xiran, marka laga bilaabo sahaminta ilaa hirgelinta:

Tallaabada 1aad waxaa ay daraaseyneysaa qaababka markaa jira iyo suuragalnimada is-waafajin siyaasadeed iyada oo loo marayo lixda dhinac (strands) ama meelaha diiradda la saaro.

Tallaabada 2aad waxaa ay aqoonsaneysaa ayna khariidadeyneysaa danaha siyaasadeed iyada oo lasha-yiyo lala yeelanayo falanqeyeyaal.

Tallaabada 3aad waxaa ay isu keenaysaa danahii iyo fikradihii la soo ururiyey waxaana ay soo ogaaneysaa meelo ay ka jiraan furso lagu dhisi karo is-waafajin siyaasadeed.

Tallaabada 4aad waxa ay baareysaa meelihii fursaduhu ka jireen ee la soo ogaadey/aqoonsadey waxaana ay muujineysaa waxyaabo gaar ah oo ay tahay in la tixgeliyo marka la kala dooranayo qaabab maamul dowladeed.

Tallaabada 5aad waxaa ay kobcineysaa noocyo qaab-dhismeed dowladeed oo caqligal ah oo la qaadan karo, iyada oo adeegsaneysa waxyaabo farsamo ahaan wax dhisaya oo ku fadhiya cilmi-baaris iyo lafa-gurista daraasad-xaaladeedyo siyaasad (policy) ku saleysan.

Tallaabada 6aad waxaa ay tijaabineysa ayna baareysaa noocyada kala duwan iyada oo lala xiriirayo lalana tashanayo falanqeyeyaal.

Marka uu jiro isu-tanaasul ku saabsan ikhtiyaaro gaar ah, **tallaabada 7aad** waxaa ka mid ah hirgelinta ikhti-yaaradaas.

Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa uu soo bandhigayaa macluumaadka lagu ururiyey tallaabooyinka 1aad ilaa 4aad waxaana uu ku talinayaa tiro noocyo kala duwan oo suuragal ah, sida lagu sharxay tallaabada 5aad. Sidaa daraaddeed, hadafka guud ee qoraalkan waa in laga shaqeeyo tallaabada 6aad oo noocyada kala duwan ee la qaadan karo lala qiimeeyo kuwa ay khuseeyso.


2.2.1 Lixda dhinac (*strands*) ee is-waafajinta siyaasadeed

Lixda dhinac waxaa ay u shaqeeyaan qaab meelo diiradda la saaro marka la daraaseynayo/indho-indheynayo suuragalnimada is-waafajinta, la aqoonsanayo meelaha ay fursadaha is-waafajintu ka jiraan, lana kobcinayo qaabab farsamo oo lagu gaaro is-waafajinta. Lixda dhinac waa:

- | | |
|--|----------------------------|
| 1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood/maamul-baahinta | 4. Laanta Sharci-dejinta |
| 2. Nidaamka (nidaamyada) doorashada | 5. Ka-qaybgalka Dadweynaha |
| 3. Laanta Fulinta | 6. Arrimaha Dhaqanka |

In hal dhinac (*strand*) keliya diiradda la saaro waxaa ay gacan ka geysan kartaa badinta is-waafajinta qaybo ka wada tirsan dhinac keliya, laakiin habka noocan ah waxaa uu sidoo kale noqoneyaa qalab “xarig” ku soohaya dhinacyada isaga oo si guud u muujineya sida heshiisiinta/is-waafajinta ay uga wada dhex-shaqeyneyso guud ahaan nidaamka. Habka noocan ah waxaa sidoo kale lagu saleyn karaa wada-tacaamulka siyaasadeed ee hal hay’ad oo leh shakhsiyad caalami ah (t.a. Qaran/Dal) iyo wada-tacaamul siyaasadeed oo qaabab hay’ado badan (t.a. ahaan wada-tacaamulka rasmig ah ee Qaramo/Dalal madax-bannaan ay ka yeelanayaan arrimaha siyaasadeed kuwa dhaqaale).

Jaantuska 2aad – Dhinacyada Is-waafajinta Siyaasadeed



3. Daraaseynta Qaababka Markaa Jira

Qaybtan waxaa ay daraaseyneysaa qoraallada sharciyeed ee hadda jira iyo kuwii horey u jirey waxaana ay aqoonsaneysaa habab suuragal ah oo ay dhigayaan qoraallada oo keeni karana in la is-waafajiyo danaha iyo fikradaha siyaasadeed ee Soomaaliya iyo Somaliland. Soo ururinta iyo daraaseynta qaababka markaa jira waxaa ay abuureysaa asal wax laga bilaabo waxaana ay gacan ka geysan kartaa aqoonsashada meelo si ka taabogalsan sida hadda la isugu waafajin karo danaha siyaasadeed. Daraaseynta noocan ah waxaa ay sidoo kale gacan ka geysaneysaa in la ogaado waxyaabaha ay isaga mid yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin qoraallada/shuruucda, taas oo wax ka tari karta aqoonsashada meelaha la wada daneynayo iyo in ay faahfaahin ka bixiso muhiimadda ay leedahay in is-waafajin siyaasadeed lagu sameeyo dhammaan heerar dowladeed ee kala duwan.

3.1 Qaababka Hadda Jira ee taabanaya guud ahaan lixda ‘dhinacba’

Daraaseyntan qaababka hadda jira (iyo kuwii hore) waxaa ay baareysaa qodobbada ku jira afarta dokumenti/qoraal ee soo socda: Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012); Dastuurka Dawlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012); Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001); iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960). Qaybtan waxaa ay soo bandhigeysaa qodobbo gaar ah oo la xiriira is-waafajin siyaasadeed ee ku jirta mid kasta oo ka mid ah qoraalladan (dokumentiyadan), oo loo qabanqaabiyey lixda ‘dhinac’. In kasta oo Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012) uu weli yahay mid ku-meelgaar ah, waxaa lafaguristan loogu soo darey waa in lagu muujiyo sida qodobbadu ay qabyo ahaan u shaqeyn karaan. Lafaguristan is-barbar-dhigga ah waxaa loo qaabeeyey in ay gacan ka geysato wada-hadallo kale oo laga yeesho dastuur abadi ah. Si gaar ah, daraaseyntan waxaa ay keeneysaa in ay:

- Caddeyso waxyaabaha ay isaga dhow yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah iyo Dastuurkii 1960kii (eeg *Tusayaasha 1 ilaa 6*);
- Muujiso sida qodobbada ku jirta Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah loola xiriirin karo qaababka hadda ka jira Somaliland iyo Puntland; iyo in ay:
- Aqoonsato (soo ogaato) meelo ay ka jiraan fursado is-waajin siyaasadeed (eeg *Qaybta 4.2 Fursadaha iyo Culeysyada*) iyo sidoo kale casharada laga bartey waayo-aragnimadii laga dhaxley hirgelinta (eeg *Qaybta 4.1 Waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo marka la sameynayo fursadaha/ikhtiyaarrada*).

In kasta oo Dastuurkii 1960kii uusan haatan dhaqangal ahayn, haddana falanqeeeyaasha ayaa badanaa tixraaca oo soo xigta dokumentigaa si uu u hago qaababka wax loo dhisayo mustaqbalka. Dastuurkii 1960 waxaa uu sidoo kale dad siinayaa taariikhda koboca xiriirka Soomaaliya iyo Somaliland.

3.1.1 Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood/xukun baahinta

■ Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012)

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu dhigayaa in Soomaaliya ay tahay Dal/Qaran Federaal ah. Awood-baahinta si faahfaahsan loogama hadlin; qoraalku dastuurka keliya si kooban ayaa uu u sharxayaa sida ay mas’uuliyadaha u kala qaybsanayaan heerarka dowladeed ee kala duwan. Bishii Luuliyo 2013^{ka} baarlamaanku waxaa uu ansaxiyey hindise sharci Xeerka Dowladaha Hoose kaas oo bilaabaya in uu qeexo mas’uuliyadaha xukuumadaha gobollada iyo degmooyinka, haseyeeshee ilaa bishii Disembar 2013 hindisahaasi weli looma saxiixin si uu sharci u noqdo.³

³ Xeerka Dowladaha Hoose (Luuliyo 2013) (Som.).

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu dhigayaa laba heer dowladeed: heerka dowladda federaalka ah iyo heerka “dowladaha xubinta ka ah federaalka.”⁴ Dowlad xubin ka ah federaalka waxaa dhisaya laba gobol ama tiro ka badan oo gobollada hadda jira ah; gobollada aan dowlad-goboleed ku biirin waxaa maamuleysa dowladda federaalka ah muddo ilaa laba sano ah ama ilaa ay gobollo kale ku biirayaan si ay u noqdaan dowlad-goboleed.⁵ Golaha Shacabka ayaa go’aaminaya tirada iyo xuduudaha dowladaha xubinta ka noqonaya federaalka.⁶ Hindisaha Sharci ee Dowladaha Hoose ee bishii Luuliyo 2013 kama-hadlayo arrimaha la xiriira dowladaha Xubinta ka ah Federaalka.

Arrimaha dibadda, difaaca qaranka, muwaadinnimada iyo socdaalka, iyo siyaasadda lacagta waa mas’uuliyado ay leedahay dowladda federaalka.⁷ Awoodaha kuwaan ka soo harey “*waxaa ka wada xaajoonaya kana wada heshiinaya dowladda federaalka iyo dowladaha xubinta ka ah federaalka.*”⁸

Tiro mabaa’dii ah oo la xiriira awood-baahinta arrimaha maaliyadda ayaa ku jira Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, si ay u hagaan wada-tacaamulka heerarka dowladeed ee kala duwan, kuwaa oo ku baaqaya (1) in kheyraadka loo qaybsado si caddaalad ah, iyo (2) in mas’uuliyadda dakhli-ururinta iyo mas’uuliyado kale in la siiyo heerka dowladeed ee sida ugu waxtarka badan u fulin kara.⁹

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012)

Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (“Dastuurka Puntland”) waxaa uu qeexayaa in Puntland ay qayb ka tahay Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.¹⁰ Dastuurku waxaa uu si kooban u sheegayaa maamulka dowladeed iyo qodobbo kale oo ka hadlaya Puntland oo keliya.

Dastuurka Puntland waxaa uu awoodaha maamul ka qaadayaa dowlad-goboleedka waxaa uu geynayaa gobollada iyo degmooyinka Puntland, isaga oo dhigaya in guddoomiye gobol loo magacaabay gobollada iyo golayaal degmo oo si toos ah loo soo dooranayo.¹¹ Degmo kasta waxaa ay leedahay wax xoogaa madax-bannaani dhaqaale iyo mid maamul ah, sida uu si guud uga Hadleyo Qodobka 125aad ee Dastuurka Puntland, laakiin sida gaar ahaan loo qaybinayo awoodaha iyo waajibaadyada waxaa go’aaminaya sharci.¹² In kasta oo shuruuc badan ay ka hadlayaan baahinta adeeg-bixinta, haddana shuruucdan waa ay ku guul-darreysteen in ay caddeeyaan sida ay mas’uuliyadaha u qaybsanayaan heerarka maamul ee dowlad-goboleedka, gobolka, iyo degmada.¹³ Arrintani waxaa ay keentey in xeerarka dhaqanka iyo qaab-dhismeedka qabaa’ilka badanaa lagu saleeyo maamulka iyo adeeg-bixinta heer degaan.¹⁴ Adeegyada waxaa badanaa bixiya bulshada rayidka ah, ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo hay’adaha caalamiga ah.

4 DASTUURKA FEDERAALKA KU-MEELGAARKA AH, Agoosto 1, 2012 (Som.) qod. 48(1).

5 Ibid. Qodobka 48(2).

6 Ibid. Qodobka 49.

7 Ibid. Qodobka 54.

8 Ibid.

9 Ibid. Qodobbada 50 iyo 125.

10 DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, Disembar 2009 (Som.) qod. 4(3).

11 Ibid. Qodobbada 120, 121, 123.

12 Ibid. Qodobka 120(4) iyo (5).

13 Dowladda Puntland, Sharci Lr. 7 ee soo baxay 23 Agoosto 2006 ayaa tilmaamaya maamulka iyo golayaasha degmooyinka. Sharcigu waxaa uu dhigayaa sida ay u wada tac mulaya golayaasha degmooyinka Wadaaradda Arrimaha Gudaha ee Puntland. Eeg Geopolicity, *Study on Sector Functional Assessments Within Education, Health & WASH in Puntland*, Geopolicity, U.N. Joint Program on Local Governance and Decentralized Service Delivery, (April 15, 2012), 9-10.

<http://jplg.org/documents/reports%5CSector%20Studies%5CPuntland%20-%20Sector%20Functional%20Assessment%20-%20FINAL%20REPORT%20-%20April%2018%202012.pdf>.

14 Ibid.

Intaa marka laga soo tago, waxaa jira in aad ay u kala duwan yihiin bixinta adeegyada bulshada ee gobollada iyo degmooyinka Puntland gudaheeda, taasina ay sababtey kaabayaal la'aan iyo miisaaniyad-yaraan.¹⁵ Degmooyinku kama sinna ilaha dakhliga, taas oo saameyn ku yeelatey adeeg-bixinta. Degmooyinka ayaa Dowladda Puntland ay u kala qaybisey saddex darajo oo kala ah: 'A', 'B', iyo 'C'. degmooyinka darajooyinka A iyo B badi-doodu waa ay kaga wanaagsan yihiin bixinta adeegyada iyaga oo ururin kara dakhli ay ku bixiyaan adeegyadaas marka laga soo tago lacagaha ay dowladdu siiso. Degmooyinka darajada C ma laha dakhli degaan oo kaas oo kale ah sidaa daraaddeedna waxaa ay la kacaa-kufaaan in ay bixiyaan adeegyo la mid ah kuwa degmooyinka darajooyinka A iyo B.¹⁶

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ("Dastuurka Somaliland") waxaa uu dhulka Somaliland u aqoonsanayaa qaran madax-bannaan, oo leh siyaadadiisa, goonina isaga taagey Soomaaliya inteeda kale laga soo bilaabo sanadkii 1991.¹⁷ Kuma jiraan qodobbo ka hadlaya xiriir qaab-dhismeed (maamul) kala dhexeeya Jamhuuriyadda Soomaaliya, marka laga reebo in uu muujinayo/sheegayo madax-bannaanida Somaliland.

Dastuurka Somaliland waxaa uu dhisayaa maamul dowladeed saddex heer ah. Dowladda dhexe oo kor ka maamuleysa guud ahaan dhulka Somaliland, oo u kala qaybsan gobollo ay maamulaan golayaal gobol. Gobollada waxaa ay u kala qaybsan yihiin degmooyin, ay maamulaan golayaal degmo. Golayaasha gobol iyo kuwa degmo waxa ay leeyihiin mas'uuliyado kooban; golayaasha waxaa ay dejin karaan oo keliya xeer-hoosaadyo (*by-laws*)¹⁸ mana laha awoodo siyaasad-dejin.¹⁹ Waajibaadka golayaasha degmooyinka waxaa waajibinaya sharci.²⁰

Iyada oo looga dan leeyahay isku-filnaanshaha adeeg-bixinta, ayaa dastuurku waxaa uu dowladaha gobollada iyo degmooyinka u oggolaanayaa in ay cashuuro toos u soo rogaan.²¹ Degmooyinka baaxadda weyn ee xooggan (ay Dowladda Somaliland ku magacowdo degmooyinka darajada 'A') waxaa si wanaagsan u bari-taara dakhli cashuureed waxaana ay si hufan u abuureen dakhli ku filan bixinta kharashaadka hawlahooda shaqo ayna ku bixin karaan qaar ka mid ah adeegyada dadweynaha.²² Taas beddelkeeda, degmooyinka ay kartidoodu yar tahay (oo Dowladda Somaliland ay ku tilmaanto degmooyinka darajooyinka 'B', 'C', iyo 'D') ay la kacaa-kufayaan in ay soo qaadaan dakhli ugu filan bixinta kharashaadka hawlahooda, taas oo muujineysa in ay haystaan culeysyo la mid ah kuwa haysta degmooyinka Puntland.²³

Lacagaha dowladaha heerarka kala duwan ay isa siiyaan kuma guuleysan in ay buuxiyaan farqiga dakhli ee u dhexeeya degmooyinka, taas oo bixinta adeegyada dadweynaha ee degmooyinka B, C, iyo D ka dhigeysa mid culeys ku ah.²⁴ Intaa waxaa dheer, qaybinta kheyraadka ee dowladda dhexe oo aan marna ahayn mid la saadaalin karo taas oo sii adkeysey in qorsheyaal la dejiyo.²⁵ Qoondoynta maaliyadda la siiyo degmooyinka waxaa ay u

¹⁵ Ibid vii. Daraasaddan waxaa ay gaar ahaan daraaseyneysey adeegyada waxbarshada, caafiamadka iyo biyaha, fayadhowrka iyo nadaaf-adda ee Puntland.

¹⁶ Ibid. x.

¹⁷ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 1.

¹⁸ Xeer-hoosaadyadu waa shuruuc heerka labaad ah oo aan ka hor imaan Karin shuruucda (eeg DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 111.

¹⁹ Ibid. Qodobbada 111 iyo 112.

²⁰ Eeg Dowladda Somaliland, Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka ee 23/2002 (oo wax laga beddeley 2007) ee uu Abdurahman Adan Mohamoud kaga munaqaashoodey *Local Governments in Somaliland: Challenges and Opportunities*, (Hargeisa: April 2012): 6. http://ward-heernews.com/Articles%202012/April/11_%20Local%20Governments%20in%20%20Somaliland_%20Challenges%20and%20Opportunities_abdirahman.pdf.

²¹ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 112(3).

²² Degmooyinka waxaa darajooyinka lagu kala siiyaa Sharciga Gobollada iyo Degmooyinka ee Lr. 23/2002; haseyeeshee markii qoraalkan la daabacayey lama haynin isaga oo Af-Ingiriisi.

²³ Mohamoud, *Local Governments in Somaliland*, 6.

²⁴ Ibid, 9; Geopolicity, *Study on Sector Functional Assessments*, x. (Sidoo kale eeg: bogagga. viii, ix, xii, 63,127, 138).

²⁵ Mohamoud, *Local Governments in Somaliland*, 9.

janjeedhaa magaalooyinka waaweyn ee horeyba u lahaa awoodo dakhli ururin oo ilaa xad wanaagsan.²⁶ Tani waxa ay keentey in magaalooyinka yaryar iyo degaannada miyiga ah ay ku soo hagaagto qayb yar oo ka mid ah maaliyadda la kala qoondeeyo, taas oo sii joogteyneysa culeysyadii la xiriiyey adeeg-bixinta ee horey u jirey.²⁷

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurkii 1960 ee Jamhuuriyadda Soomaaliya (“Dastuurkii 1960kii”) waxaa uu dhaqan galey ka dib markii ay midoobeen labadii maxmiyadood ee Soomaalida ee ay kala gumeysanayeen Britain (Ingiriiska) iyo Talyaaniga oo ay Soomaaliyana xorowdey.

Dastuurkii 1960kii loogu talogaley dal dowlad dhexe oo xooggan leh (*unitary state*).²⁸ Sharciga Maamulka Doorashooyinka Maamulka Degaanka iyo Golayaasha Degaanka waxaa uu dhulka u qaybiyey siddeed gobol; mid kasta oo ka mid ah uu xukumo guddoomiye gobol oo hoos taga Wasaaradda Arrimaha Gudaha.²⁹

Dastuurkii 1960kii ma lahayn qodobbo tilmaamaya qaab nidaamsan oo loo baahinayo hawlaha ama mas’uuliyadaha; dokumentigu waxaa uu bixiyey oo keliya tilmaan guud oo ah in awood-baahin la sameeyo halkii suuragal ah.³⁰ In kasta oo ay taasi jirtey, haddana dowladdii Soomaaliya waxaa ay noqotey mid xukunkeedu uu dowladda dhexe ku soo ururayo marba marka ka dambeysa, iyada oo shatiyada ganacsiga, adeegyada sharciga, waxbarashada sare, iyo qorista shaqaalaha dowladda ee rayidka ah dhammaantoodba laga maamulayey Muqdisho.³¹ Tallaabooyin lagu baahinayo awoodaha maaliyadeed ayaa lagu go’aaminayey shurci-dejin, ay ku jireen qodobbo ka hadlaya dakhliga, kharashaadka, iyo maamulka.³²

Tusaha 1aad - Wuxuu is-barbardhigayaa qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Qaab-dhismeedka siyaasadeed	<ul style="list-style-type: none"> Qaab federaal oo laba heer ka kooban (Qod 48aad): (1) dowlad federal ah (2) dowlado xubin ka ah federaalka iyo kuwo degaan Madax-weyne, Ra’iisul Wasaare + Baarlamaan laba aqal ka kooban 	<ul style="list-style-type: none"> Dowlad dhexe oo leh heerar maamul oo kuwa qaran ka hooseeya (Qod 1aad) Madax-weyne, Ra’iisul Wasaare + Gole Wasiirro, Baarlamaan hal aqal ka kooban
Awood-baahinta siyaasadeed	<ul style="list-style-type: none"> Dowladaha xubnaha ka ah federaalka waxaa ay go’aansan karaan qaab-dhismeedkooda dowladeed (Qod 120aad) 	<ul style="list-style-type: none"> Dastuurka kuma jiro qodob tilmaamaya Siddeed gobol, oo ay maamulaan guddoomiyeyaal gobol oo la soo magacaabey
Awood-baahinta maamul	<ul style="list-style-type: none"> Dowladaha xubnaha ka ah federaalka waxaa ay go’aansan karaan qaab-dhismeedkooda dowladeed (Qod 120aad) 	<ul style="list-style-type: none"> Sharci ayaa qeexi doona (Qod 86aad): si sii kordheysa ayaa xukunku uu xarunta dhexe ugu soo ururey

²⁶ Eeg, Ibid. 9. Labada magaalo ee ugu weyn, Hargeysa iyo Burco, ayaa loo kala qoondeeyey ku dhowaad kalabar lacagaha la bixiyo, taas oo keentey in kala-barka kale ay wada qaybsadaan degmooyinka kale ee soo harey.

²⁷ Ibid.

²⁸ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, Luuliyo 1, 1960 (Som.), qod. 1.

²⁹ Sharciga Doorashooyinka Maamullada Degaanka iyo Golayaasha Degaanka, Sharci Lr. 19 /1963 (Som.) Eeg Ioan M. Lewis and James Mayall, *A Study of Decentralised Political Structures for Somalia: A Menu of Options*, (London School of Economics and Political Science, August, 1995), 6.

³⁰ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, Luuliyo 1, 1960 (Som.), qod. 86.

³¹ Cabdirahman Jimcaale, *Consolidation and Decentralization of Government Institutions*, (Hargeysa: Academy for Peace and Development, Hargeysa, Somaliland, (2002), 13.

³² Eugene Cotran, “Legal problems arising out of the formation of the Somali Republic,” *International & Comparative Law Quarterly* 12, no. 3 (July 1963): 1024, <http://www.jstor.org/stable/756301>.

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Awood-baahinta maaliyadeed	<ul style="list-style-type: none"> • Sharci ayaa qeexi doona (Qod 50, 122, 125) • Kheyraadka dabiiciga ah: sharci ayaa qeexi doono (Qod 44) • Awoodda iyo mas'uuliyadda dakhli-ururinta oo loo xil-saaro hadba heerka dowladeed ee ku habboon (Qod 125) • Kheyraadka dalka oo si caddaalad ah loo qaybsado (Qod 50) 	<ul style="list-style-type: none"> • Qodob tilmaamaya kuma jiro dastuurka

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka dastuurrada

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah iyo Dastuurka Somaliland waa ay kala duwan yihiin taas oo ay sabab u tahay sida kala duwan ee ay u kala arkaan Somaliland. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu Somaliland u arkaa in ay tahay dowlad xubin ka ah federaalka, halka Dastuurka Somaliland uu Somaliland u arko Qaran madax-bannaan. Haseyeeshee haddii Somaliland ay ku soo biiri lahayd Jamhuuriyadda Federaalka ah, qoddobada tilmaamaya qaab-dhismeedka siyaasadeed ee ku jira Dastuurka Somaliland waxaa ay la jaanqaadi lahaayeen Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah. Tusaale ahaan, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu dowladaha xubnaha ka ah federaalka u oggolaanayaa in ay doortaan qaabkooda maamul dowladeed mana xaddidayo tirada heerarka dowladeed ee ka hooseynaya heerka dowladaha xubinta ka ah federaalka. Tani waxaa ay Somaliland u oggolaaneysaa in ay sii lahaato qaab-dhismeedkeeda maamul siyaasadeed iyo sidoo kale kuwa gobolladeeda iyo degmooyinkeeda.

Ujeeddada loo soo bandhigayo aragtida ka soo qaadka ah waa keliya in loo adeegsado is-barbardhigid iyo in si wanaagsan loogu fahmo sida qodobbada Dastuurka Soomaaliya iyo dokumentiyada kale ay u wada tacaamalaayaan haddii ay noqdaan hal dowladood. Haddii Somaliland loo tixgeliyo Qaran siyaadadiisa leh, oo madax bannaan waxaa ay is-barbar-dhigiddaasi ka dhigeysaa mid aan loo baahneyn sidaa daraaddeedna waa ay yar tahay lafagurista is-barbardhig ee lagu sameeyey natiijada noocaas ah.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah iyo Dastuurka Puntland waa kuwo wada jaanqaadi kara; xeerarka Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee la halmaala dowladaha xubnaha ka ah federaalka waxaa ay Puntland u oggolaanayaan in ay lahaato hay'adeeda dowladeed iyo maamulladeeda degaan. Dastuurka Puntland iyo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa ay sidoo kale isku si u arkaan in loo baahan yahay wada-xaajoodyo go'aan looga gaaro mas'uuliyadaha Puntland ay yeelaneyso iyada oo ah dowlad xubin ka ah federaalka. In kasta oo Dastuurka Puntland uu isu arko in uu qayb ka yahay Soomaaliya, haddana waxaa uu sidoo kale sheegayaa in ilaa laga dhammeystiro Dastuur Federaal ah oo lagu meelmariyey afti dadweyne, Puntland ay lahaaneyso awood Dowlad madax-bannaan.³³ Qodobbada dib-u-eegis ayaa lagu sameyn karaa haddii Soomaalidu ay ku guuleysan waayaan in ay ku heshiiyaan nidaam federal ah ama xasiloonni-darro ay ka sii jirto qaybo kale oo ka tirsan Soomaaliya.³⁴

Lagafuristaan is-barbardhigga ah waxaa ay sidoo kale faahfaahineysaa tiro arrimo ku imaan kara qaab kasta oo maamul dowladeed. Tusaale ahaan, Somaliland iyo Puntland oo labaduba culeysyo isu dhow ka haystaan hirgelinta xukun-baahin maaliyadeed oo hufan oo taabagalna ah. Arrintan ayaa waxaa ay sii muujineysaa culeyska ay leedahay qaabeynta/qorsheynta habab awood-baahin oo awood u leh wax ka qabashada baahiyaha iyo kartida/awoodaha kala duwan ee qaybaha ay ka kooban tahay.

³³ Ibid. Qodobbada 4(3) iyo (4).

³⁴ Ibid. Qodobka 4(4).

Isku-keenidda danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed

Qaab-dhismeed siyaasadeed oo u janjeera mid dhexda laga maamulo, sida kan Dastuurkii 1960^{kii}, ayaa lagu gaari karaa is-waafajin siyaasadeed oo heer sare ah, waa haddii la helo in muwaadiniintu ay si toos ah u sheegaan waxa ay doorbidayaan ayna dowladda dhexe ku kormeeraan nidaam iyo qaabab doorasho oo loo dhan yahay ee guud ahaan dhinacyada (*strands*) kale. Haseyeeshee, awood-baahin si liidata loo hirgeliyo waxaa sidoo kale ka dhalan karta maamul-xumo iyo dhaqdhaqaaqa bulsho-dhaqaale oo yaraada.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu oggolaanayaa in wax badan oo ka mid ah qaybinta awoodaha iyo kheyraadka la go'aamiyo waqtiga, taas oo iyana muwaadiniinta u oggolaaneysa in ay si toos ah u sheegaan waxyaabaha ay door-bidayaan. Wada-xaajoodiyadan loo oggolaadey in ay dhex maraan dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka waxaa ay sidoo kale bixinayaan fursad wax la isku waafajin karo iyaga oo dowladaha xubnaha ka ah federaalka u oggolaanaya in ay u qareemeeyaan in maaliyadaha iyo awoodaha loo qoondeeyo qaab ku habboon baahiyahooda iyo awoodahooda.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa laga yaabaa in uu bixiyo qaab guud oo tixgelin kara qaar ka mid ah danaha Soomaalida (gaar ahaan kuwa door-bidaya in la helo hal maamul), laakiin qaab-dhismeedyada dowladda dhexe ee adag iyo kan federaalka ee la soo bandhigey waa ay ka gaabinayaan is-waafajinta danaha kuwa laga yaabo in ay doonayaan in si buuxda u helaan nidaam hay'ado badan ka kooban, sida nidaam konfederaal ah ama beel dhaqaale. Qaybo ka mid ah Dastuurkii 1960 ayaa sidoo kale laga yaabaa in ay u habboonaadaan heshiisyo mustaqbalka dhaca.

3.1.2 Nidaamyada doorashooyinka

■ Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)

Dhinaca nidaamyada doorashooyinka, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu keliya sheegayaa in shuruuc gaar ah oo hagaya doorashooyinka, xisbiyada siyaasadeed, iyo cod-bixinta ay qeexi doonaan shuruuc gaar oo uu soo saaro Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka (waqtiga qoraalkan la qoran sharcigan weli lama meelmarin).³⁵

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxaa si aan toos ahayn loogu soo doortaa cod saddex-meelood laba oo uu ka helo labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.³⁶ Ra'iisul wasaaraha waxaa maacaabaya madaxweynaha waxaana golaha wasiirada magacaabaya ra'iisul wasaaraha.³⁷ Xubnaha baarlamaanka toos ayaa loo soo dooranayaa: dhammaan cod-bixiyeyaasha ku dhex sugan Jamhuuriyadda Federaalka ah ayaa dooranaya xubnaha Golaha Shacabka waxaana cod-bixiyeyaasha ku dhex sugan dowlad xubin ka ah federaalka ay dooranayaan xubnaha Aqalka Sare (Aqalka sare waxaa uu wakiil ka yahay danaha dowladaha xubnaha ka ah federaalka).³⁸

Nidaamyada doorashooyinka ee degaanka iyo kuwa dowladaha xubnaha ka ah federaalka waxaa lagu nidaaminayaa dastuurrada dowladaha xubinta ka ah federaalka.³⁹

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012)

Muddadii u dhaxaysey 1998 ilaa 2008, isimada, oo ah gole la-tashi oo ka kooban odeyaasha/hoggaamiyey-aasha beelaha, ayaa ansaxinnayey xubnaha baarlamaanka qaab ku fadhiya magacaabista beelaha iyo jilib-yada. Sanadkii 2008, dowladda Puntland iyo isimada ayaa soo xulay guddi doorashooyin oo gacan ka geysta

³⁵ DASTUURKA FEDERAALKA KU-MEELGAARKA AH, Agoosto 1, 2012 (Som.), qod. 47.

³⁶ Ibid. Qodobka 89.

³⁷ Ibid. Qodobbada 90 iyo 100.

³⁸ Ibid. Qodobbada 64(1), 71, iyo 72.

³⁹ Ibid, Qodobka 120.

magacaabista xubnaha baarlamaanka iyo tartamayaasha madax-weynaha iyo madax-weyne ku xigeenka, iyo maamulidda doorashooyinka mustaqbalka.⁴⁰ Bishii Agoosto 2012, Golaha Wakiillada ayaa meel-mariyey sharci maamulaya doorashooyinka degmooyinka, oo la qorsheeyey in ay bilaabmaan bartamaha 2013 laakiin goor dambe dib loo dhigey.⁴¹

Isimada ayaa sidoo kale door ka ciyaarey soo xulidda liis tartamayaaal tiro kooban ku qoran yihiin ee madaxweynaha iyo madax-weyne ku-xigeenka kuwaas oo markaa uu u codbixiyo Golaha Shacabka. Doorashooyinka guud ee madaxweynaha iyo madax-weyne ku xigeenka ayaa la qorsheeyey in la qabto 2014.

Dastuurka Puntland waxaa uu dhisayaa nidaam xisbiyo badan. Saddex urur siyaasadeed oo codadka ugu badan ka heley doorashooyinka degmooyinka ayaa noqonaya saddexda xisbi siyaasadeed ee Puntland kana qaybqaadanaya doorashooyinka baarlamaanniga ah.⁴² Soo xulidda xisbiyada siyaasadeed ee rasmiga ah labadii doorashoba mar.⁴³ Dastuurku waxaa uu sidoo kale mamnuucayaa xisbiyada ku saleysan qabiil iyo jilib.⁴⁴

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Dastuurka Somaliland waxaa uu dhigayaa in madaxweynaha iyo madax-weyne ku-xigeenka wadajir ahaan loogu doorto doorasho guud oo toos ah oo ay guuleystaan kuwa hela codadka ugu tirada badan (*the first-past-the-post system*); tani waxaa sidoo kale sheegaya Xeerka Doorashada ee 2001.⁴⁵ Nidaamka doorashada ee baarlamaanka laguma qeexin dastuurka. Taas beddelkeeda, Xeerka Doorashada ee 2005 (oo ka sarreeya Xeerka Doorashada ee 2001) ayaa dhigaya nidaam doorasho oo ku dhisan saamigal oo leh liisas xisbi oo furan oo degmooyin xubno badan helaya.⁴⁶

Ma jiraan qoddobo dastuuri ah oo ka hadlaya doorashada xubnaha Golaha Guurtida (aqalka sare ee baarlamaanka ama Guurtida). Xubnaha waqtigaan ee Golaha Guurtida waxaa in ay xilka hayaan muddo lix sano ah si aan toos ahayn loogu soo doortey Shirweynihii Beelaha Somaliland ee dhacay 1997^{dii} waxaana ay muddo-kordhin sameysteen saddex jeer.⁴⁷ Kuraasta bannaanaata waxaa buuxiya qof qaraabo dhow la ah xubintii hore, taas oo aan u baahneyn oggolaansho rasmi ah oo dhaafsiintan tan Golaha Guurtida iyo madaxweynaha.⁴⁸ Haweeney keliya ayaa ka mid noqotey Golaha Guurtida.⁴⁹

⁴⁰ Pat Johnson, ed., *The Putland Experience: A Bottom-up Approach to Peace and State Building* (Interpeace, 2008).

⁴¹ "Somalia: Puntland passes district electoral law," Garowe Online, August 7, 2012, http://www.garoweonline.com/artman2/publish/Somalia_27/Somalia_Puntland_passes_district_electoral_law.shtml.

⁴² DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, Dis. 2009 (Som.), qod. 46(3).

⁴³ Ibid. Qodobka 46(4).

⁴⁴ Ibid. Qodobka 46(5).

⁴⁵ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod 83; Xeerka Doorashooyinka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Xeerka Doorashooyinka Degaanka (Xeer Lr.: 20/2001) (Somaliland) waxaa uu ku saabsan yahay doorashada tooska ah ee madaxweynaha iyo madax-weyne ku-xigeenka jamhuuriyadda shantii sanoba mar, iyo sidoo kale in shantii sanoba la doorto dhammaan golayaasha degmooyinka degaannada.

⁴⁶ Jamhuuriyadda Somaliland, Xeerka Doorashada Golaha Wakiillada, Xeer Lr. 20-2/2005, Qodobka 10aad; Jamhuuriyadda Somaliland, Xeerka doorashada Madaxweynaha iyo Golayaasha Degmooyinka, Xeer Lr. 20/2001, Qodobka 59.5. Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan shuruudaha lagu maamulo matalaadda saamigalka ah ee Somaliland, eeg International Republican Institute, *Parliamentary Election Assessment Report*, (September 29, 2005) 10-11.

⁴⁷ Mashruucii Sharci ee ugu dambeeyey ee Golaha Guurtida, oo uu ansaxiyey Golaha Wakiillada 16kii Sebtembar 2006, waxaa uu markii ugu horreysey soo jeediyey doorashooyin toos loogu soo dooranayo Guurtida. Golaha Guurtida ayaa markaa ka dib eegey oo markaan diidey mashruuca sharci waxaana ay muddo kordhin sameysteen afar sano oo kale. Doorashadii madaxtooyada ee 2010kii la qabtey ka dib, muddadii Golaha Guurtida ayaa mar kale lakordhiyey ilaa 2012. Eeg Somaliland parliament gets extension amid opposition and public objection, *Somaliland Press*, September 7, 2010, <http://somalilandpress.com/somaliland-parliament-gets-extension-amid-public-and-political-anger-18098>.

⁴⁸ Mohamed Fadal, *Institutionalizing Democracy in Somaliland*, (Social Research and Development Institute, 2009).

⁴⁹ Faaduma Jaamac Ileeeye ayaa ka mid ahayd 2009 ilaa 2013. Ibrahim Hashi Jama, *Somaliland Electoral Laws* (Somalilandlaw.com, 2009), 6, http://www.somalilandtimes.net/sl/2009/368/Somaliland_Electoral_Laws_Handbook_2008PP.pdf; iyo Yusuf M. Hasan, "Somaliland: Only Woman Guurti Member Resigns," *Somaliland Sun*, March 3, 2013, <http://somalilandsun.com/index.php/politics/2394-somaliland-only-women-guurti-member-resigns>.

Dastuurka Somaliland saddex xisbi oo keliya ayaa uu u oggol yahay in ay isu-diiwaangeliyaan. Xisbiyadaasna ma noqon karaan kuwo ku dhisan goboleysi ama qabyaalad.⁵⁰ Xeerka lagu maamulayo diiwaangelinta xisbiyada siyaasiga ah waxaa wax laga beddeley sanadkii 2011, waxaana uu hadda oggol yahay “dhisidda ururro siyaasadeed.” Ururrada siyaasadda ayaa ku tartama doorashooyinka degaanka, waxaana saddexda xisbi ee ugu sarreeya oo guud ahaan Somaliland xubno ku leh ay sharci u yeelanayaan in ay u tartamaan labada doorasho ee xiga ee madax-tooyada iyo baarlamaanka.⁵¹ Doorasho degaan kast aoo xigta (tobankii sanoba mar) waxaa jiraya fursad ay ururro cusub ay tartanka ku soo galaan.

Dastuurkan waxaa ku jira qodob sheegaya in la baajin karo doorashooyinka Golaha Wakiillada marka ay jiraan xaalado degdeg ah, sida dagaal, nabadgelyo-xumo, ama aafayin qaran oo ba’an.⁵² Haddii ay suuroobi weydo duruufo la xidhiidha nabadgelyada darteed in la qabto doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka marka muddadii xilkoodu dhammaato, waxaa Golaha Guurtida waajib ku ah in ay muddada xilka u kordhiyaan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha.⁵³ Tobankii sano ee u dambeeyey, labadaan faqraddood ayaa looga faa’iideystey in dib loogu dhigo doorashooyinka baarlamaanka iyo tan madaxtooyada labadaba. Haweenku wakiillo tiro yar ayaa ay ku leeyihiin kuraasta xilalka dowladeed ee doorashada ku yimaada ee Somaliland.

■ Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurkii 1960kii waxaa uu dhigayey in madaxweynaha ay soo doortaan Golaha Shacabka, kaas oo u baahnaa in uu helo aqlabiyad saddex-meelood laba wareegga kowaad iyo kan labaad iyo aqlabiyad hal –dheeri ah waareegyada ku xiga.⁵⁴ Ra’iisul wasaaraha waxaa magacaabayey madaxweynaha.⁵⁵ Shuruucda doorashooyinka ee ka baxsan madaxweynaha xeer ayaa qeexayey.

Xeerkii Doorashooyinka Siyaasadeed ee soo baxay 1964 waxaa uu abuurey nidaam doorasho baarlamaan oo saamigal ku dhisan.⁵⁶ Doorashadii baarlamaanka ee ugu horreysey ee la qabtey 1964, labataan iyo kow xisbi ayaa taageerey musharaxiin iyada oo in ka badan sagaal xisbi siyaasadeed ay ku guuleysteen kuraasi ay ka heleen Golaha Shacabka.⁵⁷ Doorashadii ku xigtey ee la qabtey 1969 tirada xisbiyada siyaasadeed aad bey u korodhey, iyada oo lixdan iyo afar xisbi ay u tartameen kuraasiga Golaha Shacabka, iyada oo qaar badan oo xisbiyadaa ka mid ah ay matalayeen dano qabiil.⁵⁸

Dastuurkii 1960^{kii} waxaa uu sidoo kale oggolaay in muddada xilka ee baarlamaanka ama madaxweynaha la beddelo, laakiin beddelidda lagu sameynayo ma khuseynayo baarlamaanka waqtigaa jira ama madaxweynaha waqtigaa xilka haya.⁵⁹

⁵⁰ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 9.

⁵¹ Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda – Xeer Lr. 14/2011 (Som.); “Somaliland Political Parties: Somaliland Political Parties and Associations,” Somalilandlaw.com, waxaa la eegey Nofember 6, 2013. http://www.somalilandlaw.com/xeerka_xisbiyadda.htm.

⁵² DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 42(3).

⁵³ Ibid., Qodobka 83(5).

⁵⁴ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, Luuliyo 1, 1960 (Som.), qod. 70.

⁵⁵ Ibid., Qodobka 78.

⁵⁶ Xeer Lr.4 ee soo baxay 22kii Jannaayo 1964 waxaa uu nidaamkii matalaadda saamigalka ku dhisan uu gaarsiiyey Soomaaliya iyo Somaliland labadaba. Horey, nidaamkan waxaa uu uga jirey Soomaaliya oo keliya. Intaa waxaa dheex, xeerku waxaa uu qaab u sameeyey dhammaan doorashooyinka laba bilaabo 1964tii iyo muddadii ka dambeeysey, iyo gaar ahaan doorashooyinkii Baarlamaanka ee la kala qabtey Maarso 1964 iyo Maarso 1969. Eeg: Ibrahim Hashi Jama, Somaliland Electoral Laws, 25.

⁵⁷ “Elections in Somalia,” African Elections Database, last modified December 30, 2010, <http://africanelections.tripod.com/so.html>; (Geneva; Inter-Parliamentary Union, Chronicle of Parliamentary Elections, (Geneva; Inter-Parliamentary Union, 1969), 62.

⁵⁸ Inter-Parliamentary Union, Chronicle of Parliamentary Elections, 62.

⁵⁹ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, LUULIYO 1, 1960 (Som.), qodobbada. 52(1), 72.

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Doorashada Madaxtooyada	<ul style="list-style-type: none"> Aqlabiyad saddex-meelood laba ah oo laga helo labada aqal ee baarlamaanka (Qod. 89) 	<ul style="list-style-type: none"> Dhowr wareeg: cod aqlabiyad saddex-meelood laba meel oo baarlamaanka looga helo wareegga kowaad iyo kan labaad; cod hal dheeri ah oo lagu helo wareeg-yada xiga Qod 70)
Doorashada Baarlamaanka	<ul style="list-style-type: none"> Doorasho toos ah; Faahfaahinta sharci ayaa laga soo saari doonaa (Qod. 64, 72) 	<ul style="list-style-type: none"> Sharci ayaa qeexaya (Qod 51); Doorasho toos ah, ku dhisan saamigal
Soo-xulidda Ra'iisul-wasaaraha	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa magacaabaya madaxweynaha (Qod 90) 	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa magacaabaya madaxweynaha (Qod 78)
Doorashooyinka ka hooseeya kuwa heerka qaran	<ul style="list-style-type: none"> Dowladaha Xubinta ka ah federaalka waxaa ay xulan karaan nidaamkooda doorashada (Qod 47, 120) 	<ul style="list-style-type: none"> Qodob ka hadlaya kuma jira dastuurka

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka dastuurada kala duwan

Maaddaama uu Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah uu dowladaha xubinta ka ah federaalka u oggolaanayo in ay go'aan ka gaaraan nidaamyadooda doorashada ee u gaarka ah, shuruucda doorashooyinka ee hadda ay Puntland ka soo ifbaxaya sidooda ayaa ay u jiri karaan. Dowlad-goboleedyada dhalanaya ayaa sidoo kale haysta fursad ay ku sameystaan xeerar doorasho oo iyagu ay leeyihiin. Somaliland haddii ay noqoto Qaran Madax-bannaan ama dowlad-xubin ka ah Jamhuuriyadda Federaalka, waxaa ay sii lahaan kartaa shuruucdeeda waxaana doorashooyinka u socon karaan sidii ay ahaayeen ee loo qorsheeyey.

Xeerarka la xiriira xisbiyada siyaasadeed waa ay ku kala duwan yihiin dhammaan dokumentiyada/dastuurada kala duwan. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah kama munaaqashoonayo tirada xisbiyada siyaasadeed ee la oggol yahay, halka Dastuurka Puntland uu xaddidayo ka-qaybgalka (isaga oo raacaya nooca Somaliland).⁶⁰ Kala-duwanaanshahani raadka uu reebi karo ama waa uu yar yahay ama waxba ma reebi karo, maaddaama dowladaha xubinta ka ah federaalka loo oggol yahay in ay sameystaan hay'adahooda heer dowlad-goboleed ah, oo ay ka mid yihiin xeerarka doorashada. Intaa waxaa dheer, haddii ay dhici lahayd in dowladda federaalka Soomaaliyeed ay go'aansato in aysan xaddidin tirada xisbiyada siyaasadeed oo ay taas beddelkeedana ay sameyso shuruudo kale (t.a, in ay ahaadaan kuwo sal-ballaaran, taageero ka haysta degaamada kala duwan), markaa xisbiyada siyaasadeed ee ka dhex jira dowladaha xubinta ka ah federaalka waxaa lagu dhiirrigelin karaa in ay is-bahaysi la yeeshaan xisbiyo ay u wada tartamaan (ay isu bahaystaan) doorashooyinka heerka qaran.

Isukeenidda danaha iyo aragtiyada siyaasadeed ee kala duwan

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, sida dastuurno kale oo badanba, waxaa uu oggol yahay in xeerarka doorashooyinka lagu qeexo sharci. Tani waxaa ay muujineysaa fursad lagu sameyn karo nidaamyo doorasho oo si hufan uga tarjumaya sida ay cod-bixiyeyaashu ay u doonayaan in ay wakiilladoodu ku yimaadaan. Geedi-socodka doorashada xubnaha Aqalka Sare waxaa uu sidoo kale bixinayaa fursad lagu ilaalin karo danaha heerka qaran ee dowladaha xubinta ka ah. Fursadahan waxaa saameyn ku yeelanaya nidaamka doorashada iyo xeerarka xisbiyada siyaasadeed, maaddaama ay labaduba qaabeynayaan matalaadda. Tusaale ahaan, in

⁶⁰ Dastuurka Somaliland waxaa uu sidoo kale xaddidayaa tirada xisbiyada siyaasadeed sidaa daraaddeedna saameyn ayaa lagu yeelan karaa, haddii ay qayb ka noqoto Jamhuuriyadda.

kasta oo nidaamka matalaadda ee ku dhisan saamigalka ay tahay in uu fursad siiyo dano kala duwan, haddana xaddidaada tirada xisbiyada siyaasadeed ayaa ay u badan tahay in ay yareeyso tirada danaha/qaybaha wakiillo ku yeesho.

Xiddidaadda xisbiyada siyaasadeed ee ka jirta Somaliland iyo Puntlandba waxaa ay suuragelin kartaa in la abuurro xisbiyo ballaaran oo taageero heer qaran ah haysta, laakiin xaddidaadda noocan ahi ayaa wax u dhimi karta is-waafajinta (*accommodation*) iyada oo xisbiyada yaryar, ee cusub ka hor intaageysa in ay ka qaybqaataan wada-hadallada siyaasadeed. Sharciga Somaliland ee wax laga beddeley ee ka hadlaya ururrada siyaasadeed ayaa laga yaabaa in uu fursad siiyo in danaha cusubi ay helaan cid matasha, laakiin waxaa loo baahan yahay in si taxaddar leh la isugu miisaamo in aaney tiro aad u badan noqon ururrada siyaasadeed iyo in la hubiyo in aragtiyaha siyaasadeed oo kala duwan si ku filan ay matalaad u helaan. Xaddidaadda xisbiyada siyaasadeed ayaa lagu dooda in ay ku fadhido doonis ah in lagu dhiirrigeliyo waddaniyad, halkii ay ka jiri lahayd kala-taggaan ku dhisan qabyaalad, iyo in laga fogaado kala-geynta bulshada Soomaaliyeed, sidii dhacdey doorashooyinkii baarlamaanka ee 1969. Si loo dhiirrigeliyo in cid waliba ay tixgelinteeda hesho, shuruuc kale ayaa loo adeegsan karaa in xaddidaaddu ay ka sii jirto heerarka ka hooseeya kan qaranka, laakiin lagu dhiirrigelinayo sameynta xisbiyo siyaasadeed oo heer qaran ah oo wakiillo ku leh dowladaha xubinta ka federaalka oo aan ahayn kuwo qabyaalad ku dhisan (t.a, in shuruud looga dhigo tiro go'an oo codad ay tahay in ay ka helaan meelo kala duwan si uu xisbiga ugu tartamo in uu wakiillo ku yeesho baarlamaanka).

3.1.3 Laanta Fulinta

■ Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu dhigayaa jiritaanka madaxtooyo iyo gole wasiirro/xukuumad oo heerka dowladda federaalka ah. Awoodda fulinta waxaa leh golaha wasiirrada, oo uu hoggaamiyey ra'iisul asaare ayna ka mid yihiin ra'iisul wasaare ku-xigeen(no), wasiirro, wasiiru-dowlayaal, iyo wasiir-ku-xigeenno.⁶¹ Ra'iisul-wasaaruhu waa madaxa xukuumadda federaalka ah.⁶² Madaxweynuhu waxaa uu madax u yahay Jamhuuriyadda Federaalka waana astaanta midnimada qaranka.⁶³

Golaha Shacabka ayaa ra'iisul wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada siin kara ama kala noqon kara codka kalsoonida.⁶⁴ Madaxweynaha waxaa xilka looga qaadi karaa khiyaamo qaran ama xadgudub culus oo dastuurka ama sharci kale uu ku xadgudbo. Si loo dhammeystiro geeddi-socodka xil-ka-qaadista, Maxkamadda Dastuuriga ah waa in ay go'aamisaa in dacwaddu ay ku fadhido sharciga, waana in eedeyntu ay taageeraan” aqlabiyad saddex-meelood laba meel (2/3) wadarta xubnaha labada aqal ee baarlamaanka federaalka ah.”⁶⁵

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ma xaddidayo tirada xubnaha Golaha Wasiirrada, sidoo kalena ma xaddidayo geeddi-socodka go'aan-qaadashada golaha. Ma jiraan kuwootooyin ama mabaa'dii hagaya soo xulidda xubnaha Golaha Wasiirrada; shuruudda keliya ee ku xiran waxaa ay la xiriirtaa da'da iyo heerka waxbarashada.⁶⁶ Bishii Nofembar 2012^{kii}, baarlamaanka federaalka ayaa ansaxiyey golihii wasiirrada ee tobanka xubnood ka koobnaa ee uu soo dhisey ra'iisul-wasaaraha, kaas oo ay ka mid ahaayeen laba xubnood oo haween ah.

⁶¹ DASTUURKA KU-MEELGAARKA AH, Agoosto 1, 2012 (Som.), qod. 97.

⁶² Ibid. Qodobka 100.

⁶³ Ibid. Qodobka 87.

⁶⁴ Ibid. Qodobbada 69(2)(d) iyo 69(2)(e). Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ma bixinayo faahfaahin kale oo dheeri ah oo sheegeysa shuruud kale oo looga baahan yahay codka noocaas ah.

⁶⁵ Ibid. Qodobka 92.

⁶⁶ Ibid. Qodobka 98.

Mid ka mid ah labadaa xubnood ee haweenka ah, Fawsiya Yuusuf Xaaji Aadan, waa ra'iisul-wasaare ku-xigeen haween ah oo Soomaaliya ay abid yeelato, sidoo kalena waa wasiiradda arrimaha dibadda.⁶⁷

Ma jiraan qodobbo hagaya qaab-dhismeedka laanta fulinta ee dowladaha xubnaha ka ah federaalka.

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Soomaaliyeed ee Puntland (2012)

Dastuurka Puntland waxaa uu dhisayaa dowlad ku dhisan nidaam baarlamaani ah oo wax laga beddeley oo leh madaxweyne ay soo doortaan Golaha Wakiillada.⁶⁸ Madaxweynaha, isaga oo la tashanaya madax-weyne ku-xigeenka, ayaa soo magacaabaya Gole Wasiirro oo ay tahay in uu ansaxiyo Golaha Wakiillada.⁶⁹ Golaha Wakiillada waxaa uu cod aqlabiyad ah kalsoonida kagala noqon karaa golaha wasiirrada.⁷⁰ Madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka oo xilka looga qaado khiyaamo qaran, ama xil-gudasho la'aan waxaa ay u baahan tahay in ay cod aqlabiyad saddex-meelood-laba ah ka hesho Golaha Wakiillada.⁷¹

Madaxweynuhu waa madaxa dowladda iyo taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ee Puntland jooga.⁷² Awoodaha madaxweynaha waxaa ka mid ah in uu codka qayaxan isku-hortaago sharci uu meelmariyey golaha wakiillada, diidmadaas oo lagu jebin karo cod saddex-meelood laba ah oo uu sharcigaas ka helo Golaha Wakiillada.⁷³

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

Dastuurka Somaliland waxaa uu awoodda fulinta siinayaa madaxweyne lagu soo doortey doorasho toos ah.⁷⁴ Madaxweynuhu waa taliyaha guud ee ciidamada waxaana uu mas'uul ka yahay saxiixa sharciyada uu meelmar-iyo baarlamaanka iyo awoodda ah in uu sharciyada qabyada ah dib ugu celiyo baarlamaanka.⁷⁵ Haseyeeshee, haddii sharci qabyo ah uu cod aqlabiyad saddex-meel laba ah ka helo labada aqalba, markaa madaxweynuhu xaq uma laha in uu adeegsado diidmadiisa/deeda qayaxan.⁷⁶ Madaxweynaha waxaa kaalmeynaya madax-weyne ku-xigeen iyo gole wasiirro, oo uu soo magacaabay madaxweynaha.⁷⁷ Magacaabidda wasiirrada waa in uu cod aqlabiyad ah ku oggolaada Golaha Wakiillada.⁷⁸ Magacaabidda xilka wasiirnimo waxaa ay si weyn ugu fahidaa wax-qaybsiga/arrimaha beelaha. Isu-dheelitiridda wax-qaybsiga beelaha ayaa ay ahayd arrinta ka dambeysa cidda uu madaxweynuhu u magacaabay xilalka golaha wasiirrada.⁷⁹

Madaxweynaha iyo madax-weyne-ku-xigeenka waxaa maamus-ka-xayuubin loogu sameyn karaa khiyaamo qaran ama ku xadgubidda dastuurka. Maamus-ka-xayuubintu waxaa ay u baahan tahay in ay cod aqlabiyad ah ka hesho Golaha Wakiillada, ka dibna ay aqlabiyad saddex-meelood laba ah ka hesho Golaha Guurtida.⁸⁰

67 Hamsa Omar, "Somali Prime Minister Names New Cabinet, Including Two Women," *Bloomberg*, Novembar 5, 2012, <http://www.bloomberg.com/news/2012-11-05/somali-prime-minister-names-new-cabinet-including-two-women.html>.

68 DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, Dis. 2009 (Som.), qod. 56.

69 Ibid. Qodobka 64(16) iyo Qodobka 80(5).

70 Ibid. Qodobka 67.

71 Ibid. Qodobka 82.

72 Ibid. Qodobka 80.

73 Ibid. Qodobbada 72 iyo 73.

74 DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001,(Som.), qod. 82, 90, iyo 94.

75 Ibid. Qodobka 77.

76 Ibid.

77 Ibid. Qodobka 81.

78 Ibid. Qodobka 94.

79 Jimcaale, "Consolidation and Decentralization of Government Institutions," 30.

80 DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 96.

■ Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurka 1960⁸¹ waxaa uu ku dhisan qaab madaxweyne xooggan. Madaxweynaha ayaa magacaabaya ra'iisul wasaaraha, waxaa uu oggolaanayaa soo-saarista sharciyada qabyada ah ee dhinaca dowladda, waxaana uu yahay taliyaha guud ee ciidamada.⁸¹ Madaxweynuhu waxaa uu sidoo kale cod diidmada qayaxan ah ku diidi karaa sharciyada la dejinayo taas oo uu Golaha Shacabka ku burin karo aqlabiyad ah saddex-meelood laba.⁸² Madaxweynuhu waxaa uu soo saari karaa sharuuc iyo xeer-hoosaadyo isaga oo ku soo saaraya wareegto, taas oo loo adeegsadey aasaasidda Bankiga Qaranka Soomaaliyeed oo ka dibna uu sharci u beddeley baarlamaanka.⁸³ Golaha Shacabku waxaa uu madaxweynaha maamuus ka xayuubin ugu sameyn karaa khayaamo qaran ama "iskudday ka hor-imaansho amar dastuuri ah" aqlabiyad ah saddex-meelood laba.⁸⁴

Ra'iisul wasaaraha ayaa magacaabaya xubnaha dowladda, taas oo u baahneyd in uu ansaxiyo Golaha Shacabka.⁸⁵ Ra'iisul Wasaaraha ayaa ka mas'uul ahaa hagidda siyaasadda guud ee dowladda.⁸⁶ Wasiirrada waxaa lagu soo xuli jirey geeddi-socod xasaasi ah, oo ay ahayd in la isu miisaamo aqoonta iyo kartida iyo qabaa'ilka gobollada. Tusaale ahaan, sanadkii 1964, golihii wasiirrada ee uu soo dhisey ra'iisul wasaaraha ayaa loo diidey isu-dheellitirnaan la'aan dhinaca qabaa'ilka iyo gobollada ah daraaddeed.⁸⁷ Sanadkii 1967, ra'iisul wasaarihii cusbaa ayaa laba xubnood ku biiriyey golaha wasiirrada si uu qabiil waliba ay cid ugu matesho.⁸⁸

Sida caadi ahaan dhacda, qaybsiga mas'uuliyadaha fulinta ee madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha ayaa dhalisey culeysyo la xiriira hirgelinta barnaamijyada horumarinta iyo sida loogu heshiinayo waddada ay marayaan siyaasadaha guud ee dowladda, marka madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaruhu aaney ahayn isku aydiyolajiyad.

Tusaha 3aad - Is-barbardhigidda shuruucda la xiriira hay'adda fulinta

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Xilka iyo awoodaha Madaxweynaha	<ul style="list-style-type: none"> Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka; Taliyaha Guud ee ciidamada qalabka sida; waxaa uu mas'uul ka yahay saxiixidda shuruucda la soo saarayo; magacaabista saraakiisha iyo garsoorayaasha, iyo qaadista tallaabooyin kale marka ay u soo jeediyaan Golaha Wasiirrada ama baarlamaanka (Qod. 87, 90) 	<ul style="list-style-type: none"> Madaxa Qaranka; Taliyaha Guud ee Ciidamada qalabka sida; waxaa uu ka mas'uul yahay saxiixidda shuruucda, laakiin waxaa uu leeyahay awood diidmo qayaxan; waxaa uu soo saari karaa shuruuc ku-meelgaar ah iyo wareegtooyin (Qodobbada 61, 63, 70, 75)
Xilka iyo awoodaha Ra'iisul Wasaaraha	<ul style="list-style-type: none"> Madaxa xukuumadda federaalka; waxaa uu mas'uul ka yahay magacaabista iyo xilka-qaadista xubnaha Golaha Wasiirrada (Qod. 100) 	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa uu mas'uul ka yahay hagidda siyaasadda guud ee dowladda iyo isuduwidada/kormeerka Golaha Wasiirrada (Qod. 83)
Xilka iyo awoodaha Golaha Wasiirrada	<ul style="list-style-type: none"> Mas'uuliyadda dejinta iyo hirgelinta xeer-hoosaadyada maamul, siyaasadaha, iyo shuruucda; diyaarinta miisaaniyad-sanadeed iyo iyo hindisyaal sharci oo kale oo la hor-dhigayo baarlamaanka (Qod. 99) 	<ul style="list-style-type: none"> Mas'uuliyadda hagidda arrimaha wasaaradda uu madaxda ka yahay (Qod. 83)

⁸¹ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, Luuliyo 1, 1960 (Som.), qod. 75.

⁸² Ibid. Qodobka 61.

⁸³ Ibid. Qodobbada 63 iyo 85. Xeer Wareegto Lr.3/1678.

⁸⁴ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, LUULIYO 1, 1960 (Som.), qod. 76

⁸⁵ Ibid. Qodobbada 78(3) iyo 82.

⁸⁶ Ibid. Qodobka 83.

⁸⁷ Federal Research Division, *Somalia: A Country Study* (Whitefish: Kessinger, Publishing, LLC, 2010) 78-79.

⁸⁸ Ibid.

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Hababka Wada-xisaabtanka	<ul style="list-style-type: none"> • Golaha Shacabka ayaa ay uga baahan yihiin codka kalsoonida, waxaana uu goluhu bilaabi karaa cod kalsooni-kala-noqosho, oo ka dhan ah ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada (Qod. 69) • Madaxweynaha waxaa maamuuska looga qaadi karaa cod aqlabiyad saddex-meelood laba ee labada aqal ee baarlamaanka (Qod. 92) 	<ul style="list-style-type: none"> • Golaha Shacabka ayaa ay uga baahan yihiin codka kalsoonida, waxaana uu goluhu bilaabi karaa codka kalsooni kala noqoshada ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada (Qod. 82) • Madaxweynaha waxaa maamuuska looga qaadi karaa cod aqlabiyad saddex-meelood laba ee Golaha Shacabka (Qod. 76)

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka qaababka guud ee dastuurada

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu dowladaha xubnaha ka ah federaalka siinayaa awood ay go'aan kaga gaaraan sida ay u habeynayaan hay'adhooda heerka dowlad-goboleed ah, taas oo ay ka mid tahay qaab-dhismeedka/haykalka iyo hawsha waaxahooda fulinta. Sidaa daraaddeed, Somaliland iyo Puntland waxaa ay qaababkooda madaxweynenimo sii ahaan karaan sida ay dhigayaan dastuurradooda.

Haseyeeshee, waxaa wareer uu ka imaan karaa mas'uuliyado gaarka ah, sida gacan-ku-haynta ciidamada ammaanka iyo arrimaha dibadda. Madaxweynaha Puntland waxaa uu sidoo kale yahay taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida waxaana uu Dastuurku Federaalka Ku-meelgaarka ah sidoo kale uu baarlamaanka u oggol yahay in uu go'aan ka gaaro qaab-dhismeedka, hawsha, iyo darajooyinka ciidamada ammaanka ee Jamhuuriyadda Federaalka ah.⁸⁹ (Munaaqasho dheeri ah oo ku saabsan arrimaha amniga, ka eeg *Qaybta 5.2.2.*)

Isu-keenidda danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed

Habka dowladeed madaxtooyada waa mid ka muuqda qaababka hadda jira, haddii ay tahay heerka qaran ama heerarka ka hooseeya kan qaranka. Marka laga eego dhinac is-waafajinta, qodobbadaan waxaa ay xaqiijin karaan in si weyn la isugu raacsan yahay madaxweyne/madaxtooyo (haddii si toos ah ama si aan toos ahaynba loo soo doorto), markaa ka dib oo uu madaxweynuhu yeelanayo awood mug leh oo la xiriirta go'aan-qaadasho. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, iyo Dastuurkii 1960^{kii}, Dastuurka Puntland, madaxweynaha waxaa loo soo dooranayaa si aan toos ahayn waxaana soo dooranaya baarlamaanka. Geeddi-socodka soo-xulidda ee noocan ah, ayaa wakiillada ka tirsan baarlamaanku loogu baahan yahay in ay fududeeyaan is-waafajinta.

Qaababka hadda jira waxaa ay sidoo kale bixinayaan habab lagu hubinayo in madaxweynuhu uu ixtiraam ku filan siiyo uuna wax ka qabto danaha degaamada/xubnaha, iyada oo baarlamaanka awood loo siiyey in ay kormeeraan laanta fulinta (t.a. codka kalsoonida, awoodda ay ku burin karaan diidmada qayaxan ee madaxweynaha, awoodaha maamuus ka qaadista). Culeyskuse waxaa uu ka jiraa iskuduwidda taageerada loogu baahan yahay fulinta hababka; qodobbada hadda jira badidoodu waxaa ay u baahan yihiin taageero saddex-meelood laba ah oo laga helo baarlamaanka.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah sidoo kale isna mid furan ka dhigayaa geeddi-socodka lagu soo xulayo ra'iisul wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada. Tani waxaa ay bixin kartaa fursad wasiirrada laga soo magacaabi karo qaybaha kala duwan. In kasta oo qaaciddadu 4.5 ay weli tahay mid si weyn loo durey ahaanshaheeda hab la isku halleyn karo oo ay ku iman karaan wakiillada dadka, laguna xallin karo khilaafaadka, waxaa la baari karaa

⁸⁹ Dastuurka Somaliland waxaa uu sidoo kale madaxweynaha siinayaa awoodaha taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida, sidaa daraaddeedna waxaa ay culeys kaga imaan karaa Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, haddii ay noqoto dowlad xubin ka ah federaalka.

qaabab kale oo lagu xaqiijiyo in beeluhu ay wakiilladooda ku helaan.⁹⁰ Waayo-aragnimo laga heley Dastuurkii 1960kii iyo Dastuurka Somaliland ayaa muujinaya muhiimadda ay leedahay isu-dheellitirnaanta beelaha marka la magacaabayo saraakiisha laanta fulinta.

3.1.4 Laanta Sharci-dejinta

■ Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012)

Baarlamaanka hadda jira waxaa soo xuley odeyaal 825 ah oo matayala beelhooda. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu dhigayaa sharci-dejin laba aqal ka kooban, oo kala ah Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare.⁹¹ Golaha Shacabka waxaa uu ka kooban yahay 275 xubnood oo toos ay u soo doortaan dadka Jamhuuriyadda Federaalka.⁹² Aqalka Sare waxaa uu yeelan karaa ugu badnaan 54 xubnood oo ay si toos ah u soo doortaan dadka dowladaha xubinta ka ah federaalka.⁹³ Dhammaan dowladaha xubinta ka ah federaalka waa in ay tiro wakiillo isku mid ah ay ku lahaadaan Aqalka Sare.⁹⁴ Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ma jirto kuraas gaar ah oo labada aqal ee baarlamaanka midkoodna uu ka siinayo haweenka ama dadka laga tiro badan yahay.

Xubin kasta oo ka tirsan baarlamaanka waa in ay hagtaa sida ay danta ugu weyn ugu jirto guud ahaan shacabka. Haseyeeshee, xubnaha Golaha Shacabka waa in ay tixgelin gaar ah siiyaan danaha dadka goobihii laga soo doortey.⁹⁵ Xubnaha Aqalka Sare waa in ay tixgeliyaan danaha dowladda xubinta ka ah federaalka ee ay matalayaan waxaana mas'uuliyad ka saaran ilaalinta nidaamka federaalka.⁹⁶ Golaha Shacabka waa la kala dirayaa haddii uu ansaxin waayo Golaha Wasiirrada iyo barnaamijka dowladda ay soo bandhigtey.⁹⁷ Aqalka Sare lama kala diri karo.⁹⁸

Labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah waxaa ay labaduba curin karaa hindise sharci, laakiin keliya Golaha Shacabka ayaa awood u leh in uu diido sharci qabyo ah.⁹⁹ Intaa waxaa dheer, Golasha Shacabka oo keliya ayaa sharci u diri kara Madaxweynaha si uu u saxiixo.¹⁰⁰ Golaha Shacabka ayaa sidoo kale mas'uul ka ah ku dhowaad guud ahaan ansaxinta sharci-djeinta, oo ay ka mid tahay sameynta sharciyada xisbiyada siyaasadda, doorashooyinka, guddiyada madaxa bannaan iyo tirada iyo xuduudaha dowladaha xubinta ka ah federaalka.

Aqalka Sare, go'aamada waa in caadi ahaan lagu saleeyo cod aqlabiyadda wadarta tirada guud ee xubnaha aqalka, halkaas oo xubin kasta ay leedahay hal cod.¹⁰¹ Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ma dhigayo habraacyada go'aan-qaadashada ee Golaha Shacabka.

Si ku-meelgaar ah, Aqalka Sare ma kulmayo ilaa laga dhisayo dhammaan dowladaha xubinta ka ah federaalka. Ilaa laga gaarayo waqtigaa, Golaha Shacabka ayaa qabanaya waajibaadkii iyo hawlihii Aqalka Sare.¹⁰²

⁹⁰ Sanadkii 2000, the Dowladda Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa ay sameysey qaaciddada 4.5 si ay u noqoto hab lagu dhiirrigelinayo in qabaa'ilku ay si miisaaman ay wakiillo ugu lahaadaan dowladda. Afarta beelood ee ugu waaweyn (Hawiye, Daarood, Dir, iyo Raxanweyn) ayaa heley matalaad tiro isku mid ah, iyada oo "0.5ka" soo harey ay helayaan kooxaha kale ee laga tiro badan yahay. Haseyeeshee, habkaan ayaa aad loogu dhalliiley in uusan ahayn hab la isku halleyn karo oo lagu xaqiijiyo matalaad macno ku fadhida iyo xallinta khilaafaadka. Eeg International Crisis Group, *Somalia: The Transitional Government on Life Support*, Africa Report No. 170 (February 21, 2011), 3.

⁹¹ DASTUURKA KU-MEELGAARKA AH, Agos. 1, 2012 (Som.), qod. 55.

⁹² Ibid. Qodobka 64.

⁹³ Ibid. Qodobka 72.

⁹⁴ Ibid.

⁹⁵ Ibid. Qodobka 64.

⁹⁶ Ibid. Qodobka 72.

⁹⁷ Ibid. Qodobka 67.

⁹⁸ Ibid. Qodobka 78.

⁹⁹ Ibid. Qodobka 81.

¹⁰⁰ Ibid.

¹⁰¹ Ibid. Qodobka 76.

¹⁰² Ibid. Qodobka 138(2).

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012)

Dastuurka Puntland waxaa uu dhigayaa Gole Wakiillo oo hal aqal ah oo 66 xubnood ka kooban oo si toos ah loo soo doorto.¹⁰³ Golaha Wakiillada waxaa uu leeyahay awood sharci-dejin, awooddaa waxaa ka mid ah ansaxinta iyo diidmada sharciyada qabyada ah iyo dib-u-eegidda/wax ka beddelka xeerarka Puntland.¹⁰⁴ Golaha Wakiillada waxaa uu sidoo kale ansaxiyaa miisaaniyad-sanadeedda dowladda, degmooyinka ama gobollada cusub ee ay dowladdu soo jeediso, ku dhawaaqista xaaladaha dagaal iyo heshiisyada nabadeed, amaahaha dibadda, iyo heshiisyada caalamiga ah.¹⁰⁵ Intaa waxaa dheer, Golaha Wakiilladu waxaa uu dooranayaa madaxweyaha iyo madax-weyne ku-xigeenka Puntland iyo sidoo kale saraakiil sare oo kale waxaana uu ansaxiyaa Golaha Wasiirrada.¹⁰⁶

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

Baarlamaanka labada aqal ka kooban ee Somaliland waxaa ay kala yihiin Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida. Xubnaha Golaha Wakiillada waxaa ay matalaan dadweynaha oo dhan, halka Golaha Guurtidu uu leeyahay mas'uuliyado xeer-dejin oo gaar ah oo la xiriira diinta, dhaqanka, caadooyinka, iyo ammaanka.¹⁰⁷

Golayaashu waxaa ay yeelan karaan fadhiyo gaar-gaar ah laakiin waxaa ku waajib ah in ay fadhiyo ay u dhan yihiin ay ka yeeshaan arrimaha qaar, oo ay ka mid yihiin ururrada caalamiga ah, xaaladaha dagaalka, aafuoyinka dabiiciga ah, iyo xeerarka degdegga ah.¹⁰⁸ Golaha Guurtidu waxaa isaga oo la tashanaya hoggaamiyeyaasha dhaqanka ay mas'uuliyad gaar ahi ka saaran tahay in uu dowladda gacan ka siiyo arrimaha diinta, ammaanka, difaaca, dhaqanka, iyo dhaqaalaha.¹⁰⁹

Geeddi-socodka xeer-dejinta, ku dhowaad dhammaan mashaariciida sharciyada, Golaha Wakiillada ayaa u diraya Golaha Guurtida si ay dib ugu eegaan. Haddii Golaha Guurtidu uu diido mashruuc sharci, Golaha Wakiillada ayaa burin kara go'aanka oo mashruuca sharcigana u gudbin kara madaxweynaha si uu u saxiixo.¹¹⁰ Haseyeeshee, marka Golaha Guurtidu uu mashruuc sharci ku diido aqlabiyad ah saddex-meelood laba, Golaha Wakiillada ayaa isaga waxaa ku waajib ah in uu mar kale ku meelmariyo mashruuca sharciga aqlabiyad ah saddex-meelood laba ka hor inta aanu u dirin madaxweynaha.¹¹¹

Ma jiraan qodobbo, ku jira daastuurka ama meel kale, oo kuraas u qoondaynaya haweenka ama shuruud ka dhigaya in ay haweenku ka-qaybgal ku lahaadaan. Ugu yaraan doorashooyinkii baarlamaanka ee 2008dii ma jirin haween la soo doortey, waxaana doorashooyinkii degmooyinka ee 2012^{kii} jirtey in haween keliya toban ah loo doortey golayaasha degaanka ee degmooyinka.

■ Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurkii 1960^{kii} waxaa uu awoodda sharci-dejinta siiyey laan sharci-dejin oo hal aqal ka kooban oo magaceedu ahaa Golaha Shacabka. Hay'addaan waxaa ka mid ah xubno toos loo soo doorto, iyo sidoo kale dhammaan madaxweynayaashii hore ee dalka.¹¹² Maaddaama uu baarlamaanku hal aqal oo keliya ka koobnaa, sharciyada

¹⁰³ DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, DIS. 2009 (Som.), qod. 60.

¹⁰⁴ Ibid. Qodobka 64(1).

¹⁰⁵ Ka eeg Qodobka 64 dhammaan mas'uuliyadaha golaha.

¹⁰⁶ Ibid. Qodobka 64.

¹⁰⁷ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qodobbada 39, 57, 59.

¹⁰⁸ Ibid. Qodobka 38.

¹⁰⁹ Ibid. Qodobbada 61(4).

¹¹⁰ Ibid. Qodobbada 78(b) iyo (c).

¹¹¹ Ibid. Qodobka 78(5).

¹¹² DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, Luuliyo 1, 1960 (Som.), qod. 51.

qabyada ah waxaa looga baahnaa keliya in Golaha Shacabku uu ku ansaxiyo aqlabiyad, ka hor inta aan loo gudbin madaxweynaha si uu u saxiixo.¹¹³ Golaha Shacabku waxaa uu ku burin karey diidmada qayaxan ee madaxweynaha codeyn aqlabiyad saddex-meelood laba ah.¹¹⁴

Kala-qoondaynta kuraasta Golaha Shacabka iskuma dayin in ay hubiso in ay matalaad iskumid ah ay helaan gobollada ama qabaa'ilka marka laga reebo in uu bixiyey doorashooyin. Xornimadii 1960 ka dib, haweenku badanaaba wax kama helin jagooyinkii la isu dooranayey iyo kuwii shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.¹¹⁵

Tusaha 4aad - Is-barbardhigga qodobbada ka hadlaya laanta sharci-dejinta

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Qaab-dhismeedka laanta sharci-dejinta	<ul style="list-style-type: none"> Ka kooban laba aqal (Qod 55) <ol style="list-style-type: none"> Golaha Shacabka: Xubnaha waa in ay tixgelin siiyaan danaha dadkii soo doortey (Qod. 64) Aqalka Sare: Xubnaha waa in ay tixgeliyaan danaha dowladda xubinta ka ah federaalka ee ay matalaan waana in sidoo kale ay ilaaliyaan nidaamka federaalka (Qod 72); Dhammaan dowladaha xubinta ka ah federaalka waa in ay matalaad isku mid ah ku lahaadaan Aqalka Sare (Qod 72) 	<ul style="list-style-type: none"> Baarlamaan hal aqal ka kooban (Qod. 51)
Geeddi-socodka sharci-dejinta	<ul style="list-style-type: none"> Sharciyada qabyada ah waxaa curin kara mid kasta oo ka mid ah labada aqal, laakiin Golaha Shacabka oo keliya ayaa awood u leh in uu diido sharciyada qabyada ah ama sharciyo qabyo ah u diri kara madaxweynaha si uu u saxiixo. (Qod. 82, 83) 	<ul style="list-style-type: none"> Sharciyada qabyada ah ee uu ansixiyo Baarlamaanka waxaa loo diraa madaxweynaha si uu u saxiixo; madaxweynuhu dib ayuu sharci ugu soo clein karaa golaha si uu dib ugu eego (Qod 61) Golaha waxaa uu diidmada qayaxan ee madaxweynaha ku burin karaa cod aqlabiyad saddex-meelood laba meel ah (Qod 61)
Geeddi-socodka Go'aan-qaadashada	<ul style="list-style-type: none"> Golaha Shacabka: Codka kalsoonida (ama kalsooni kala noqoshada) waxaa uu u baahan yahay cod aqlabiyad ah; sida kale ma jiraan qodobbo/waxyaabo kale (Qod. 69) Aqalka Sare: Cod aqlabiyad ah (xubin kasta waxaa ay leedahay hal cod) (Qod 76) Doorashada madaxweynaha iyo wax-ka-beddelka dastuurku waxaa ay u baahan yihiin aqlabiyad saddex-meelood laba ah oo ay ka helaan labada aqalba (Qod 89, 132) 	<ul style="list-style-type: none"> Cod aqlabiyad ah ayaa ay dhigayaan badi qodobbada (Qod. 55) Wax-ka-beddelka dastuurku waxaa uu u baahan yahay cod aqlabiyad ah codeynta/wareegga hore, iyo saddex-meelood laba codeynta/wareegga labaad (Qodobka 104)

¹¹³ Ibid. Articles 55 and 61.

¹¹⁴ Ibid. Qodobka 61.

¹¹⁵ Safia Aidid, "Haweenku Waa Garab (Women are a Force): Women and the Somali Nationalist Movement, 1943-1960," *Bildhaan* 10, (2010):116-117, <http://digitalcommons.maclester.edu/bildhaan/vol10/iss1/10>.

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka qaababka guud ee dastuurrada

Baarlamaanka labada aqal ka kooban ee uu dhigayo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa ku jira Aqal Sare, oo ka kooban wakiillo matalaya dhammaan dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ma sheegayo sida dowladaha soo ifbaxaya ee aan weli xubinta ka ahayn federaalka iyo gobollada aan weli la dhisan ay wakiillo ugu yeelanayaan Aqalka Sare.

Sida lagu sharxay dhinaca (*strand*) laanta fulinta, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu dowladaha xubnaha ka ah federaalka u oggol yahay in ay dhistaan hay'adaha heerka dowlad-goboleed, oo ay ka mid tahay laanta sharci-dejinta. Sidaa daraaddeed, Baarlamaanka Puntland waxaa uu u sii shaqeyn karaa sida uu dhigayo Dastuurka Puntland. Buuq yar ayaa ka imaan kara mas'uuliyadaha iyo madax-bannaanida hoose, maaddaama uu Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah uu keliya taxayo tiro yar oo mas'uuliyado ay yeelanayaan heerka dowladaha federaalka ka tirsan uuna ka munaaqashooneynin mas'uuliyadaha ay kala yeelanayaan dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka; sidoo kale maaddaama uusan ka munaaqashooyeynin madax-bannaanida hoose ee ay lahaanayaan laamaha sharci-dejinta ee dowladaha xubnaha ka ah federaalka.

Isu-keennidda danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah iyo Dastuurka Somaliland waxaa ay ku baaqayaan baarlamaan laba aqal ka kooban, taas oo gacan ka geysan karta in la ballaariyo matalaadda danaha kala duwan oo baa-hin kartana saameynta ay kooxaha kala duwan ku yeelan karaan go'aamada la qaadanayo. Tusaale ahaan, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu xoojinayaa matalaadda danaha dowladaha xubinta ka ah federaalka isaga oo ku biirinayey Aqalka Sare iyo kaalinta uu ka qaato geeddi-socodka sharci-dejinta. Dastuurka Somaliland isagana sidaa oo kele ayuu yeelayaa isaga oo u maraya Golaha Guurtida isaga oo kor u qaadayana wax ka qabashada danaha hoggaamiyeyaasha diinta iyo kuwa dhaqanka. Baarlamaankii halka aqalka ka koobnaa ee Dastuurkii 1960^{kii} ma lahayn qaab sidaas oo kale ah oo danaha la isu waafajinayo.

Qaababka hadda jira midkoodna ma tilmaamayo siyaabo gaar ah oo lagu dhiirrigelinayo matalaadda kooxaha laga tiro badan yahay ama haweenka. Tan iyo waqtigii xornimada, matalaadda ay haweenku ku haysteen baarlamaanada iyo xafiisyada fulinta waa ay yareyd.¹¹⁶ Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu isku dayayaa in uu wax ka beddelo oo uu wanaajiyo arrintan soo jirtey isaga oo si guud u sheegeysa, oo ku baaqeysa in matallaad ay helaan "dhammaan beelaha/bulshooyinka" gaar ahaanna matalaad ay haweenku ku yeeshaan dhammaan hay'adaha, haddana ma bixinayo siyaabo la taaban karo oo uu ku taageerayo sidii ay wakiillo ugu yeelan lahaayeen kooxaha matalaadda ay haystaan ay yar taha.

3.1.5 Ka-qaybgalka Dadweynaha

■ Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012)

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu dhigayaa in muwaadin kasta uu xaq u leeyahay in uu ka qaybqaato arrimaha guud ee dadweynaha. Xaqa kan waxaa ka mid ah in uu sameysan karo xisbi ama ka-qaybgeli karo hawlaha xisbiyo siyaasadeed.¹¹⁷ Cod-bixiyeyaasha ayaa sidoo kale fikirkooda u muujin kara "qaab xor ah, toos ah oo qarsoodina ah" iyaga oo u maraya afti.¹¹⁸ Qodobbada ka hadlaya ka-qaybgalka aftida waxaa ay aasaasiyan ku saabsan yihiin wax-ka-beddelidda dastuurka iyo meelmarinta dastuurka kama-dambeysta ah.

¹¹⁶ Bishii Nofembar 2012, Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ayaa soo xuley laba haween ahoo ka mid noqda gole wasiirro oo 10 xubnood ka kooban: Wasiiradda Arrimaha Dibadda ahna Ra'iisul Wasaare-ku-xigeen Fowsiya Yuusuf Xaaji Aadan iyo Wasiiradda Adeegyada Bulshada iyo Horumarinta Drs Maryan Qaasim. Eeg Omar, "Somali Prime Minister Names New Cabinet, Including Two Women."

¹¹⁷ DASTUURKA FEDERAALKA KU-MEELGAARKA AH, Agos. 1, 2012(Som.), qod. 22.

¹¹⁸ Ibid. Qodobka 141.

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu sidoo kale bixinayaa fursado ay koox tiro badan oo muwaadiniin ah ay saameyn ugu yeelan karto geeddi-socodka sharci-dejinta iyo wax-ka-beddelka dastuurka:

- Cod-bixiyeyaal diiwaangashan oo 10,000 ama ka badan ah ayaa Maxkamadda Dastuuriga ah hor geyn kara dacwad ay ku durayaan in la ansaxiyo/meelmariyo sharci ay aaminsan yihiin in uu ka hor-imanayo Dastuurka.¹¹⁹
- Codsii-wadareed “...ay saxiixeen 40,000 oo muwaadin ayaa lagu bilaabi karaa habraaca wax ka beddelka [dastuurka].”¹²⁰

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu sidoo kale dhiirrigelinayaa ka mid noqoshada haweenka ee dhammaan saddexda laamood ee dowladda, oo ay ka mid yihiin guddiyada madaxa bannaan. Haseyeeshee, kama munaaqashoonayo sida lagu xaqiijinayo ka-mid-noqoshadaa.¹²¹

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012)

Hababka ka-qaybgalka dadweynaha ee uu dhigayo Dastuurka Puntland waxaa ay diiradda saarayaan geeddi-socodka sharci-dejinta.

- Mashruuc sharci waxaa bilaabi kara muwaadiniin aan ka yareyn 5,000 oo cod-bixiyeyaal ah.¹²² Muwaadi-niintu ma soo gudbin karaan mashruuc sharci oo la xiriira cashuuraha, kharashaadka dowladda, difaaca dalka, iyo ammaanka gudaha.¹²³
- Fadhiyada loo dhan yahay ee baarlamaanka waxaa ay u furan yihiin dadweynaha, haddii in fadhi albaaba-du u xiran yihiin ay taageeraan aqlabiyadda xubnaha ma ahee.¹²⁴
- Dhammaan shuruucda waa in lagu soo saaraa faafinta rasmiga ah, iyada oo uu taasna amrayo madaxweynaha, waana in ay heli karaan dadweynaha.¹²⁵

Muwaadiniintu waxaa ay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay cabashadooda u gudbiyaan madaxweynaha, baarlamaanka, xukuumadda, iyo madaxda kale ee dawladda, waxaana madaxdaa waajib ku ah in ay uga soo jawaabaan 30 beri gudahood.¹²⁶ Dadweynuhu waxaa ay sidoo kale soo jeedin karaan wax-ka-beddel lagu sameeyo dastuurka, marka la helo taageerada 5,000 muwaadiniin cod-bixiyeyaal ah.¹²⁷ Wax ka beddelidda qaar ka mid ah qodobbada dastuurka, oo ay ka mid yihiin mabaa'diisa aasaasiga ah, waxaa ay u baahan tahay afti dadweyne.¹²⁸ Weli lama qaban afti dadweyne oo la xiriirta dastuurka.¹²⁹

¹¹⁹ Ibid. Qodobka 86.

¹²⁰ Ibid. Qodobka 132(3). Qodobku waxaa uu xusayaa “40,000 muwaadin” laakiin si gaar ah uma sheegayo in ay kuwaasi ahaadaan cod-bixiyeyaal iyo kale.

¹²¹ Ibid. Qodobka 3(5).

¹²² DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, Dis. 2009 (Som.), qod. 68.

¹²³ Ibid. Qodobka 69(3).

¹²⁴ Ibid. Qodobka 63(5).

¹²⁵ Ibid. Qodobka 71(2).

¹²⁶ Ibid. Qodobka 42.

¹²⁷ Ibid. Qodobka 139(1).

¹²⁸ Ibid. Qodobka 139(5).

¹²⁹ Afti dastuuri ah oo la xiriirta Dastuurka Puntland ayaa la qabtay. Haseyeeshee, cod-bixinta waxaa sameeyey oo keliya xubno la soo xuley oo dadweynaha ka mid ah 18kii Abriil 2012 umana furneyn dhammaan dadweynaha cod-bixiyeyaasha ah. Xubnaha codeynayey waxaa ka mid ahaa odayaal wakiillo ah oo laga soo xulay odayaasha degaanka ee guud ahaan Putland, xubno ka socdey qurba-joogta, iyo wakiillo dowladda ka socdey. “SOMALIA: Puntland Constitution Approved,” 49 *Africa Research Bulletin: Political, Social and Cultural Series* no. 4 (2012), doi: 10.1111/j.1467-825X.2012.04427.x; “A Historic Moment: Puntland’s Constitution Now Ratified,” *Interpeace*, April 20, 2012, <http://www.interpeace.org/2011-08-08-15-19-20/latest-news/52-2012/282-a-historic-moment-puntland-s-constitution-now-ratified>; iyo “Somalia: Puntland State Constitution Adopted,” *Garowe Online*, April 18, 2012, <http://allafrica.com/stories/201204181369.html>.

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

Qoddobada ka hadlaya ka-qaybgalka dadweynaha ee Dastuurka Somaliland waxaa ay iyana udub-dhexaad u ah geeddi-socodka sharci-dejinta:

- Fadhiyada Golaha Wakiillada iyo kuwa Golaha Guurtidu waa kuwo u furan dadweynaha, laakiin waxaa loo xiri karaa hadba sida loogu baahdo.¹³⁰
- Marka la helo taageerada 5,000 oo muwaadin (oo xaq u leh codeyn), dadweynuhu waxaa ay mashruuc sharci u soo gudbin karaan Golaha Wakiillada.¹³¹
- Dhammaan xeerarka uu ansaxiyey baarlamaanka uuna meelmariyey madaxweynaha waxaa uu madaxweynuhu ku baahinayaa Faafinta Rasmiga ah.¹³²

Dastuurku waxaa uu sidoo kale ku baaqayaa diyaarinta xeerka aftida iyo dhisidda guddiga qabanqaabiya aftida.¹³³ Dastuurku waxaa sidoo kale uu waajibinayaa in afti loogu baahan yahay kala-diridda Golaha Wakiillada.¹³⁴ Wixii loo soo gaarey Febraayo 2013^{kii}, xeerka aftida ee keliya ee la saxiixey waxaa uu ahaa kan meelmarinta dastuurka.¹³⁵ Sanadkii 2001, muwaadiniinta ayaa ka-qaybqaatey afti lagu meelmarinayey dastuurka, iyada oo 97% ay codkoodu ku taageereen.¹³⁶

■ Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurkii 1960 si aad u yar ayuu u bixiyey ka-qaybgal dadweyne. Dadweynuhu waxaa ay xaq u lahaayeen in ay cabasho u gudbiyaan madaxweynaha, Golaha Shacabka, iyo/ama dowladda/xukuumadda; cabasho kasta oo aaney muuqan in ay tahay mid been ah waxaa baaraya hay'adda loo soo gudbiyey.¹³⁷ Haseyeeshee, dastuurkii 1960 ma faahfaahin siyaabaha iyo shuruudaha dib loogu baarayo, wax looga qabanayo/jawaabayo cabashooyinka.

Dastuurkii 1960kii waxaa ku jirey hal qodob oo ka hadleyey afti dadweyne, oo lagu meelmarayo dastuurka.¹³⁸ Aftida waxaa la qabtay 1961, waxaana dadkii tirada yaraa ee ku codeeyey waqooyiga (Somaliland), wax ka yar kala bar ayaa taageerey Dastuurka, halka ay cod-bixiyeyaasha koonfurtu ay si weyn u taageereen dastuurka.¹³⁹

¹³⁰ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qodobbada 45, 71.

¹³¹ Ibid. Qodobka 74.

¹³² Ibid. Qodobka 75.

¹³³ Ibid. Qodobka 125.

¹³⁴ Ibid. Qodobka 56.

¹³⁵ Jama, *Somaliland Electoral Laws*, 13-15.

¹³⁶ Initiative & Referendum Institute, *Final Report of the Initiative & Referendum Institute's Election Monitoring Team*, (Washington: Citizen Lawmaker Press, July 27, 2001), 22, <http://www.iandrinstitute.org/New%20IRI%20Website%20Info/I&R%20Research%20and%20History/I&R%20Studies/Final%20Somaliland%20Report%207-24-01%20combined.pdf>.

¹³⁷ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA, July 1, 1960 (Som.), qod. 10.

¹³⁸ Ibid. Qodobbada Ku-meelgaarka ah iyo Kuwa Kama-dambeysta ah III.

¹³⁹ I.M. Lewis, *Understanding Somalia and Somaliland*, (New York: Columbia University Press, 2008).

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Hababka ka-qaybgalka dadweynaha	<ul style="list-style-type: none"> Muwaadin kasta waxaa uu xaq u leeyahay in uu sameysto xisbiyo siyaasadeed (Qod 22) Aftida dadweynaha (Qod 141) 10,000+ cod-bixiyeyaal diiwaangashan ayaa sharci ku duri kara dastuurinimadiisa (Qod 86)40,000+ registered voters can initiate a constitutional amendment (Art 132) 40,000+ cod-bixiyeyaal diiwaangashan ah ayaa bilaabi kara wax ka beddelka dastuurka (Qod 132) 	<ul style="list-style-type: none"> Xaq in cabasho loogu gudbiyo madaxweynaha, Golaha Shacabka, ama dowladda, iyo in la baaro cabashada (Qod 10) Aftida meelmarinta dastuurka (Qodobaddii ku-melgaarka ah iyo kuwii ugu dambeeyey ee III)
Hababka lagu hubinayo ka-qaybgalka dadka kala duwan	<ul style="list-style-type: none"> Haweenku waa in ay ka-qaybqaataan dhammaan hay'adaha dowladda (Qod 3) 	<ul style="list-style-type: none"> Waxba kama dhihin

FG: Ma jirto cabasho tan iyo 1991 si guul leh loo hordhigey maamullada/madaxda Soomaalida.

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka qaababka guud ee dastuurrada

Hababka ka-qaybgalka dadweynaha ee dowladaha heerarka kala duwan ma ahan mid ay lagamamaarmaan ay tahay in ay kala madax-bannaanaadaan. Tusaale ahaan, afti dadweyne oo kala gooni ah ayaa ka dhici kara heerka qaran iyo mid kasta oo ka mid ah dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Sidoo kale, qodobbada ka hadlaya ka-qaybgalka dadweynaha ee geeddi-socodka sharci-dejinta ee heerka dowladaha xubinta ka ah federaalka khasab ma ahan in uu faraha la galo hababka jira ee la halmaala heerka qaran.

Taas beddelkeeda, qodobbada la halmaala ka-qaybgalka waxaa ay saameyn ballaaran ku yeelan karaan heerarka kala duwan ee dowladeed. Somaliland, Golaha Guurtida ayaa ka-qaybgalka dadweynaha u taageeraya heerarka degaanka isaga oo la shaqeynaya hoggaamiyeyaasha bulshada iyo qabaa'ilka/jilibyada.

Isku-keenidda danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah, Dastuurka Puntland, iyo Dastuurka Somaliland waxaa ay dhigayaan siyaabo badan oo dadweynuhu ay cabashooyinkoodu iyo danahooda ku soo gudbin karaan oo aan ahayn doorashooyinka. Aftida dadweynaha ayaa ah hab waxtar leh oo dadweynaha looga qaybgeliyo arrimo gaar ah oo muhiim ah, sida wax-ka-beddelidda dastuurka. Awoodda saraakiisha la doortey cabasho loogu gudbin karo, ee ay dhigayaan dastuurrada Somaliland iyo Puntland, ayaa sidoo kale muujineysa fursad ay si mug weyn ay dadweynuhu ra'yigooda u muujin karaan.

Qaabab badan oo hadda jira ayaa muujinaya fursado ay koox tiro badan oo muwaadiniin ah ay uga qaybqaadan karaan geeddi-socod wax looga beddelayo sharci-dejinta ama dastuurka. Tusaale ahaan, Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa uu dadweynaha awood u siiyey in ay duraan dastuurinimada sharciyada la ansaxiyey, laakiin arrintani waxaa ay u baahan tahay in ay taageeraan ugu yaraan 10,000 muwaadin. Dastuurku ma bixinayo shuruudo kale oo dhaafsiisan muwaadinimada oo lagu. Qodobbadaan ayaa bixinaya fursad ka-qaybgal dadweyne, laakiin heerka taageerada loo baahan yahay ayaa laga yaabaa in tallaabooyinka noocaas ahi ay ka dhigaan kuwo aan waaqici ahayn.

3.1.6 Arrimaha Dhaqanka

■ Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah (2012)

Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah waxaa ku jira qodob ka munaaqashoonaya hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo sida xeer-dhaqameed loo dhexgelin karo qaab-dhismeedka dowladeed ee rasmig ah. Qodobku waxaa uu sheegayaa in madaxweynayaasha iyo saraakiisha sare ee dowladaha xubinta ka ah federaalka ay si joogto ah u kulmi doonaan si ay uga wada xaajoodaan arrimo badan, oo ay ka mid tahay xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggaamiyeyaal dhaqameedka iyo ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka, iyo arrimo kale.¹⁴⁰ Hogaamiyeyaal iyo odeyaal dhaqameedka ayaa sidoo kale ka mid noqonaya guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta.¹⁴¹

■ Dastuurka Dowlad-goboleedka Puntland ee Soomaaliya (2012)

Dastuurka Puntland waxaa uu sidoo kale isku dayayaa in uu hoggaamiyeyaal-dhaqameedka ka-qaybgeliyo isaga oo siinaya mas'uuliyad gaar ah oo ay ku xalliyaan muranka iyo wixii is-maandhaaf ah ee dhex-mara beelaha iyo qabaa'ilka; dastuurku waxaa uu hoggaamiyeyaashaa ugu yeerayaa in ay talo ka soo jeediyaan ama ay u helaan xal nabadeed.¹⁴² Go'aamada ay guddoomiyaan hoggaamiye dhaqameedyada ayaa sidoo kale si rasmi ah loo aqoonsanayaa waana in laga diiwaangeliyaa Maxkamadda Derejada Koowaad.¹⁴³ Iyada oo aqoonsi dheeraad ah siineysa doorka muhiimka ah ee hoggaamiye-dhaqameedka, dowladda Puntland waxaa ay sanadkii 2009 qa-banqaabisey shirweyne ay yeesheen hoggaamiyeyaal-dhaqameedka si ay dib ugu eegaan, u mideeyaan, ayna u jaangooyaan xeer-dhaqameedka Soomaalida. Shirweynahan ayaa sidoo kale waxaa lagu dhisey shabakad ka dhaxaysa hoggaamiyeyaal-dhaqameedka.¹⁴⁴

Dastuurka Puntland waxaa uu sidoo kale dhiirrigelinayaa in xeer-dhaqameedka si rasmi ah loo dhexgeliyo gar-soorka, isaga oo garsoorka ku waajibinaya in ay aqoonsadaan heshiisyada khilaafaadka ee xeerka ku dhisan.¹⁴⁵ Dastuurku waxaa uu sidoo kale aqoonsanayaa xeer-dhaqameedka aan ka horimaaneyneyn Shareecada Islaamka iyo xeerarka kale ee Puntland.¹⁴⁶

■ Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

In kasta oo aan weligii la magacaabin, haddana Dastuurka Somaliland waxaa uu dhisayaa Guddi Culimo, oo ka mas'uul ah in ay go'aamo rasmi ah ka gaaraan khilaafaadka diinida ah iyo in ay si rasmi ah caddeyn uga bixiyaan khilaaf rasmi ah ee abuurma iyo in ay go'aamiyaan in wixii la isku qabto ay khilaafsan yihiin Shareecada iyo in kale.¹⁴⁷ Xubnaha guddiga Culimada waa in aan lala xiriirin xisbi siyaasadeed ama koox diimeed gaar ah waxaana soo magacaabaya guddi uu soo xulay Golaha Guurtida, oo la tashanaya dowladda.¹⁴⁸

Golaha Guurtida waxaa uu door muhiim ah laakiin marar qaar doodi ka timaaddo uu hoggaamiyeyaasha dhaqanka ka siiyaa maamulka dowladeed ee Somaliland. Golaha Guurtida waxaa uu dhexdhexaadiyey oo uu xalal u heley xaalado cakirnaa, laakiin waxaa uu sidoo kale abuuray dhibaatooyin ka dib markii uu go'aamiyey in uu

¹⁴⁰ Ibid. Qodobka 52.

¹⁴¹ Ibid. Qodobka 111.

¹⁴² Ibid. Qodobka 108(4).

¹⁴³ Ibid. Qodobka 108(6).

¹⁴⁴ "Puntland Traditional Leaders Conference: Declaration" (UNDP Somalia, February 11, 2009), http://www.undp.org/content/dam/somalia/docs/press/Declaration_-_Puntland_Traditional_Leaders_Conference.pdf.

¹⁴⁵ DASTUURKA DOWLAD-GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA, DIS. 2009(Som.), qod. 89(9).

¹⁴⁶ Ibid. Qodobbada 89(9) iyo 108.

¹⁴⁷ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.), qod. 115.

¹⁴⁸ Ibid. Qodobbada 118 iyo 119.

sameysto muddo kordhin uuna muddo-kordhin u sameeyo madax-weynaha.¹⁴⁹ Intaa waxaa dheer, arrinta iyana weli xiisad abuureysa waa su'aasha ah in loo baahan yahay in Golaha Guurtida si toos ah loo soo dooranay iyo si aan toos ahaynba loo soo dooranayo. Odeyaal-dhaqameedka waxaa ay door muhiim ah ka qaateen dhisidda hay'adaha Somaliland iyo ilaalinta nabadda. Odeyaasha ayaa door muhiim ah ka soo qaatey dejinta nidaamyo awoodda si nabad ah looga soo wareejiyey mileteriga looguna wareejiyey xukum rayid ah sanadkii 1993^{dii}. Doorarka odeyaal-dhaqameedka qabaa'ilka ay ku lahaayeen xalalka siyaasadeed iyo heshiisyada nabadeed ayaa door ku lahayd in Somaliland ay ahaato gobol inta badan deggan oo ammaan ah tan iyo sanadkii 1997^{dii}.¹⁵⁰

Golaha Guurtida waxaa uu sidoo kale madax-dhaqameedka kale kala tashadaa arrimaha diinta, nabadgelyada, difaaca, dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshada.¹⁵¹ Odeyaashu waxaa ay door muhiim ah ka qaataan qaab-dhis-meedka bulsho ee aan rasmiga ahayn, maaddaama ay yihiin kuwa hoggaamiya wad-xaajoodyada iyo abaabulka bulshada, waxaana ay qayb ka yihiin qaab-dhismeedka beelaha.¹⁵² Hoggaamiyayaasha beelaha waxaa ay aad uga soo horjeedeen in haween ay ka mid noqdaan golahooda waxaana ay xaddideen kuraasida ay haweenku ku yeelanayaan baarlamaanka.¹⁵³

■ Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)

Dastuurkii 1960 kuma jiraan qodobbo ka hadlaya arrimihii dhaqan ahaan soo jireenka ahaa.

Tusaha 6aad - Is-barbardhigidda qodobbada ku saabsan arrimaha dhaqanka

	Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (2012)	Dastuurkii Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960)
Qaababka la xiriira arrimaha dhaqanka	<ul style="list-style-type: none"> • Madaxweynayaasha iyo saraakiisha sare ee dowladaha xubinta ka ah federaalka in ay ka wada xaajoodaan xiriirinta hoggaamiyeyaal dhaqameedka iyo horumarinta xeer-dhaqameedka (Qod 52) • Guddiga Runta iyo Dib-u-heshiisiinta waa in ay ka mid noqdaan odeyaal iyo hoggaamiyeyaal dhaqameedka (Qod 111) 	<ul style="list-style-type: none"> • Kuma jiraan qodobbo u habboon.

Daraaseynta qaababka hadda jira

Wada-tacaamulka qaababka guud ee dastuurrada

Si la mid ah dhinaca (strand) ka-qaybgalka dadweynaha oo kale, ayaa hababka guud ahaan dowladaha heerarka kala duwan ee la xiriira arrimaha dhaqanka aaney u ahayn kuwo kala madax-bannaan. Hay'ad sharci-dejin ama mid la-talin oo ay ka mid yihiin hoggaamiyayaasha diinta iyo/ama dhaqanka ayaa ka jiri karta heerka qaran, heerka dowlad qayb ka ah federaal, ama labadaba.

Maaddaama Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ahi ay ku jiraan dhowr qodob oo ku saabsan arrimaha dhaqanka, sida ay isaga hor imaan karaan qoraallada labada dastuur ayaa yar. Haseyeeshee, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, ma faahfaahinayo geeddi-socodka lagu soo xulayo hoggaamiyayaasha dhaqanka ee

¹⁴⁹ Ibid. Qodobka 83(5). Golaha Guurtida waxaa uu muddadiisa afar sano ku kordhistey bishii Sebtembar 2006. Ka doorashadii madaxweynenimada ee 2010kii, haddana muddada Golaha Guurtida ayaa mmar kale la kordhiyey oo la gaarsiiyey ilaa 2012ka.

¹⁵⁰ Mark Bradbury, Adan Yusuf Abokor, and Haroon Ahmed Yusuf, "Somaliland: Choosing Politics over Violence," *Review of African Political Economy* 30, no.97 (2003): 455-478, <http://www.jstor.org/stable/4006988>.

¹⁵¹ DASTUURKA JAMHUURIYADDA SOMALILAND, May 31, 2001(Som.), qod. 61(4).

¹⁵² Mark Bradbury, *Becoming Somaliland* (Bloomington: Indiana University Press, 2008), 16-17.

¹⁵³ International Republican Institute, *Parliamentary Election Assessment Report*, 14. Doorashooyinkii baarlamaanka ee 2005tii, odeyaasha beelaha ayaa si mug leh gacanta ugu hayey geeddi-socodka soo magacaabidda tartamayaasha. Taasi waxaa ka dhalatey, in 7 ka mid ah 246 tartamayaashii la soo magacaabay ay ahaayeen haween.

looga hadlay Qodobka 52aad. Waxaa ay iska hor imaan karaan marka geeddi-socodka soo-xulidda ee dowladdu aanu waafaqsaneyn geeddi-socodka soo xulidda ee dowladaha xubinta ka ah federaal.

Isu-keenidda danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan

Dastuurrada Somaliland iyo Puntland waxaa ay abuurayaan hay'ado rasmi ah oo dowladda ka mid ah oo matala danaha hoggaamiyeyaasha diimaha iyo kuwa dhaqanka. In kasta oo ay xasaasi tahay, in si toos ah iyo si aan toos ahaynba loo soo doorto ay hubin kasta in si ballaaran loogu daro danaha ayna gacan ka geysan karto in la yareeyo in uu ku xoog yeesho fasiraad gaar ah oo loo fasiro sharciga islaamka ama xeer-dhaqameedka. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah kama munaaqashoonayo hay'ado rasmi ah, laakiin waxaa uu dhiirrigelin karaa in lagu daro iyada oo loo marayo hay'ado abuuristooda loo maro xeer-dejin.

Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu sidoo kale dowladda federaalka ugu baaqayaa in ay horumariso dhaqamada iyo afguriga dadka laga tiro badan yahay.¹⁵⁴ Qodobkaan waxaa uu taageerayaa dhiirrigelinta is-waafajinta siyaasadeed, in kasta oo qoraalku aanu si gaar ay u sheegeynin habab la taaban karo oo lagu hubinayo in danaha la kobciyo lana ilaaliyo.

¹⁵⁴ DASTUURKA FEDERAALKA KU-MEELGAARKA AH, Agoosto 1, 2012 (Som.), qod. 31.

4. Sharaxaadda fursadaha is-waafajinta siyaasadeed

Qaybtan waxaa ay kulmineysaa (1) fahamkii laga heley daraaseyntii lagu sameeyey qaababka hadda jira iyo hirgelinta qaababkaas, (2) danaha iyo aragtiyaha lagu heley la-tashiyadii lala sameeyey kuwa ay khuseyso ee Soomaalida ah, iyo (3) saamiga qaababka farsamo ee laga soo qaatey cilmi-baaristii daraasad-xaaladeedda ahayd. Is-dhexgelinta macluumaadka laga soo ururiyey ilahaan ayaa gacan ka geysanaya in is-waafajinta siyaasadeed ay ahaato mid gebi ahaanba khuseysa xaaladda Soomaalida. Sidaa daraaddeed, waxyaabaha ku jira qaybtan waxaa ay muujineyaan waxyaabaha asalka ah ee loo adeegsan doono sameyta noocyada fursadaha lagu kala dooranayo qaybta xigta.

'Tixgelimaha' waxaa ay muujineyaan baahiyaha iyo culeysyada xaaladeed ee hadda ka jira Soomaaliya, iyaga oo xoogga saareya xaqiiqooyin gaar ah oo ay tahay in maskaxda lagu hayo marka la eegayo suuragalnimada iyo rabitaanka noocyada la kala dooran karo. 'Meelaha ay fursadaha ka jiraan' waxaa ay si kooban uga muuqashoonayaan hababka farsamo ee suuragalka ah iyo qaababka is-waafajin siyaasadeed looga sameyn karo Soomaaliya marka laga hadlayo guud ahaan lixda dhinac/*strands*. Cilmi-baarista daraasad-xaaladeedda ah ayaa intaa ka dib gacan ka geysaneysa sameynta qaabka guud iyo hababka farsamo ee gaarka ah ee lagu soo qaatey meelaha ay fursaduhu ka jiraan, iyo sidoo kale noocyada la kala dooran karo ee lagu sheegey Qaybta/waaxda 5aad.

4.1 Tixgelinta sameynta noocyada kala duwan

Ka hor inta aan la daraaseyn noocyada la kala dooran karo, waxaa muhiim ah in la ogaado xaaladda Soomaaliya ee qaababkan dowladeed lagu saleeyey. Noocyada la tixgeliyey ee lagu soo qaatey qaybtan/waaxdan waa bay'aamin lagu sameeyey baahiyaha, fikradaha, iyo hamiga ay dadku sheegteen, kuwaas oo laf ahaantooda muujinaya in ay yihiin dano siyaasadeed. Danahaan waxaa ay gacan ka geysanayaan in la sameeyo indho Soomaali ku gaar ah oo lagu daraaseeyo noocyada la kala dooran karo oo lagana yaabo in ay muujiso meelo gaar ah oo la beegsado si diiradda loo sii saaro.

Tusaale ahaan, kobcinta hay'adaha maamul ee Soomaaliya ayaa hadda waxaa ka maqan oo aaney lahayn qaab ka wada dhexeeya oo ay yeeshaan. Somaliland waxaa ay sanado haysatey degganaan ilaa xad ah waxaana ay si guul leh u qabatey doorashooyin isku xiga. Puntland waxaa ay ku jirtaa kala-guur waxaana ay waddaa geeddi-socod si xaqiiqada ku dhisan loo filin karo in mustaqbalka dhow la qabto doorashooyin. Dadaallo lagu dhisayo maamullo cusub ayaa maraya marxalado kala duwan, Maamulka Ku-meelgaarka ah ee Jubba ayaa la dhisey waxaana uu jirayaa ilaa 2015ka, iyada oo geeddi-socod dowlad-goboleed xubin ka ah federaalka looga dhisayo gobollada dhexe uu bilowdey bishii Maajo 2013.

Arrimahan soo socda ayaa muujinaya tixgelinno kale oo muhiim ah oo tilmaan u ah deegaanka oo sidoo kalena muhiim u ah xaqiijinta is-waafajin siyaasadeed.

4.1.1 Dhaqanka

- Soomaalidu waa isku diin iyo isku dhaqan, luqad ahaanna Af-Soomaaliga ayaa ah kan dadka ugu badan ay ku hadlaan, in kasta oo dad aan tiro yareyn ay iyana ku hadlaan Af-Maay.
- Taariikhiyan, khilaafaadku waxaa uu ku saleysneynaayeen kala-qaybsanaan qabiil iyo gacan-ku-haynta iyo qaybsashada kheyraadka. Khilaafaadkan ayaa maanta iyana waxay ka jiraan heer kasta oo ka mid ah heerarka bulshada. Beelaha ayaa ku dagaalamaya kheyraadka degaanka, sida daaqa iyo biyaha, wax-

aana khilaafaadka ballaaran ee maanta dhacaya ay la xiriiraan gacan-ku-haynta dekadaha, waddooyinka ay sahaydu soo maro, iyo hantida dakhliga soo saarta.

- Tobanaan sanadood oo ay dhacayeen xad-gudubyo iyo colaado ayaa dhaliyey dhaqan is-aaminaad la'aan iyo dhagar.
- Soomaali badan ayaa waxa ay marka isu aqoonsan yihiin in ay yihiin qabiilkooda, jilibkooda, gobolkooda, diintooda, isirkooda, ugu dambeyntana muwaaddinimadooda Soomaalinimo.
- Matalaadda, wada-xaajood degaan, iyo amniga bulshada ayaa caadi ahaan lagu helaa qaabka soo jireenka ah ee qabaa'ilka ku dhisan. Odeyaasha degaanka iyo maxkamadaha Shareecada ayaa xalliya badi khilaafaadka heerka degaan ah, khilaafaadkaas oo ay ka mid yihiin arrimaha qoyska, colaadaha degaanka, iyo dhaxalka. Colaado goboleed oo badan ayaan weli la xallin. In nidaamyadii sharci ee soo-jireenka ahaa ay barbar-socodaan nidaamyada sharci ee rasmiga ah waxaa ay u baahaneysaa in si taxaddar leh loo qaabeeyo si loo hubiyo in la helo sharci shaqeynaya. Casharro ayaa laga baran karaa waayo-aragnimadii laga dhaxley Somaliland iyo Puntland labadaba.

4.1.2 Siyaasadda

- Rabitaanka federaalinimo ama go'itaan waxa ay muujinayaan kooxaha qaar ayaa waxaa dhiirrigeliyey jiritaankii dowlad dhexe oo dadka ku xadgudbi jirtey.
- Fahamka dadweynaha ay ka qabaan federaalnimada ayaa kooban; kooxaha qaar waxaa ay sheegtaan in federaalnimadu ay tahay khiyaanno dibadda ka socota oo lagu doonayo in lagu daciifiyo umadda Soomaaliyeed.
- 'Dowlad-goboleedyo' cusub ayaa hadda lagu dhisayaa geeddi-socod degdeg ah, iyada oo ay hagayaan oo keliya qodobbo aan caddeyn oo ku jira Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, oo aaney hageynin qaab guud oo siyaasadeed oo lagu heshiiyey.
- Gacan-ku-haynta iyo maareynta nidaamyada ammaanka (mileteriga, booliska, maliishiyaadka, iwm.) ayaa weli ah arrin muhiimad la siiyanayo. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah si kooban ayuu uga hadlayaa, laakiin ma cayimayo sida xoogaggaa ay u wada tacaamulayaan, sida mas'uuliyadaha loo kala qaybinayo, iyo sida ay qaababka amniga ay ugu kala duwanaanaanayaan dowlad-goboleedyada jira iyo kuwa soo ifbaxaya. Dastuurku sidoo kale kama hadlayo haddii/sida maamulka cusub ee amniga loogu biirinayo maliishiyaadkii hore.

4.1.3 Arrimaha Bulsho/dhaqan-dhaqaale

- Soomaaliya waa mid ka mid ah dalalka ugu saboolsan dunida.¹⁵⁵ Qaar ka mid ah gobollada iyo bulshooyinka Soomaaliya ayaa si mug weyn uga saboolsan qaar kale.
- Gacan-ku-haynta iyo qabsashada kheyraadka ayaa weli ah arrin khilaafaad sababta, taas oo macnaheedu yahay in ka heshiinta qaybsashada dakhliga ay sii noqoneyso mid muhiimaddeedu ay sii kordheyso, gaar ahaan haddii tiro ganacsi geli karta oo saliid/batroot iyo kheyraad kale oo dabiici ah la helo. Dhaqaalaha reer-guuraaga waxaa xuddun u ah xoolaha nool. Maareynta dhulka daaqsinta ah iyo biyaha ayaa udub dhexaad u ah yareynta khilaafaadka/colaadaha. Soomaaliya ayaa ka faa'iideysan karta sida ay dalalka kale u maareeyeen culeysyo kuwaan la mid ah.

¹⁵⁵ Sida ay tilmaamayaan qiyaasihii Liiska Tirsiga Horumarka Aadanaha/*Human Development Index* ee 2010, Soomaaliya waa dalka 165aad ee 170 dal oo liiska ku jira. Eeg United Nations Development Programme Somalia, *Somalia Human Development Report 2012*, (United Nations Development Programme Somalia, 2012), 27, http://hdr.undp.org/sites/default/files/reports/242/somalia_report_2012.pdf.

- Degaannada ugu waaweyn ee waraabka ku baxa ayaa dad badan u soo guureen oo dhul badannaba la qabsadey.¹⁵⁶ Arrimahaas ayaa weli ah kuwo aan la xallin ayna u badan tahay in ay sii bataan ka dib marka ay soo noqoto beero-falashadii ganacsiga ahayd.
- Ka dib labataan sano oo colaadi socotey, ayaa wax is-dhaafsiga ganacsiga badidiisu waxaa uu ka dhacaa dibadda suuqa rasmiga ah. Maaddaama aaney jirin cid xakameysa ayaa waxa ay sahashey waxyaabo sida dhoofinta dhuxusha, si xun uga faa'iideysashada kheyraadka badda, lacagaha been-abuurka lagu daabacdo, tahriibinta dadka iyo maan-dooriyaha, isticmaalka qaadka ee aan la xakameyn, iibinta daawooyinka aan waxtarka lahayn, iyo burcad-badeednimada. Kooxo hoosta heshiis ka ah ayaa ka jira qayb kasta oo dhaqaalaha ka mid ah.
- Soomaali badan ayaa hela lacago xawilaad ay ugu soo direen qaraabada iyo saaxiibbada qurba-joogta ah.

4.1.4 Bulshooyinka u baahan in dareen gaar ah loo lahaado

- Fogeynta dadka laga tiro badan yahay, sida beelaha 'Baantuuga', iyo xuquuqaha shakhsiyaadka ee aan la ilaalinin ayaa ah waxyaabaha dhaliya colaadda.
- Maamulka dowladeed ee Soomaalida waxaa gacanta uu ugu jiraa ragga aqoonta iyo dhaqaalaha haysta, waxaana dibadda ka ah haweenka, dhallinyarada, iyo dadka laga tiro badan yahay.
- Beelaha laga tiro badan yahay oo aan lahayn dhulal ay aqlabiyad ku yihiin ayaa sii ahaan kara kuwo mataalaad yar ku helia geeddi-socod doorashooyin dimuqraaddi ah haddii aan tixgelin gaar ah aaney helin.
- 'Jiilka lumey' ee Soomaaliya (kuwii dhashay ka dib 1991) ayaa heley waxbarasho aad u yar si yar ayaana ay u arkeen maamul dowladeed. Dhallinyarada Soomaalida ah badidoodu waxaa ay ku dhex koreen bulsho ay saameysey colaad dabadheer. Waxa xaaladahan ka dhalan kara weli si buuxda looma fahmin.
- Colaad iyo dhibaatooyin bani'aadamnimo ayaa barokiciyey malaayiin Soomaali ah taas oo sababtey qaaxooti tiro badan oo gala dalalka deriska ah , iyo tiro badan oo dad gudaha ku barokacay oo jooga guud ahaan dhulka iyo sidoo kale bulsho firfircoon oo qurbo-joog ku ah dacallada dunida.
- Dad aan tiro yareyn ayaa cudurro dhimmirka la xiriira ka qaadey colaadda muddada dheer socotey.

4.1.5 Qasayaal

- Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hor taagan nabadda waa kooxaha hubeysan ee aan ahayn ciidamada qaranka oo weli ka soo hor jeeda Dowladda Federaalka.
- Qasayaasha kale waa ay ka cod gaaban yihiin oo aad looma maqlo laakiin kama dhib yara. Burcad-badeedda hantida haysata, ganacsatada hubka, tahriibiyeyaasha maandooriyaha, tahriibiyeyaasha qaaxootiga, iyo saraakiisha dowladda ee musuqmaasuqa ku shaqeyya, dagaal-oogayaal iyo qaar ka mid ah siyaasiyiintii hore ayaa aan dooneyn in ay soo noqdaan dowlad lala xisaabtamo iyo talinta sharciga.

4.1.6 Dhinaca Caalamiga ah

- Taariikhda Soomaalida waxaa ka muuqda raadad aan yareyn oo goboleed iyo kuwo caalami ah. Arrintan waxaa muujinaya colaadihi waqooyiga Kenya (Dagaalkii 'Shuftada' ee 1960-maadhii iyo 1970-maadhii) iyo kii Itoobiya (Dagaalkii Ogaadeenya ee 1976-8).
- Maaddaama ay ahayd Dal lagu hardameyey xilligii Dagaalkii Qaboobaa, Soomaaliya waxaa ay hub aad u tiro badan ka hashey dhinacyadii is hayey labadaba.

¹⁵⁶ Somalia Conflict Early Warning Early Response Unit, *From the bottom up: Southern Regions - Perspectives through conflict analysis and key political actors' mapping of Gedo, Middle Juba, Lower Juba, and Lower Shabelle* (Somalia Conflict Early Warning Early Response Unit, September 2013),

- Arrinta ku saabsan xasiloonaada Soomaaliya ayaa weli ah mid ay welwel ka qabaan Dalalka deriska la ah. Dhammaan saddexda dal ee deriska la ah ciidamo ayaa ka jooga Soomaaliya waxii loo soo gaarey Disembar 2013. IGAD iyo Midowga Afrika (AU) ayaa danaha aan yareyn ee ay ku leeyihiin Soomaaliya waxaa muujinaya dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee ay ka wadaan iyo mileteriga ay geeyeen.
- Waqtigaan la joogo, deeq-bixiyeyaal caalami ah ayaa maalgeliya adeegyada bulshada, taageerada ay helaan hay'adaha dowladeed, iyo hawlgallada amniga.
- Argagaxisanimada, burcad-badeedda, ganacsiga, iyo colaadaha meelaha kale ku baaha ee ka jira Soomaaliya ayaa saameyn bulsho iyo mid dhaqaale oo mug leh ku leh caalamka, taas oo xasiloonnida dalka muhiim uga dhigtey bulshada caalamka.
- Labaatan sano oo colaad ay ka jirtey ayaa dad badan oo Soomaali ah ku khasabtey in ay magangelyo u doontaan dibadda. Arrintan ayaa keentey in Soomaalidu noqoto mid ka mid ah bulshooyinka qurba-jooqtoodu ugu baahsanaan badan tahay dunida oo dhan.

4.1.7 Dhinaca tilmaamaha dadka

- Sida ay qabaa'ilku ugu kala badan yihiin degaan gaar ah iyo nidaamka doorashada ee la qaato, ayaa saameyn ku yeelan kara matalaadda danaha dadka kala duwan ee dowlad-goboleedyada gudahooda, taasna waxaa ka sii dhaleneysa matalaadda ay ku yeelanayaan heerka qaran (Eeg *Sanduuqa 1aad – Xuduudaha dowlad-goboleedka iyo Matalaadda*).
- Go'aaminta xuduudaha maamul ee gudaha waxaa ay u baahan tahay tixgelinta tirada dadka iyo qabaa'ilka deggan degaan maamul siyaasadeed gaar ah oo maamul siyaasadeed loo dhisayo si loo yareeyo suuragalnimada in qabaa'il gaar ah ay sed-bursi ku helaan. Haseyeeshee, lama hayo xog la isku halleyn karo oo ku saabsan tirada dadweynaha iyo sida ay qabaa'ilku u kala degaan Soomaaliya, gaar ahaan gobollada koonfurta iyo bartamaha.
- Arrinta la xiriirta xuquuq u lahaanshaha degganaanshaha iyo kheyraadka ayaa muhiimad gaar ah ay siinayaan bulshooyin badan. Beelaha/bulshooyinka aan degganeyn ama aan u dhalan xuquuq ma u yeelanayaan in ay ka shaqeeyaan ayna hanti ku yeeshaan qaybaha kala duwan ee dhulka? Xaggee ayaa ay beelaha/bulshooyinka kala duwan ka codeynayaan yaana ka faa'iideysanaya kheyraadka degaan gaar ah. In su'aalahan loo xalliyo si dhiirrigelineysa u dhammaanshaha ayaa wax weyn ku biirin kara dhisidda taageerada loo hayo heshiis kasta oo la soo jeediyo.

4.2 Culeysyada iyo fursadaha

Meelmarintii Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, doorashadii dowlad cusub, iyo furitaankii wada-hadallo ay yeelanayaan Somaaliya iyo Somaliland ayaa bilaabay geeddi-socod muhiim ah oo dib loogu habeynayo maamulka dowladeed. Geeddi-socodyadaan dhexdooda, waxaa ku jira meelo muhiim ah oo la gelin karo is-waafajin siyaasadeed, sida:

- Wada-hadallo joogto ah oo la xiriira geeddi-socodka sameynta dastuurka iyo lahaanshaha dadka ee natiijada ka soo baxda (t.a, afti qaran oo dadweyne).
- Wada-hadallo la xiriira xisbiyo siyaasadeed iyo nidaamyo doorasho, oo loogu talogaley doorashooyinka heerka qaran, heerka dowladaha xubinta ka ah federaalka, iyo heerka dowladaha hoose.
- Geeddi-socodka wadahadallada lagu go'aansanayo qaabka siyaasadda awood-baahinta, mas'uuliyadaha dowladaha hoose, iyo qaababka fulinta ee la xiriira oo looga dan leeyahay in lagu aburo maamullo degaan iyo kuwo dowladaha xubinta ka ah federaalka.
- Dhisidda iyo qabanqaabinta guddiyo cusub oo hawshoodu tahay maareynta geeddi-socodyada doorashooyinka, calaamadinta soohdimaha, iyo dib-u-heshiisiin joogto ah.

Qaybtan soo socota waxaa ay muujineysaa meelaha la xiriira guud ahaan lixda dhinac/*strands* oo noqon kara fursado lagu gaaro in si hufan la isu waafajiyo danaha iyo aragtiyaha siyaasadeed.

4.2.1 Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta

Soomaalidu waxaa taariikhiyan culeysyo ka soo wajaheen sameynta nidaam dowladeed oo hufan, waxqabad leh, oo dadka isu keena. Taariikhdan maamul-xumada ah ayaa xoojisey in kooxaha qaar ay dalbadaan federaal iyo go'itaan. Haddana, federaal iyo/ama go'itaan oo keliya ma ahan arrimaha jira ee la kala dooran karo. Meelahan ay fursaduhu ka jiraan ee soo socda ayaa tilmaamaya habab gacan ka geysan kara is-waafajinta danahaan kala duwan:


- Xulashada qaab dowladeed oo xoojin kara awood-baahinta, oo ay ka mid tahay hab dhiirrigelinaya qoondaynta mas'uuliyado u habboon awoodaha iyo fikradaha guud ahaan dowladaha maamuli kara.
- Isu-dheellitiridda awoodda fulinta ee heerarka qaran iyo kan degaan iyada oo ay la socdaan habab xisaabtan oo xaqiiqo ku dhisan oo la siiyo laamaha sharci-dejinta ama hay'ado kale haddii nidaamka dowladeed uu yahay mid madaxtooyo, baarlamaani, ama mid labadaba kulminaya.
- Raadinta noocyo kala duwan oo ah dowladaha ka hooseeya kuwa heerka qaranka oo uu yeesho nidaam federaal (t.a. dowlad-goboleedyo ama gobollo) oo ku habboon heerarka awoodaha kala duwan ee hay'adaha/maamullada hadda jira.
- Hirgelinta awood-baahin maaliyadeed oo daahfuran oo hufunna oo wax ka qabata baahiyaha dhinaca kheyraadka ah ee kala duwan ee ka kala jira qaybaha dalka.
- Sameynta shuruuc la xiriira soo-saarista/ururinta iyo qaybinta dakhliga ka soo baxa ilaha kala duwan, oo ay ka mid yihiin dekadaha, garoomada diyaaradaha, kaabayaasha aasaasiga ah, iyo kheyraadka dabiiciga ah.

Sanduuqa 1aad - Sida ay u wada tacaamulayaan dhinacyada: soohdimaha gudaha iyo nidaamyada doorashooyinka

Sida dadku ay u kala deggan yihiin, sida loo habeeyo degaannada (juqraafi ahaan), iyo nidaamyada doorashooyinka ayaa isugu xirmaya qaab saameyn weyn ku yeelan kara matalaadda iyo u dhammaanshaha.


Soo qaado xaalad Qabiilka A iyo Qabiilka B ay wada degaan dhul gobollo isku dheggan ah oo Qabiilka A uu labada gobol dadka dega ka yahay 55%. Haddii aan ka soo qaadno in xubnaha Qabiilka A ay isku dano yihiin (sida, in dhammaan xubnaha Qabiilka A u wada codeynayaan wakiil ka tirsan Qabiilka A), marka uu jiro nidaamka doorashada ee aqlabiyaddu ay wada qaadata dhammaan wakiillada, Qabiilka A ayaa labada gobol waxaa uu gacanta ku haynaya oo uu qaadanaya dhammaan wakiillada ku jira baarlamaanka gobolka. Tusaale ahaan, haddii baarlamaanka goboleed ee gobol kasta uu ka kooban yahay 10 xubnood, markaa labada gobolba waxaa ay lahaanayaan 10 xubnood oo ka wada socda Qabiilka A.

TUSAALAHA 1aad – Qabiilka A oo aqlabiyad ku leh labada gobolka




Haddii soohdimaha si kale loo dhigi lahaa, oo Qabiilka A uu lahaan lahaa aqlabiyad 70% ah hal gobol, halka Qabiilka B uu lahaan lahaa aqlabiyad 60% ah gobolka kale. Haddii aan maskaxda gashanno in qabiil kasta uu dano gaar ah oo cayiman uu leeyahay (sida, Xubnaha Qabiilka B in ay u codeynayaan wakiillka Qabiilka B, halka kuwa Qabiilka A ay sidaa oo kale sameynayaan), haddii nidaamka doorashadu uu yahay kan aqlabiyaddu ay wada qaadata dhammaan wakiillada, Qabiilka B waxaa uu heli lahaa wakiillo ka badan kuwa uu Tusaalaha 1aad ee kore. Baarlamaan goboleedka, Gobolka 1aad waxaa matalaya 10 xubnood oo ka socda Qabiilka A, Gobolka 2aad waxaa mataya 10 xubnood oo ka socda Qabiilka B.

TUSAALAHA 2aad – Qabaa'ilka A iyo B oo midba uu gobol ku badan yahay



Taas beddelkeeda, nidaamka doorashada ee saamigalka ku dhisan, wakiillo ka socda Qabiilka A iyo Qabiilka B ayaa ka mid noqonaya baarlamaan goboleedka iyo sidoo kale baarlamaanka qaranka. Baarlamaan goboleedka, Gobolka 1aad waxaa ka mid ahaanaya 7 xubnood oo Qabiilka A iyo 3 xubnood oo Qabiilka B; Gobolka 2aadna waxaa ka mid ahaanaya 4 xubnood oo Qabiilka A iyo 6 Xubnood oo Qabiilka B ah.

Habkaan ayaa laga yaabaa in uu si kan kale ka wanaagsan u dhiirrigelinayo is-waafajin siyaasadeed isaga oo dhinacyada kala duwan siinaya matalaad rasmi ah, sidaasna ay ku geli karaan hay'adaha maamulka dowladeed. Dooddan waxaa ay ku dhisan tahay oo ay hirgeli kartaa fahamka ah in qabiil kasta uu leeyahay dano la cayimi karo oo ay wadagaan. Waaqici ahaan, qabaa'ilka iyo kooxaha kaleba waxaa ay badanaa ilaashadaan dano aad u kala duwan iyo kuwo aan aad u caddeyn.



4.2.2 Nidaamka/nidaamyada Doorashada

Natiijooyinkii doorashooyinkii 1960-yadii iyo af-gembigii mileteri ee ka dambeeyey ayaa ay caddahay in ay saameyn mug leh ku yeeshen sida nidaamyada doorashada looga arko Soomaaliya. Taageerada loo hayo in danaha kala duwan ay helaan matalaad caddaalad ku dhisan waxaa dheellitirey doonis loo qabo in aaney dhicin waxyaabo dhalin kara kooxaysi iyo colaad/khilaaf qabiil ku dhisan. Sidaa daraaddeed, hababka doorashada waxaa ay gacan ka geysan karaan abuurista is-bahaysiyo ballaaran waxaana ay sidoo kale dhiirrigelin karaan in matalaad ay helaan danaha dadka laga tiro badan yahay. Iyada oo arrimahaan niyadda lagu hayo, ayaa meelaha ay ka jiraan fursado muhiim ah oo kor loogu qaadi karo is-waafajin siyaasadeed iyada oo loo marayo nidaam siyaasadeed iyo maamulkiisa waxaa ka mid ah:

- In lagu daro wareegyada doorashooyinka laanta fulinta ah oo heer qaran iyo heer dowlad-goboleedba ah, iyada oo lagu darayo qoddobo dhigaya laba wareeg ama “tartan iskucelis ah”.
- Daraaseynta degaanno-doorasho oo kuraasi badan iyo kuwo kursi keliya leh, iyada oo la adeegsanayo nidaamka saamigalka ku dhisan iyo kan isku barxan (eeg *Sanduuqa 2aad – Nidaamyada doorashooyinka iyo matalaadda*).
- Daraaseynta adeegsiga tirada ugu yar ee la oggolaan karo si loo maareeyo tirada kuraasida la siiyo xisbiyada siyaasadeed marka ay jiraan doorashooyinka laanta sharci-dejinta.
- Iskuxiridda doorashooyinka guud ahaan heerarka kala duwan ee maamul dowladeed, iyada oo doorashooyinka dowlad-goboleedyada ay kaabi/bari-taari karaan geeddi-socodka doorashada federaalka.
- Qorista sharciga xisbiyada siyaasadda si loo hubiyo in diiwaangelinta xisbiyada siyaasadda ay dhiirrigeliso danaha kala duwan iyo in xisbiyadu ay fursado ku filan u haystaan in ay cidi ku matesho doorashooyinka (eeg *Qaybta 5.2.1 ee ku saabsan sharciga xisbi-siyaasadeedka*).
- Tixgelinta in la kuwota ama habab kale la adeegsado si loo dhiirrigeliyo matalaad ay helaan haweenka iyo kooxaha kale ee aan matalaadda haysan (t.a. dadka isir ahaan laga tiro badan yahay).
- In doorashooyinka aan tooska ahayn ama magacaabista lagu dheellitiro doorashooyin, gaar ahaan laanta fulinta iyo hay'adaha kale ee leh tiro saraakiil la magacaabay ah, si loo hubiyo in danaha dadka wax dooranaya ay helaan matalaad ku filan.

Sanduuqa 2aad – Nidaamyada doorashooyinka iyo matalaadda:
Nidaamyo is-barbar-socda ama kuwo iskuxiran

Kala doorashada nidaam doorasho waxaa ay saameyn ku yeelan kartaa sida doonista cod-bixiyaha ay uga muuqaneyso sida loo kala helo kuraasida baarlamaanka.

Ka-feker doorashooyinka gole ka kooban 200 kursi:

- 60% ama 120 kursi waxaa lagu dooranayaa habka doorashada ee aqlabiyadda ay wada qaadato kuraasida (t.a. degaanno doorasho oo hal kursi).
- 40% ama 80 kursi waxaa lagu dooranayaa liisas matalaad saamigal ku dhisan.

Nidaamka is-barbar-socda, labada hab ee doorashada si kala duwan ayaa loo kala adeegsadaa.


Nidaamka isku-xiran, labada hab ee doorashada si isku xiran ayaa loo adeegsadaa; hal hab waxaa loo adeegsadaa Xisbiga A waxaa uu helayaa dhammaan 120 kursi ee kuraasta ku dhisan habka aqlabiyaddu ay wada qaadato iyo ku dhowaad 70% ama 56 kuraasta matalaadda saamigalka ku dhisan ah. Xisbiga A waxaa uu helayaa 176 oo ka mid ah 200 kursi (88%). Egsadaa qaybinta koowaad ee kuraasida halka kan kale loo adeegsado in qaybinta lagu dheellitiro si ay u waafaqdo boqolleyda codadka la heley.

Tusaale: Haddii Xisbiga A uu helo 70% dhammaan codadka, lagu bixiyey tartamadii lagu qabtay labada hab doorashada (kan aqlabiyaddu ay wada qaadato iyo kan ku dhisan saamigalkaba).


NIDAAMKA IS-BARBAR-SOCDA: Xisbiga A waxaa uu helayaa dhammaan 120 kursi ee kuraasta ku dhisan habka aqlabiyaddu ay wada qaadato iyo ku dhowaad 70% ama 56 kuraasta matalaad da saamigalka ku dhisan ah.
Xisbiga A waxaa uu helayaa 176 oo ka mid ah 200 kursi (88%).

NIDAAMKA ISKUXIRAN: Xisbiga A waxaa uu helayaa dhammaan 120 kursi ee ah kuraasta goobaha doorasho ee halka kursi leh. Waxaana ay ka tahay 60% wadarta kuraasta 200 ah taasi waxaa ay Xisbiga A xaq u siineysaa waxa aan ka badan 20 kursi oo ka mid ah 80ka kursi ee lagu helo saamigalka.
Xisbiga A waxaa uu helaya 140 oo ka mid ah 200 kursi (70%).

Nidaamka Is-barbar-socda (NB)



Nidaamka Iskuxiran (NX)



4.2.3 Laanta Fulinta

Laanta fulintu waxaa ay kaalin muhiim ah ka qaadan kartaa dib-u-heshiisiinta. Soo xulidda golaha wasiirrada ayaa ka dhigan isu-miisaamid daahsoon oo la isu miisaamayo danaha iyada oo aan looga sii darin dareen-kacsanaanta qabiil ee jirta. Sidii la arkey sanadihii 1960-meeyadii iyo sidii dhowaan ku dhacdeyba Dowladdii Federaalka ee Ku-meelgaarka ahayd, haddii madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha aaney isku fikrad ka ahayn barnaamijka dowladda, waxaa ay u badan tahay in ay ka dhalato xaalad i-jiid aan ku jiidde ah. Meelahan ay fursaduhu ka jiraan ma muujinayaan oo keliya qaabab lagu gaari karo hufnaan, ee waxaa aysidoo kale bixinayaan fursad la isku waafajiyo danaha siyaasadeed iyo xisaabtanba:

- Daraaseynta hababka kala duwan ee loo qaabeyn karo laanta fulinta, sida Gole Fulineed ama mid Federaal oo gobolladu ay matalaad ku lahaadaan laanta fulinta.
- Dhisidda qaabab xisaabtan iyo is-dheellitir la xiriira go'aan-qaadashada laanta fulinta ee dowladda dhexe gudaheeda.
- In la dhexgeliyo kaalin rasmi ah oo ay hoggaamiyeyaasha dhaqanku ku yeeshaan nabad-dhisidda.
- Hirgelinta siyaasadaha dowladda si loo hubiyo daahfurnaanta dejinta siyaasadda, dejinta shuruucda iyo hawlaha dowladda.
- Sameynta tallaabooyin gaar ah oo kor loogu qaadayo matalaadda dadka laga tiro badan yahay iyo haweenka; u dhaqaaqidda maamul dowladeed oo dimuqraadiyad ku dhisan iyo nidaamyo ay aqlabiyaddu ay awoodda wada qaadata waxaa ay keenayaan halis ah in ay yaraato matalaadda ay kooxaha haddaba la xagliyo/fogeeyo ay ku lahaanayaan hay'adaha fulinta iyo sharci-dejinta.
- Daraaseynta hababka xisaabtanka si loola socdo haw-qabadka laanta fulinta iyada oo isla markaana la hubinayo in in hufnaanta aan wax loo dhimmin, gaar ahaan nidaamka maamul ee ah madaxtooyo iyo baarlamaani la isku barxay.
- Go'aaminta tirada wasiirrada ee u habboon si loo hubiyo in qabaa'ilku ay si caddaalad ah xubno ugu yeeshaan.

4.2.4 Laanta sharci-dejinta

Laanta sharci-dejintu waa habka ugu weyn ee dadweynaha ay matalaad ugu yeeshaan dowladda. Dadka Soomaaliyeed waxaa soo marey waayo-aragnimo kala duwan oo la xiriirta hay'ado sharci-dejin oo shaqeeya; Somaliland iyo Puntland ayaa wax xoogaa guulo ah ka gaarey, halka hay'addii sharci-dejinta ee Axdi-Qarameed-kii Ku-meelgaarka ahaa ay ka waxtar yareyd. Taariikhiyan, hay'adaha sharci-dejinta ee Soomaaliyeed waxaa dhib ka haystey matalaadda ay helayeen haweenka iyo sidoo kale qowmiyadaha iyo kooxaha kale ee laga tiro badan yahay. Meelaha ay fursaddu ka jirto ee hoos lagu sheegey waxaa ay isku dayayaan in ay aasaas ka dhigtaan waayo-aragnimadaas dad soo martey, iyaga oo diiradda saaraya cunsurrada si ka wanaagsan sida hadda u dhiirrigelinaya is-waafajinta/is-dhexgelinta danaha:

- Daraaseynta adeegsiga kuwootooyin, kuraasi cid gaar ah loo qoondeeyo, ama habab kale si loo hubiyo in kooxihii horey matalaaddoodu yareyd (t.a. qowmiyadaha laga tiro badanyahay, kooxaha bulshadu xagliso (*dis-advantaged*), iyo haweenka) si macno ku fadhida ay uga qaybgalaan.
- Hubinta in xubnaha baarlamaanku ay si joogto ah ugu safraan meelaha laga soo doorto si ay markaa danaha goobaha ay matalaan loo fahm ayna u soo bandhigaan wakiiladaa.
- Hirgelinta habab dadweynaha loola tacaamulo taas oo xubnaha baarlamaanka ku waajibineysa in ay la shaqeeyaan dadweynaha, sida 'ololeyaal lagu dhegeysanayo dadka/*listening campaign*' oo daaha looga rogey dalka Koonfur Afrika ama sida Sanduuqa Horumarinta Degaannada Doorashada/*The Constituency Development Fund* oo laga fuliyey Kenya (eeg *Qaybta 4.2.5 Ka-qaybgalka Dadweynaha si aad faahfaahin dheeri ah uga hesho*).

- Ku biirinta shakhsiyaad caan ah ama la ixtiraamo oo la magacaabay ama si aan toos ahayn loo soo doorto (t.a. odeyaasha, culimada, xubno ka tirsan bulshada rayidka ah, iwm.) kuwaas oo lagu biiriyo sharci-dejinta ee rasmiga ah.
- Taageeridda habab go'aan-qaadasho oo daah-furan iyada oo loo marayo wada-tacaamul qaabeysan oo lala yeesho dadweynaha (t.a. shirar lagu qabto xarumaha golayaasha degaanka, in idaacad laga soo daayo doodaha baarlamaanka, in dadweynuhu ka-qaybgalaan kal-fadhiyada baarlamaanka, iyo in go'aamada lagu faafiyo warbaahinta ay dadweynuhu jawaab-celin ka soo bixin karaan).
- Hubinta matalaad ay dowlad-goboleedyada ku yeeshaan geeddi-socodka sharci-dejinta, sida in Aqalka Sare la siiyo awood go'aan-qaadasho oo ka ballaaran tan hadda oo ku saabsan sharci-dejinta si gaar ah u taabaneyso dowlad-goboleedyada.

4.2.5 Ka-qaybgalka Dadweynaha

Waqtigaan, qaabab aasaasiga ah ee ka-qaybgalka dadweynah ee Soomaaliya waa kan loo marayo qaab-dhismeedka beelaha. Dadka Somaliland waxaa ay ka qaybqaateen doorashooyin, laakiin dadweynaha jooga meelaha ka baxsan Somaliland ayaa fursado yar u heley in ay la tacaamulaan qaab-dhismeedka dowladeed ee rasmiga ah. Soo xuliddii sanadkii 2012 ay Guddiga Soo-xulidda Baarlamaanka ee Soomaaliya u soo xuleen xubnaha baarlamaanka waxaa ay ku saleeyeen qaab-dhismeedka beelaha, iyaga oo odeyaasha u oggolaadey in ay matalaan danaha kuwa ay wakiilka ka yihiin. Baaxadda hababka ka-qaybgalka dadweynaha ee jira aad bey muhiim u tahay; meelahan ay fursaduhu ku jiraan ee hoos lagu sheegey ayaa ka dhigan qaabab suuragal ah oo loo sameyn karo, marka laga soo tago kuwa lagu soo sheegey lafaguristii qaababka hadda jira ee lagu lafagurey *Qaybta 4.1*:

- Ku-xiirddo kooxaha bulshada degaanka oo lagu xiro qaab-dhismeedka dowladeed ee rasmig ah (t.a. gud-diyada waxbarashada, horumarinta, ama kuwa nabadda iyo amniga).
- In siyaasadda iyo shuruucda loo sameeyo qaab ka-qaybgalkan ku dhisan, iyada oo waraaqo cad oo ra'yi ururin ah lagu dhex wareejiyo oo dadweynahana lagu dhiirrigeliyo in ay ku lug lahaadaan meelmarinta ugu dambaysa ee sharuucda la dejinayo.
- Dhiirrigelinta waxbarasho shacab (*civic education*) oo joogto ah oo qaabeysan oo ra'yi is-dhaafsina ku saleysan, si dhammaan dadka Soomaaliyeed ay u fahmaan ayna uga qaybqaataan sharuucda cusub.
- Sameynta iyo hirgelinta nidaamyo shaqeeya oo dadweynaha ay maamulka kula xisaabtamaan si loo dhiirrigeliyo talinta sharciga.
- Hirgelinta geeddi-socodyo nidaamsan oo loo sameeyo dib-u-heshiisiin, kuwaas oo ay ka mid yihiin cad-daaladdii dhaqan ahaan soo jirtey iyo dadaallada xallinta colaadaha, oo loo qabto si aan qarsoodi ahayn oo dadka u furan.

4.2.6 Arrimaha dhaqanka

Dadka Soomaaliyeed waxaa ay taariikh u leeyihiin is-maamulid. Qaar badan oo ka mid ah guulihii horey loo xaqiijiyey waxaa ay ku yimaadeen iimaanka xooggan ee ay ku qabeen Islaamnimada iyo ixtiraam weyn oo ay u hayeen dhaqanka beelaha ee soo jireenka ah, taas oo ay muujineyso sida joogtada ah ee ay ugu dhaqmaan Shareecada iyo xeerka. Dadka qaar ayaa baqdin ka qabi kara in si rasmi ah ay hoggaamiyeyaasha dhaqanku uga mid noqdaan ay ka dhigan tahay in dib loo noqdey ayna caqabad ku tahay horumarka. Haseyeeshee haddii ay jiraan nidaamyo si wanaagsan u qaabeysan, sida ka jirta Botswana, Malaysia, iyo Ingiriiska (UK), arrintuna in ay sidaa ay sidaa noqoto ma ahan. Xaaladda Soomaalida waxaa ay bixineysaa fursado qaab-dhismeedka dhaqanka loo dhexgelin karo si ka ballaaran kuwa hadda la soo tilmaamey, sida:

- Isku-xirka nidaamka caddaalada ee rasmiga ah iyo maxkamadaha xeerka iyo kuwa diinta, iyaga oo ah qaab is-barbar socda ama kuwo isku dhex jira oo isku dhisan.
- Golayaal la-talin/shuuro oo ay ka mid yihiin hoggaamiyeyaal dhaqan iyo kuwo diimeed oo loo abuuray hay'adaha fulinta iyo kuwa sharci-dejintaba, iyo iyada oo la aqoonsanayo kaalintii hoggaamiyeyaaasha dhaqanku ay ka soo qaateen dhalinta iyo ilaalinta xasiloonida iyo nabadda.
- Daraaseynta habab beddel ah oo hoggaamiyeyaaasha dhaqanka iyo kuwa diinta loo dhexgeliyo nidaamka dowladeed ee rasmig ah ee heerarka qaran iyo kan degaanba, sida Golaha Guurtida ee Somaliland iyo Guddiga Culimada ee Puntland oo kale.
- Hogaamiyeyaaasha dhaqanka oo lala kaashado maamulka dowladeed ee heer degaan tusaale ahaan caaqillo la aqoonsan yahay oo hawshooda oggolaansho u haysta.

4.3 Daraasad-xaaladeedyo La-isbarbardhigayo

Si loo helo noocyada la kala dooran karo ee is-waafajinta siyaasadeed, waxaa sidoo kale wanaagsan in la aqoonsado lana tixgeliyo tiro arrimo dhinaca farsamada ah oo ay leeyihiin lixda dhinac/*strands*. Daraaseynta xaaladaha dalalka kale ayaa noqon karta il muhiim ah oo laga helo arrimahan farsamo waxaana ay sharxaad weyn ka bixin karaan sida waxyaabaha gaarka ah ee ka mid ah ay dhab ahaan noqon karaan. Daraasad-xaaladeeddada loogama dan lahayn in ay noqdaan waxyaabo lagamamaarmaan u ah ama u dhigma xaaladda la rabo in looga tusaale qaato; dalalkan waxa loo soo qaatey oo keliya in ay ahaadaan tusaalayaal wax laga beddeli karo si loogu saleeyo oo looguna adeegsado xaaladda Soomaaliya.

- Hal hay'ad/maamul oo shakhsiyad caalami ah leh:¹⁵⁷ Indonesia; Ingiriiska (United Kingdom); Ghana; Argentina; Ciraaq; Malaysia; Midowga Qaramada Serbia-Montenegro (2003-2006); Imaaraadka Carabta ee Midoobey (UAE); Bougainville oo isbahaysi la sameysatay Papua New Guinea; New Caledonia oo isbahaysi la yeelatey Faransiiska.
- Hay'ado/maamullo badan: Is-kubiiristii Masar iyo Suudaan (1982); Isbaheysiga Midowga Benelux Union; Midowga Yurub/*European Union*; Beesha Bariga Afrika/*East African Community*.

Daraasad-xaaladeedyadan waxaa ay ka dhigan yihiin tiro qaabab ah, oo u dhexeeya min dal dowlad dhexe oo xooggan laeh ilaa midow dhaqaale/siyaasadeed oo ay yeeshaan Qaramo madax-bannaan. Qaababkan kala duwan oo la dooran karo waxaa ay muujinayaan sida hay'adaha/maamullada kala duwan ay wax uga qabteen arrimaha is-waafajinta, iyaga oo noqonaya tusaalayaal dhab ah tilmaamaya sida noocyada la kala dooran karo ay u shaqeyn karaan.

¹⁵⁷ Qaababka halka hay'ad/maamul waxaa ay muujinayaan ikhtiyaaro/fursado kala duwan, oo ay ka mid yihiin jamhuuriyad federaal ah sida kan uu tilmaamayo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, iyo sidoo kale ikhtiyaaro bixinayo hay'ado/dowlado xubin ka ah hal Dal xataa haddii ay haystaan maamul-hoosaad ballaaran iyo fursado ay isku-maamulaan.

Waayo-aragnimooyin laga heley meelo kale

Marka laga soo tago daraasado-xaalaadeedyada gaarka ah ee kor lagu muujiyey, caddeyn sahan laga heley xaalado la isbarbardhigey ayaa tilmaamaya natiijoyinkaan ku saabsan is-waafajin siyaasadeed oo lagu guuleystey:

(1) Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta: Si awood-baahintu ay u taageerto is-waafajin siyaasadeed halkii ay ka horseedi lahayd xasiloonni-darro (*fragility*), waxaa loo baahan yahay dowlad dhexe oo xooggan oo dhexdhexaadisa heerarka kala duwan ee dowladeed, oo leh qaabab is-waafajin siyaasadeed loo dhexgeliyo hay'adaha dowladda dhexe. Intaas ka sokow, waxaa loo baahan yahay in la tixgeliyo kala-duwanaanshaha dhaqaale iyo midka hay'adeed.

(2) Nidaamyada doorashada: Nidaamyada saamigalka ku dhisan kan barxan (dheehan) iyo kan saafiga ahba waxaa ay sii wanaajin karaan matalaadda danaha dadka, taas oo uu nidaamka "cidda guuleysata ay wax waliba qaadato" uu fogaayn karo. Sidoo kale haddii si adag loo raaco nidaamyada saamigalka oo keliya waxaa ka dhalan karta dowlad jilicsan, sida la arkey sanadihii 1960-meeyadii oo ay si aad ah u kordheen xisbiyada siyaasadeed.

(3) Laanta Fulinta iyo (4) sharci-dejinta: Marka qaababka ay u dhisan yihiin hay'adaha fulinta iyo sharci-dejintu ay hubinayaan matalaad ay helaan danaha kala duwan, dalalka ayaa caadi ahaan hela xasiloonni ka wanaagsan kuwa qaab-dhismeedyada jira ay ku guul-darreysteen in ay ka-qaybgeliyaan bulshooyinka kala duwan.

(4) Ka-qaybgalka Dadweynaha: Ka-qaybgalku waxaa uu xoojin karaa xasiloonnida waxaana uu fududeyn karaa in ay ka mid noqdaan kooxaha sida kale loogu fogaayn lahaa geeddi-socodka siyaasadda haddii loogu talogalo in sidaa la yeelo.

(5) Arrimaha dhaqanka: Nidaamyada siyaasadeed ee xoojiya xirnaanta ay la leeyihiin hoggaamiyeyaasha dhaqanka ee dalalka ka soo baxaya colaadaha waxaa ay fududeyn karaan qaabab dowladeed oo ka hufan kana deggan muddada fog marka loo eego kuwa aan xooji.

Ilaha laga soo qaatay: OECD DAC, *Supporting Statebuilding in Situations of Fragility and Conflict*, DAC Guidelines and Reference Series, (Paris: OECD Publishing, 2011); Brendan O'Leary, *Building Inclusive States*, Qoraal Raad-raac ah oo loogu talogaley Warbixinta Horumarka Aadanaha ee the Human Development Report 2004 (New York: UNDP, 2004); Sue Ingram, *Statebuilding: Key concepts and operational implications in two fragile states: the case of Liberia and Sierra Leone* (Geneva; New York: World Bank and UNDP, 2010); John-Mary Kauzya, *Decentralization: Prospects for Peace, Democracy and Development*, (New York: United Nations Department of Economic and Social Affairs, 2005).and UNDP, 2010); John-Mary Kauzya, *Decentralization: Prospects for Peace, Democracy and Development*, (New York: United Nations Department of Economic and Social Affairs, 2005).

5. Noocyada kala duwan ee la isku qaadan karo

Qaybtan waxaa ay ka tusaale qaadanaysaa oo ay sii xoojineysaa meelihii ay fursaduhu ka jireen ee lagu aqoonsadey Qaybta 4aad, iyada oo aan isku koobeynin lafagurista is-waafajinta siyaasadeed ee heer dhinac keliya ku kooban, ee sidoo kale soo bandhigeysa qaybo noocyo la isku qaadan karo ah oo iskuxiraya dhammaan lixda dhinac/*strands* oo ka dhigaya qaab maamul dowladeed oo wada jaanqaadaya. Kobcinta iyo saafidda qaybahan waxaa lagu saleeyey:

- Is-dhexgelinta danaha iyo aragiyada ay wadaagaan Soomaalidii ka munaaqashootey, oo laga dhigey taxane la tixgeliyey/series of considerations (Qaybta 4.1).
- Aqoonsashada meelo ay ka jiraan farsado is-waafajin, oo ku saleysan lafaguristii lagu sameeyey qaababka jira iyo tixgelinta xaaladaha jira (Qaybta 4.2).
- Adeegsiga arrimo farsamo oo laga soo qaatey tiro daraasad-xaaladeedyo ah (Qaybta 4.3).

Hadafka laga leeyahay noocyadan kala duwan ee la isku qaadan karo ma ahan in qaabab gaar ah lagu taliyo, laakiin waa in lagu muujiyo sida qaababka dhinacyada lixda ah loo kooxeyn karo si looga dhigo nidaamyo dowladeed oo kala duwan, oo ka bilowda qaab hay'ad (dowlad) keliya ah ilaa qaab hay'ado (dowlado) badan ah. Qaybahan waxaa loo qaabeeyey in dadka wax lagu baro, lagu firfircooni-geliyo, ayna wax ku biiriso wada-hadallada ay qaab dowladeed ay mustaqbalka ka yeeshaan Soomaaliya iyo Somaliland iyo Soomaaliya dhexdeedaba.

5.1 Noocyada fursadaha jira ee is-waafajinta siyaasadeed

Qaybahan kala duwan ee la isku qaadan karo ee halkaan lagu soo bandhigey waxaa ay muujinayaan a) sida arrimaha is leh ee wax lagu dhisi karo ee dhinacyada kala duwan ay u wada tacaamuli karaan, iyo b) sida suragalnimada is-waafajin siyaasadeed oo fursadaha qaar loo daraaseyn karo Qaababkan halkaan lagu taxay ma ahan khasab in mid walba goonideeda loo qaato laakiin waxaa la sameyn karaa qaabab isku-barxan oo u habboon danaha siyaasadeed ee gaarka ah ee la doonayo in la is-waafajiyo. Waxaa kale oo la hindisi karaa noocyo kale oo la kala dooran karo, oo ay ka mid tahay in midba mid looga wareego (ama in noocyo kala duwan la is dhexgeliyo muddo), mid kastana waxaa ay faa'iidooyin iyo faa'iido-darrooyin kala duwan u leedahay is-waafajinta siyaasadeed.

Sanduuqa 3aad : Lix qaab oo noocyo fursado jira ah oo la kala dooran karo si loo hirgeliyo is-waafjain siyaasadeed

Fursadda Nooca A – Dal/dowlad mid ah oo awoodda la baahiyey

Tusaalayaal xaalado la daraaseeyey: Gaana; Indonesia; Ingiriiska (UK)

Fursadda Nooca B – Federaal ay dhiseen dowlad-goboleedyo xubin ka ah

Tusaalayaal xaalado la daraaseeyey: Argentina; Ciraaq; Malaysia

Fursadda Nooca C – Qaran mid ah oo aad awoodda loo baahiyey

Tusaalayaal xaalado la daraaseeyey: Midowga Serbia-Montenegro (2003-2006); Imaaraadka Carabta ee Midoobey

Fursadda Nooca D – Isku biiris khiyaari ku dhisan

Tusaalayaal xaalado la daraaseeyey: Bougainville oo ay isku biireen Papua New Guinea; New Caledonia oo ay isku biireen Fransiiska


Fursadda Nooca E – Midnimo qaabeysan oo Dowlado madax-bannaan

Tusaalayaal xaalado la daraaseeyey: Axdiga Midnimada Masar iyo Suudaan; Midowga Benelux; Midowga Yurub; Beesha Bariga Afrika

Fursadda Nooca F – Macaamil dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo dhex mara Dowlado madax-bannaan

Jaantuska 3aad – Wada-tacaamulka siyaasadeed

WADA-TACAAMULKA SIYAASADEED



5.1.1 Fursadda nooca A – Dal/Dowlad mid ah oo awoodda la baahiyey

Fursadda nooca A waa nidaam mideysan oo awoodda la baahiyey oo la gaarsiiyey kuwa dhisey ee qaybta ka ah iyada oo loo marayo nidaam awood-baahin.¹⁵⁸ Awoodaha siyaadada badidoodu waxa ay gacanta ugu jiraan dowladda heerka qaran, iyada oo mas'uuliyado maamul loo wareejiyey dowladaha xubinta ka ah iyada oo loo marayo sharci-dejin. Qaybinta mas'uuliyadaha iyada oo loo marayo sharci-dejin (marka la barbardhigo mas'uuliyad-qaybinta loo marayo dastuurka) waxaa ay baarlamaanka u oggolaataa in uu dib u soo ceshado ama wax ka beddelo mas'uuliyadaha la siiyey dowlad-goboleedyada hadba sidii uu doono (eeg *Cilladaha Fursadda nooca A*). Awood-baahinta noocan ah, mas'uuliyadaha waxaa dowlad-goboleedyada loo siin karaa si aan isku mid ahayn, oo ka tarjumeysa baahiyaha, danaha iyo heerarka kala duwan ee awoodda maamul dowladeed ee Somaliland, Puntland, iyo dowlad-goboleedyada kale ee soo ifbaxaya.

Fursadda noocan ah waxaa ka mid ah laba qaab oo aan sidaa u kala duwaneyn (fursadda noocan kor lagu sharxay iyo mid ka yara duwan); qaababka waxaa lagu kala saaraa sida kala duwan ee ay u wajahaan dakhli ururinta iyo maaliyad qoondaynta.

Is-waafajinta siyaasadeed ee heerka ka hooseeya kan qaran: Heerka ka hooseeya kan qaranka, fursadda noocan ahi waxaa uu u si ahaan u dhow yahay nooca federaalka ee lagu soo bandhigey fursadda nooca B. Labada fursadoodba, muwaadiniinta ayaa doorta wakiillada heerka dowlad-goboleed iyo kuwa dowladaha hoose, marka lagu daro madaxweynaha qaranka iyo xubnaha baarlamaanka qaranka. Tani waxaa ay xaqiijineysaa in matalaad lagu helo dhammaan heerarka kala duwan ee dowladeed. Is-waafajinta siyaasadeed ee heerka ka hooseeya kan qaran marka laga hadlayo fursadda nooca A waxaa ay badanaa ku xiran tahay in awoodaha ay dowladda dhexe u dhiibato cid uga wakiil noqota; nidaamka dowladda dhexe ay ka xooggan tahay midka dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dowladaha hoose waxaa laga yaabaa in aaney haysan awoodaha iyaga oo madax bannaani hoose u haysta in ay keenaan istiraatiijiyado ay ku fulinayaan iswaafajin siyaasadeed iyaga oo aan taageero ka helin dowladda dhexe.

Fursadda noocan ah, gobollada hadda jira ayaa goonidooda isu taagi kara iyaga oo ah dowlad-goboleed kumana khasbana shuruudda ah in ay laba gobol isku biiraan (sida uu dhigayo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah).

Wada-tacaamulka dhinacyada kala duwan

Xulashada habab laga qaato hal Dhinac waxaa ay badanaa xiriir dhow la leedahay xulashada laga qaato dhinacyada kale. Heerka is-waafajinta siyaasadeed ee nooc kasta uu xaqiijin karo waxaa ay ku xiran tahay sida ay isula jaanqaadayaan xulashooyinkaas.


Tusaale ahaan, fursadda nooca A, (1) *qaab-dhismeed siyaasadeed iyo awood-baahinta* iyo (2) *nidaamyada doorashada* ayaa si cad isugu xiran. Nidaam dowlad mid ah oo xooggan oo awoodda la baahiyey waxaa uu xaqiijin karaa is-waafajin siyaasadeed oo heerkeedu sarreeyo, waa haddii ay dadweynuhu waxa ay doonayaan si toos ah u sheegaan ayna dowladda dhexe ula xisaabtamaan iyaga oo u maraya nidaam doorasho oo iskujira (iskubarxan). Intaa waxa dheer, hay'adaha dowlad-goboleedyada oo toos loo soo doorto, oo ay weheliso wakiillo heer qaran oo toos loo soo doorto, ayaa bixinaysa fursad lagu sii wanaajiyo xisaabtanka iyo waxqabadka.

¹⁵⁸ Awood-baahintu (xukun-baahintu) waa nooc maamul baahin oo dowlad ka hooseysa tan qaran ay leedahay mas'uuliyad, awood, iyo xisaabtan ku aaddan meelo gaar ah oo ka mid ah siyaasadda (policy).

Tilmaamaha Fursadda Nooca A

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	Dowlad dhexe oo xooggan oo awood-baahin lagu sameeyey; dowladda dhexe ayaa lahaaneysa mas'uuliyadda dakhli-ururinta iyo dakhli-qoondaynta
2. Nidaamka doorashada	Madax-weyne iyo baarlamaan toos loo soo doorto oo leh aqlabiyado shuruud ku xiran iyo tirooyin ugu hooseeya oo lagu qabto nidaam doorasho iskubarxan wakaalad saamigal/mid aqlabiyaddu guuleysato ay kuraasta wada qaadato.
3. Laanta fulinta	Madaxweynaha ayaa magacaabaya ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada; awoodda fulinta waxaa leh madaxweynaha.
4. Laanta sharci-dejinta	Baarlamaan hal aqal ka kooban oo toos loo soo doorto oo leh kuraas loo qoond-eeyey kooxaha laga tiro badan yahay iyo haweenka.
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	Xuquuq loo leeyahay in ay dadweynuhu soo celiyaan xubnaha baarlamaanka; xubnaha baarlamaanka oo ay waajib ku tahay in ay booqdaan dadka degaannada ay matalaan; afti dadweyne oo loo qaado wax ka beddelka dastuurka.
6. Arrimaha dhaqanka	Guddi Odeyaal iyo Culimo oo ay magacaabaan dowlad-goboleedyada; oo madaxweynaha kala talisa qaab ka mid ah sharciyada qabyada ah ee la dejinayo.

Jaantuska 4aad - Fursadda nooca A: Dowlad dhexe oo xooggan oo awoodda la baahiyey



Fursadda nooca A oo waxyar laga beddeley

Marka wax yar laga beddelo fursadda nooca A waxaa ay noqoneysaa mid bixisa haab ka baahsanaan badan oo dhinaca maareynta maaliyadda ah, taas oo door weyn ka qaadan karta qaabka uu yeelanayo maamul-hoosaadka ka hooseeya heerka qaran.

Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta:

- Awood dakhli ururin (cashuur soo rogis) oo heerka ka hooseeya kan qaranka; dakhliga degaanka laga qaado oo maamulki-isu gacanta ugu jiro heerka dowladeed ee ka hooseeya kan qaranka.
- Lacago ay toos dowladda dhexe ugu soo dirto dowladaha ka hooseeya heerka qaran, iyada oo loo badinayo gobollada saboolka ah, ee aan isku filneyn.

Faa'iidooyinka fursadda nooca A	Caqabadaha fursadda nooca A
<p>Fududaanta iyo matalaadda ayaa laga yaabaa in ay kor u qaadaan waxqabadka</p> <p>Nidaam maamul dhexe oo awoodda la baa-hiyey ayaa fududeyn kara go'aan-qaadashada iyo adeeg-bixinta isaga oo yareynaya baahida loo qabo wada-xaajood dheer (faahfaahsan) oo ay galaan heerarka kala duwan ee dowladeed. Nidaam doorasho oo matalaad ku dhisan, ayaa nidaamka maamulka dhexe ee xooggan ka dhigi kara mid dadku wakiillo ku leeyihiin, loo dhan yahay, waxaana isaga oo ka faa'iideysanaya qaab-dhismeedkiisa fudud wax ka qaban karaa danaha kala duwan.</p> <p>Hufnaan dhaqaale iyo midnimo ka ballaaran kuwa kale ayaa ka suurowda</p> <p>Nidaam dhexe oo maareyn maaliyadeed oo adag, oo dakhliga badidiisu ay ururiso ayna qaybiso dowladda dhexe, ayaa fududeyn kara hufnaan. Siyaasado heer qaran ah ayaa hubin kara iyo maaliyadaha si hufan loogu kala qoondeeyo dowlad-goboleedyada ugu baahi badan. Siyaasado kale ayaa la hirgelin karaa oo kor loogu qaadayo kor-meerka dowladda dhexe ee kharashaadka baxaya. (Fursadda nooca A waxaa haddii loo baahdo laga dhigi karaa nidaam xukunka maamulka dhexe aanu sidaas u xoogganeyn, sida lagu muujiyey noociisa wax laga beddeley.)</p> <p>Xoriyadda dhaqdhaqaaqa ayaa uu dhiirrigelinayaa</p> <p>Qaab-dhismeedka maamulka dhexe ee xooggan waxaa uu abuurayaa dowlad dhexe oo xooggan oo fududeyn karta hubinna karta isu-socodka badeecadaha iyo dadka ee dalka gudihisa. Fursadaha noocyada kale oo is-maamul hoosaad ballaaran siinaya dowladaha xubinta ka ah waxaa ka dhalan kara siyaasado kala duwan oo dhinaca isu-socodka badeecadaha iyo dadka ah.</p>	<p>Maamul dhexe oo aad u xooggan ama is-maamul hoosaad</p> <p>Marka loo eego fursadaha noocyada soo socda, ayaa nidaam maamul dhexe oo xooggan oo awood-baahin leh laga yaabaa in aaney ku qancin maamullada doonaya in maamulku dhexe aanu sidaas u xoogganaan, oo doonaya in la ilaaliyo is-maamul-hoosaadka. Awood-baahinta oo loo maro sharci-dejin ayaa laga yaabaa in ay bixiso ilaalin aan aad u adkeyn oo ay siiso dowlad-goboleedyada. Si ilaalin tan ka weyn ay u helaan danaha heerarka ka hooseeya heerka qaran, fursadda noocan ah waxaa lagu dari karaa in sharci-dejintu ay u baahato oggolaanshaha tiro badan oo xubno baarlamaan ah ama dadweynaha ka mid ah, tusaale ahaan in baarlaanka ay ka hesho aqlabiyad aad u badan ama in la mariyo codeyn afti dadweyne.</p> <p>In loo qaato in la yareeynayo muhiimadda ay leeyihiin maamullada gobollada</p> <p>Xaddididda mas'uuliyadaha maamullada gobollada ayaa abuurin karta in dadku ay u qaataan in maamulka heerka gobol ay muhiimaddiisu yar tahay, ama in jagooyinka maamullada degaanku aaney ahayn wax macno leh. Arrintan ayaa dhibaato weyn ku noqon karta hufnaanta, kartida, iyo tayada waxqabadka gobollada iyo degaannada.</p> <p>Tayo-xumo iyo culeysyo maamul</p> <p>Kororka xoogganaanta xukunka dhexe waxaa ka dhalan karta tayo-xumo, maaddaama dowladda dhexe aaney khasab ahayn in ay ku habboon tahay in ay qaadata dhammaan go'aamada siyaasadeed. Tusaale ahaan, haddii adeeg-bixinta aan loo baahin si dad ku filan, dowladda dhexe ayaa laga yaabaa in ay dad sanko ka geliso siyaasado iyada oo aan si buuxda u tixgeliin baahiyaha dadka. Sidoo kale, awood-baahin aan isku mid ahayn ayaa ay dhib badan tahay in loo hirgeliyo si hufan iyada oo tiro badan oo maamullada ka hooseeya kan qaranka ay u baahanayaan mas'uuliyado badan oo heerarkoodu kala duwan yahiiin.</p>

Daraasad-xaaladeedyo caalami ah oo laga sameeyey fursadda nooca A

Ghana

- Awood-baahinta maaliyadeed: Degmooyinka ka hooseeya kuwan heerka qaran waxaa ay awood u leeyihiin in ay soo rogaan dakhli/cashuur ayna sida ay doonaan u maamulaan maaliyadahaas.¹⁵⁹ Dowladda dhexe waxaa ay degmooyinka u direysaa lacago go'an oo ay ku buuxiyaan baahidooda maaliyadeed; maamullada ka hooseeya heerka qaran awood xaddidan ayaa ay u leeyihiin sida loo maamulayo maaliyadaha go'an ee ay dowladda dhexe u soo dirto.¹⁶⁰

Indonesia

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahin aan sinneyn: Dowladda dhexe ayaa mas'uuliyado siineysa gobollada, iyada oo awoodo gaar ah la siinayo laba gobol oo is-xukun hoosaad gaar ah leh. Aceh iyo Papua ayaa leh is-xukun hoose oo dhinaca maaliyadda iyo maamulka ah oo ka weyn kan ay haystaan gobollada kale, taas oo ay ka mid tahay saami ay ku leeyihiin dakhliga ka yimaada kheyraadkooda dabiiciga ah iyo is-xukun hoose oo ka badan kuwa kale oo ay u leeyihiin arrimahooda gudaha.¹⁶¹
- Maaliyadda oo goob dhexe laga maamulo: Dowlad-goboleedyada waxaa ay maaliyad ahaan ku tiirsan yihiin dowladda dhexe; dowladda dhexe ayaa gacanta ku haysa geeddi-socodka dakhli-ururinta iyo dakhli-qondeynta.¹⁶²

Ingiriiska (UK)

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed: Baarlamaanka Ingiriiska (UK) ayaa mas'uuliyadaha maamul si aan sinneyn ugu baahiyaha maamullada gobollada oo lagu magacaabo "*devolved governments*/dowlado maamul-baahin" (Scotland, Wales, iyo Waqooyiga Ireland) iyada oo loo marayo sharci u gaar ah gobol kasta.¹⁶³ Dowladaha maamul-baahinta ayaa kormeeraya beeraha, waxbarashada, iyo deegaanka, halka keliya qaar ka mid ah dowladaha maamul-baahinta ay maamulaan dowladaha hoose, guriyeynta, iyo kobcinta dhaqaalaha.¹⁶⁴ Gobollada aan mas'uuliyado is-maamul-hoosaad aan lagu siinin sharci la dejiyey, sida England, waxaa maamula dowladda dhexe.
- Maaliyadda oo xarun dhexe laga maamulo: Dowladda dhexe ayaa maamusha 95% dakhliga cashuuraha.¹⁶⁵ Cashuuraha waxaa ka mid ah cashuuraha ganacsiga, oo ay soo ururiyaan dowladaha hoose si dib loogu qondeeyo. In ka badan 60% maaliyadaha dowladaha hoose waxaa ay ka soo baxaan xisaabta dowladda dhexe; dowladaha hoose (oo ka duwan dowladaha maamul-baahinta) ayaa qaada inta ka hadhey maaliyadda iyaga oo ah cashuuraha hantida/berriga iyo ujuurooyin kale.¹⁶⁶ Dowladda dhexe ayaa

¹⁵⁹ MINISTRY OF LOCAL GOVERNMENT, RURAL DEVELOPMENT AND ENVIRONMENT, INTERGOVERNMENTAL FISCAL DECENTRALISATION FRAMEWORK, 2008, at 15 (Ghana).

¹⁶⁰ Local Government Act (Act No. 462/1993), art. 87(2) (Ghana).

¹⁶¹ Eeg Sharciga Ku Saabsan Maamul-hoosaadka Gobolka Aceh. Special iyo sidoo kale Gobolka Nanggroe Aceh Darussalam (Law No. 18/2001) (Indon.); LSharciga Ku Saabsan Maamul-hoosaadka Gobolka Papua Province (Law No. 21/2001) (Indon.); Sharciga ku Saabsan Dowladda Aceh (Law No. 11/2006) (Indon.).

¹⁶² Law Concerning Regional Administration (Law No. 32/2004) art. 148 (Indon.).

¹⁶³ Government of Wales Act, 1998, c. 38 (U.K.); Northern Ireland Act, 1998, c. 47 (U.K.); Scotland Act, 1998, c. 46 (U.K.); Government of Wales Act, 2006, c. 32 (U.K.).

¹⁶⁴ Ibid.

¹⁶⁵ Stuart Adam, Anoushka Kenley, and Carl Emerson, *A Survey of UK Local Government Finance*, Briefing Note no. 74 (London: Institute for Fiscal Studies, January 1, 2007), 14.

¹⁶⁶ DEPARTMENT FOR COMMUNITIES AND LOCAL GOVERNMENT, LOCAL GOVERNMENT FINANCIAL STATISTICS ENGLAND, 2012, no. 22, at 32 (U.K.).

dowladaha maamul-baahinta waxaa ay maaliyad ugu qaybisaa nidaam saamigal ah oo aasaasi ahaan ku fadhiya tirada dadka degaanka.¹⁶⁷ Scotland ayaa leh awoodo gaar ah oo dowladda Scotland ay ku beddeli karto heerka cashuurta dakhliga ee Scotland gudaheeda.

5.1.2 Fursadda nooca B – Federaal ay dhiseen dowlad-goboleedyo xubno ka ah

Fursadda nooca B waxaa ay dhiseysaa nidaam federaal oo ka kooban dowlad-goboleedyo saddex ama ka badan ah, taas oo muujineysa qaab-dhismeed la barbardhigi karo qaabka dowladeed ee uu tilmaamayo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee 2012 kaas oo dowlad-goboleedyada ugu yeera “dowladaha xubinta ka ah federaalka.” Fursadda noocan ah waxaa sidoo kale wakiillo ka socda hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada ay dhexgelisaa qaab-dhismeedka dowladeed ee rasmiga ah (iyada oo loo marayo Aqalka Sare), kaas oo aan ku jirin qoraalka/dastuurka hadda jira.

Sida noocyada kale ee federaalka, mas’uuliyadaha dowlad-goboleedyada waxaa ilaalinaya dastuurka. Noocan waxaa sidoo kale is-xukun hoosaad ballaaran uu dowladaha federaalka ka tirsan u siinayaa maareynta arrimaha hooda gaarka ah, isaga oo siinaya awood ballaaran oo dhinaca dakhli ururinta iyo qoondeynta ah.

Noocyada ikhtiyaarkan/fursaddan oo waxyar laga beddeley ah ee la soo bandhigey waxaa uu muujinayaa laba hab oo kala duwan oo mas’uuliyadaha loo qaybiyo, maaddaama Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah uusan sharaxaad cad ka bixineynin sida wada-xaajoodyada ay yeelanayaan dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah federaalka ay u dhacayaan. Nooca waxyar laga beddeley waxaa uu sidoo kale muujinayaa laba hab oo loo dhiso qaab-dhismeed federaal ah, isaga oo bixinaya laba nooc oo dowladaha ka hooseeya heerka qaran ah iyo faqradda sheegeysa in la kala dooran karo.

Is-waafjinta siyaasadeed ee heerarka dowladaha xubinta ka ah federaalka iyo dowladaha degaanka: Fursadda/khtiyaarka noocan ah waxaa ay u baahan tahay in si taxaddar leh looga fekero hababka magacaabidda xubnaha Aqalka Sare si loo hubiyo in danaha dadka *wada* deggan dowlad-goboleedyada ay si dad ku filan ay matalaad ugu yeeshaan hay’adaha federaalka. Hababkan waxaa ka mid ahaan kara in kuraas loo qoondeeyo haweenka iyo kooxaha laga tiro badan yahay, oo ay la socoto qodobbo tilmaamaya in muwaaddiniinta lagala tashado cidda meel loo magacaabay. Laamaha fulinta iyo sharci-dejinta dowladaha xubnaha ka ah federaalka ee tooska loo soo doorto ayaa sidoo kale gacan ka geysan kara in la hubiyo in danaha dadka deggan si wanaagsan loo matalo.

Sida ay u wada tacaamulayaan dhinacyada/strands

Fursadda/ikhtiyaarka nooca B waxaa ka mid ah ra’iisul wasaare la magacaabo iyo qaar ka mid ah xubnaha baarlamaanka oo iyana la magacaabo, taas oo muujinaysa dhammaan qaybaha xiriirka la leh (2) *nidaamyada doorashada*, (3) *laanta fulinta*, (4) *laanta sharci-dejinta* iyo (5) *ka-qaybgalka dadweynaha*. Maaddaama ra’iisul wasaaraha iyo saami ka mid ah Aqalka Sare aan toos loo soo dooran, doorashada madaxweynaha iyo aqalka hoose ee baarlamaanka ayaa door muhiim ah ka ciyaara hubinta matalaadda danaha kooxaha kala duwan.


Hababka ka-qaybgalka dadweynaha ayaa gacan ka geysan kara in la tixgeliyo danaha ay kuwa kala duwan ku leeyihiin iyada oo la fududeynayo in dadka kala duwan degaanka lagala tashado magacaabista aqalka sare (t.a. iyada oo loo marayo geeddi-socod magacaabid). Qodobbo waajibinaya soo xulidda ra’iisul wasaaraha ayaa sidoo kale gacan ka geysan kara in laga heshiiyo, sida in la waajibiyo in ra’iisul wasaaruhu uu ka socdo xisbiga haysta aqlabiyadda aqalka hoose, sida dalal badan oo kale ay yeelaan

¹⁶⁷ Northern Ireland Assembly, Research and Library Services, *A Background Paper on the Barnett Formula*, Research Paper 12/01 (Research and Library Services for the Northern Ireland Assembly, September 2001), 8, http://archive.niassembly.gov.uk/research_papers/research/1201.pdf.

Tilmaamaha fursadda nooca B

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	Qaab federaal ah oo awood-baahinta uu dastuurku waajibinayo. Dowladaha xubinta ka ah federaalka ayaa ka wada-xaajoonaya sida ay u qaybsanayaan mas'uuliyadaha (awoodaha) oo iyada oo dhammaantood ay wada helayaan mas'uuliyado/awoodo isku mid ah.
2. Nidaamka doorashada	Madaxweynaha iyo aqalka hoose oo si toos ah loo soo doorto iyada oo loo marayo nidaam doorasho oo isugu jira matalaad saamigal ah/kan aqlabiyadda guuleysata ay wada qaadato kuraasta, Aqalka Sare waxaa soo xulaya baarlamaannada dowladaha xubinta ka ah federaalka.
3. Laanta fulinta	Madaxweynaha ayaa magacaabaya ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada; awoodda fulinta waxaa leh Golaha Wasiirrada/Xukuumadda.
4. Laanta sharci-dejinta	Baarlamaan laba aqal ka kooban, oo uu ka mid yahay aqal hoose oo toos loo soo doorto iyo Aqal Sare oo ay ku jiraan xubno la magacaabo iyo kuwo toos loo soo doorto (oo ay ka mid yihiin odayaal, culimo, iyo shakhsiyaad caan ah).
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	Hababka loo sameynayo waa in uu dhigaa dastuurka, hababkaas oo ay ka mid yihiin ka-qaybgalka geeddi-socodka sharci-dejinta.
6. Arrimaha dhaqanka	Aqalka Sare ee baarlamaanka oo matalaad siinaya odayaasha iyo culimada.

Jaantuska 5aad - Fursadda/ikhtiyaarka B: Federaal ay dowlad-goboleedyo xubno ka yihiin



Ikhtiyaarka/Fursadda nooca B oo wax laga beddeley

Wax ka beddelkan fursaddan noocan ah waxaa ay ka ambaqaadeysaa qodobbada Dastuurka Federaalka Ku-meelgaark aah. Gaar ahaan, iyada oo bixineysa kala duwanaansho ballaaran oo (1) awood u qaybinta dowlad-goboleedyada kala duwan iyo (2) noocyada dowlad-goboleedyada.

Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta:

- Dowladaha xubinta ka ah federaalka ayaa mid mid loogala xaajoonayaa awood-qaybinta, taas oo uu ka dhalanayo nidaam awoodaha aan si simman loo qaybsan oo dowladaha xubnaha ka ah federaalka ay helayaan mas'uuliyado ku saleysan hadba inta ay kartoodu maamul-dowladeed ay tahay.
- Gobollada, aan weli ka soo bixin shuruudihii ay ku noqon lahaayeen dowlad-goboleed, ayaa u sii jiri kara gobol ahaan (laakiin waxaa ay yeelanayaan awoodo ka yar kuwa dowlad-goboleedyada). Gobollada ayaa marka ay doonaan 'go'aansan kara' in ay noqdaan dowlad-goboleed, iyaga oo fulinaya shuruudo si cad loo qeexay.

Faa'iidooyinka fursadda nooca B	Caqabadaha fursadda nooca B
<p>Baarlamaanka oo si dhow u kormeera ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada</p> <p>Ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada ayaa waxaa siyaabo badan u kormeeraya aqalka hoose ee baarlamaanka. Aqalka hoose ee baarlamaanka waa in uu marka hore siiyaa codka kalsoonida ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada / xukuumadda, waxaana uu sidoo kale kala noqon karaa kalsoonida hadba sida loogu baahdo. Habkaan kormeerka ayaa gacan ka geysanaya in la is-waafajiyo danaha isaga oo oggolaanaya in wakiillada toos loo soo doortey ay kormeeraan saraakiisha la soo magacaabo.</p> <p>In si cad loogu ilaaliyey mas'uuliyadaha iyo madax-bannaanida hoose ee dowladaha xubinta ka ah federaalka</p> <p>Sida hababka kale ee federaalka ah, dastuurka ayaa ilaalinaya mas'uuliyadaha iyo jiritaanka dowladaha xubinta ka ah federaalka. Caadi ahaan, wax ka beddelka dastuurka waxaa uu u baahanayaa aqlabiyad weyn oo uu ka helo baarlamaanka oo badanaana afti dadweyne ayaa uu u baahanayaa, taas oo ah mid adag kana hawl badan ilaalinta ay bixinayaan nidaamyada mas'uuliyadda la baahiyey (eeg fursadda nooca A). In xaaladda dowladaha xubinta ka ah federaalka lagu qorey dastuurka ayaa sidoo kale ilaalineysa madax-bannaanida hoose ee dowladaha xubinta ka ah federaalka, gaar ahaan marka dowladaha xubinta ka ah federaalka iyo gobolladu aaney mid keliya ahayn (eeg wax ka beddelka fursadda nooca B).</p> <p>Hoggaamiyeyaasha dhaqanka iyo culimada ayaa si rasmi ah uga mid ah</p> <p>Xubnaha Aqalka Sare waxaa ku jira odeyaal iyo culimo, iyo sidoo kale senetarro la soo doortey. Marka la barbar-dhigo fursadaha noocyada kale, fursadan noocan ayaa hoggaamiyeyaasha dhaqanka siineysa awood go'aan-qaadasho rasmi ah oo ay ku lahaadaan geeddi-socodka sharci-dejinta, marka la barbardhigo in doorkoodu ahaado mid la-talin.</p>	<p>Ka-qaybgalka dadweynaha ee Aqalka Sare oo hoos loo dhigo iyada oo la adeegsanayo golayaasha iyo laamaha fulinta ee qaranka</p> <p>Aqalka Sare waxaa uu fududeeyaa in la iska dhex arko isaga oo ka koobma xubno la doortey iyo kuwo la magacaabeyba oo ka kala socda meelo kala duwan. Haseyeeshee, magacaabista xubnaha ayaa laga yaabaa in ay saameyn xun ku yeelato muwaafaqada dhinacyada. Maaddaama aaney jirin habab rasmi ah oo loo xisaabtamo (t.a. doo-rashooyin toos ah), ayaa kuwa magacaabidda ku yimid laga yaabaa in aaney jirin wax badan oo ku dhiirrigelinaya in ay si buuxda u matalaan kuwa ay wakiilka ka yihiin.</p> <p>Nidaamka adag ayaa laga yaabaa in aanu suuragelin in ay qaybaha Soomaalidu ka wada muuqan</p> <p>Habkaan federaalka ee isu miisaaman, oo ay dhammaan dowladaha xubinta ka ah federaalka ay leeyihiin mas'uuliyado isku mid ah, ayaa noqon kara mid dhib badan marka lagu xisaabtamo awoodaha/kartida maamul dowladeed ee aan sinneyn ee ay leeyihiin maamullada ka jira Soomaaliya. Maamullada soo-ibxaxaya ma laha kartida iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin dowladaha hanaqaadey ee Somaliland iyo Puntland. Arrintan waxaa lagu khafiifin karaa iyada oo dastuurka lagu qoro in mas'uuliyadaha dib loogu wakiilan karo dowladda federaalka (sida dalka Argentina oo kale), ama iyada oo loo marayo hannaan awood-baahin aan sinneyn.</p> <p>Kala-qaybsanaan ka dhacda dowlad-goboleed gudaheeda ama ka dhex dhacda dowlad-goboleedyada</p> <p>Qaabka dowladeed ee noocan ah, nabadda iyo xasiloonida ayaa si weyn ugu xiran shaqeynta iyo wada-tacaamulka dowladaha xubnaha ka ah federaalka. Habkaan ayaa ku waajibinaya in dowladaha xubinta ka ah federaalka in ay dhexdooda iskaashadaan iyo in ay iskaashi la yeeshaan dowladda federaalka ah. Intaas waxaa dheer, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu ku xisaabtamayaa in marka la dhiso dowladaha xubinta ka ah federaalka ay noqon doonaan kuwo wada shaqeeya oo si cad u wada xiriira oo arrimaha mudnaanta u leh u sameynaya degaannadooda kala duwan.</p>

Daraasadeed-xaaladeedyada caalamiga ah ee fursadda/ikhtiyaarka nooca B

Argentina

- Mas'uuliyado si siman loo qaybiyo oo cid kale loo wakiilan karo: Dowladda federaalka oo keliya ayaa leh tiro mas'uuliyado ah, oo ay ka mid yihiin ganacsiga, arrimaha dibadda, iyo gaashaandhigga. Mas'uuliyadaha soo harey waa la wadaaga ama waxaa ay u gaar yihiin gobollada iyo dowladaha hoose.¹⁶⁸ Sidaa daraadeed, gobollada ayaa dastuuriyan leh mas'uuliyado isku mid ah; in kasta oo, qaarkood ay mas'uuliyadaha ay dib ugu xil-saartaan dowladda federaalka.
- Awood-baahinta maaliyadeed: Sida uu sharcigu dhigayo, gobollada ayaa maareeya adeeg-bixinta oo ilaa xadna mas'uul ka ah cashuuraha tooska ah.¹⁶⁹ Laakiin waaqici ahaan, gobollada ayaa maareeya adeeg-bixinta, haddana waxaa ay awoodahooda cashuur-ururinta dib ugu wakiishaan dowladda federaalka; dowladda federaalka ayaa ka dibna dakhligii ay ururisey dib ugu soo celisa gobollada.¹⁷⁰

Ciraac

- Qaab-dhismeed dowladeed oo aan sinneyn/dheelli-tirneyn iyo qodob tilmaamaya 'kala-doorasho: Ciraaq waxaa ay ka kooban tahay 18 gobol oo u shaqeeya qaybo maamul oo ka tirsan dowladda dhexe iyo hal gobol oo federaal ah (dowlad-goboleed), oo ah Kurdiistan, oo leh is-xukun hoosaad yar (sida, is-xukun maamul iyo gacan ku haynta ciidamada amniga gudaha). Sida uu u oggolaanayo dastuurka, gobol ama gobollo ayaa 'dooran kara' oo sameyn kara dowlad-goboleed iyaga oo u maraya afti dadweyne.¹⁷¹

Malaysia

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed: Malaysia waxaa ay ka kooban tahay 13 dowlad-goboleed iyo saddex dhul oo federaal ah. Dhulalka federaalka waxaa toos u xukunta dowladda federaalka ah, laakiin dowlad-goboleedyadu waxaa ay leeyihiin mas'uuliyado uu siiyey dastuurka.¹⁷² Dastuurkii 1957 ayaa xusaya in Dowlado siyaado (madax-bannaani) leh uu baarlamaanka ku soo dari karo federaalka; laba dowlad-goboleed oo kala gaar ah (Sabah iyo Sarawak) ayaa ku soo biirey federaalka iyaga oo u soo marey faqraddaan sanadkii 1963.¹⁷³
- Mas'uuliyadaha oo aan si siman loo qeybin: Sabah iyo Sarawak ayaa madax-bannaani hoose oo ballaaran u haysta arrimahooda gudaha waxaana ay gacanta ku hayaan mas'uuliyado kale oo dheeri ah marka la barbardhigo dowlad-goboleedyada kale (t.a. sharciga dadka asal ahaan sharciga dhulka u dhashey, dekadaha, marsooyinka, waddada tareenka, iwm).¹⁷⁴ Sameynta qaababkan waxaa loo marey wada-hadallo dhacay markii Sabah iyo Sarawak ay ku soo biirayeen federaalka.¹⁷⁵

¹⁶⁸ Qodobbada 75, 121, CONSTITUCIÓN NACIONAL [CONST. NAC.] Aug. 22, 1994 (Arg.).

¹⁶⁹ Daniel Artana et. al., *Sub-National Revenue Mobilization in Latin American and Caribbean Countries: The Case of Argentina*, Working Paper Series, No. IDB-WP-297 (Inter-American Development Bank, March 2012), 8.

¹⁷⁰ Ibid. 2; and Mariano Tommasi, Sebastian Saiegh, and Pablo Sanguinetti, "Fiscal Federalism in Argentina: Policies, Politics, and Institutional Reform," *Economia* 1, no. 2 (Spring 2001), <http://www.jstor.org/stable/20065407>.

Provinces and municipalities account for half of all government expenditures, yet collect only one-fifth of the revenue.

¹⁷¹ Qod. 119, DOUSTOUR JUMHOURIAT AL-IRAQ [DASTUURKA JAMHUURIYADDA CIRAAQ] EE 2005, Okt. 15, 2005.

¹⁷² FEDERAL CONSTITUTION, Aug. 31, 1957, sched. 9, list II (Malay.) [Dastuurka Federaalka ee Malaysia (1957), Jadwalka 9aad Liiska II.]

¹⁷³ Ibid. Qodobka 2.

¹⁷⁴ Ibid. Jadwalka 9aad Liiska Ila.

¹⁷⁵ Gordon P. Means, "Malaysia (The Federation of Malaysia)," in *Handbook of Federal Countries*, ed. Ann L. Griffiths (Montreal: McGill-Queen's University Press, June 2005), 185.

5.1.3 Fursadda/Ikhtiyaarka Nooca C: Qaran mid ah oo aad awoodda loo baahiyey

Fursadda/ikhtiyaarka nooca C waxaa uu muujinayaa nidaam federaal ah oo aad awoodda loo baahiyey oo ka kooban dowlado xubin ka ah oo laba ama ka badan ah. Fursadda/ikhtiyaarka noocan ah mas'uuliyado kooban ayaa uu siinayaa dowladda midnimada qaran (t.a. arrimaha dibadda, gaashaandhigga, dhaqaalaha, arrimaha ka dhexeeya midowga), iyada oo dowladaha xubinta ka ah ay lahaanayaan madax-bannaanidooda hoose ee ay u leeyihiin arrimahooda gudaha. Si la mid ah nidaamyada kale ee federaalka ah, ayaa dastuurka qaranka midoobey waxaa ku qoran sida loo qaybsanayo mas'uuliyadaha. Fursaddan/ikhtiyaarkan waa kan awood-baahintiisu ugu badan tahay oo hay'ad/dal leh shakhsiyad caalami ah.

Fursaddan/ikhtiyaarkan oo wax yar laga beddeley waxaa uu muujinayaa hab qaab-dhismeedkiisu kan ka duwan yahay. Sida lagu muujiyey xagga hoose, dowladaha xubinta ka ah ee dhisaya qaranka midoobey waxaa ka mid ahaan kara oo keliya Soomaaliya iyo Somaliland, iyada oo Puntland iyo maamullada soo-ifbaxaya ay ahaanayaan xubno ka tirsan dhinaca Soomaaliya. Haddii kale, Puntland iyo maamullada soo ifbaxaya waxaa ay ka fekeri karaan in ay iyaguna ay noqdaan kuwa tooska u dhisaya; xaaladda noocan oo kale, dowladaha dhisaya qaranka midoobey waxaa ka mid ahaanaya Somaliland, Puntland, iyo maamullada soo-ifbaxaya.

Is-waafajinta siyaasadeed ee heerka dowladaha wax ka dhisaya qaranka midoobey: Iyada oo qaab-dhismeedka dowladda qaranka midoobey uu amrayo dastuurka, haddana dowladaha xubinta ka ah waxaa ay madax-bannaani hoose oo buuxda u leeyihiin qaab-dhismeedka ay yeelanayaan hay'adahooda gudaha iyo hawsha hay'adahaasba. Sidaa daraaddeed, qaabkan waxaa uu fursado waaweyn siinayaa is-waafajinta danaha ee dowlad kasta oo xubin ka ah midnimada gudaheeda waxaana ka muuqan kara qaar ka mid ah qoddobada/tilmaamaha lagu sharxay fursadda/ikhtiyaarka nooca A ama B. is-waafajinta siyaasadeed ee dowladaha xubinta ka ah midnimada dhexdooda ayaa muhiimadeedu kordheysaa fursadda/ikhtiyaarkan dhexdiisa, maaddaama qaababka dowladaha xubinta ka ah midnimada gudahoodu ay si weyn u saameyneyso is-waafajinta siyaasadeed ee qaranka weyn ee midoobay (eeg *sida ay u wada tacaamulayaan dhinacyada/strands*).

Sida ay u wada tacaamulayaan dhinacyada/strands

Fursadda/ikhtiyaarka C, isku-xirnaanta ka dhaxaysa (1) *qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta*, (3) *nidaamyada doorashada*, iyo (5) *ka-qaybgalka dadweynaha* ayaa muhiim u ah xaqiijinta is-waafajin siyaasadeed.


Xubnaha baarlamaanka dowladaha xubinta ka ah midnimada waxaa toos u soo dooranaya baarlamaannada dowladaha xubinta ka ah. Sidaa daraaddeed, matalaadda danaha ee heerka dowladaha xubinta ka ah midnimada ayaa muhiim u ah xaqiijinta is-waafajinta siyaasadeed. Si gacan looga geysto geeddi-socodkan, waxaa laga yaabaa in ay wanaagsan tahay in la adeegsado habab doorasho kuwoto ama shuruudo kale ku dhisan marka la soo xulayo xubnaha dowladaha qaybta ka ah midnimada uga mid noqonaya baarlamaanka midnimada qaranka. Laanta fulinta oo ka kooban laamaha fulinta ee dowladaha xubinta ka ah midnimada iyana sidaa si la mid ah ayaa ay arrintan u saameyneysaa.

Ka-qaybgalka dadweynaha ayaa sidoo kale dhammeystiri kara dadaallada is-waafajinta siyaasadeed ee dowlad xubin ka ah federaalka gudaheeda waxaana ay gacan ka geysan kartaa matalaadda danaha kala duwan ee qaybaha kala duwan ee isla dowladda gudaheeda. Habab ka-qaybgal oo xooggan ayaa dhammeystiri kara geeddi-socod doorasho rasmi ah isaga oo dadweynaha siinaya meelo kale oo dowladda midnimada qaran ay ka geli karaan.

Tilmaamaha fursadda/ikhtiyaarka nooca C

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	Midnimo qaran oo awoodda aad loo baahiyey oo ka kooban laba dowladood (Soomaaliya iyo Somaliland); oo dowladaha qaybta ka ah awood u leeyihiin in ay maamushaan arrimaha gudaha.
2. Nidaamka doorashada	Xubnaha baarlamaanka midnimada qaran si toos ah ayaa loo soo doortaa; dowladaha qaybta ka ah midnimada qaran ayaa go'aansanaya geeddi-socodka doorashooyinkooda gudaha.
3. Laanta fulinta	Madaxweynaha/madax-weyne ku-xigeenka waxaa isku-warwareejinaya labada dowladood ee qaybta ka ah midnimada; laanta fulinta ee Soomaaliya ayaa lahaaneysa awood diidmo qayaxan.
4. Laanta sharci-dejinta	Baarlamaan hal aql ka kooban (oo si dadban ay u soo doortaan baarlamaannada dowladaha xubinta ka ah midnimada); go'aamada waxaa lagu gaarayaa qaab is-barbar-socda ama aqlabiyad shuruud ku xiran.
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	Afti dadweyne (oo u baahan aqlabiyad shuruud ku xiran); qaabab cabasho loogu gudbin karo dowladda midnimada qaran; ka-qaybgal dadweynaha oo ka dhacda dowladaha xubnaha ka ah gudahooda.
6. Arrimaha dhaqanka	Gole Guurti/odeyaal iyo Gole Culimo oo ay soo magacaabaan dowladaha xubinta ka ah si dowladda midnimada qaran ay ugalaa taliyaan arrimo gaar ah oo la soo xuley.

Jaantuska 6aad - Fursadda/ikhtiyaarka nooca C: Midnimo qaran oo aad awoodda loo baahiyey



Fursadda/ikhtiyaarka C oo wax laga beddeley

Wax-ka-beddelka ugu muhiimsan ee noocan waxaa udub dhexaad u ah waxa ay noqonayaan dowladaha xubinta ka ah midnimada qaran. Fursadda/ikhtiyaarka kore waxaa uu ku xisaabtamayaa in Puntland iyo maamullada soo-ifbaxaya ay qayb ka noqonayaan dhinaca Soomaaliya ee midnimada qaran; halka, nooca wax laga beddeley uu ku xisaabtamayo in Puntland iyo maamullada soo ifaxaya ay yihiin dowlado gaar ah oo iyagana xubin ka ah midnimada qaran.

Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta:

- Dowlad midnimo qaran oo awoodda aad loo baahiyey oo ka kooban dowlado laba ama ka badan oo xubino ka ah dowladda midnimada qaran.

Nidaamka doorashada:

- Xubnaha baarlamaanka dowladda midnimada qaran waxaa toos u soo dooranaya dadka dowladaha xubinta ka ah dowladda midnimada qaran.

Laanta fulinta:

- Golaha fulinta waxaa uu ka kooban yahay laamaha fulinta ee dowladaha xubinta ka ah dowladda midnimada qaran laamaha fulinta ee Somaliland iyo Puntland ayaa lahaanaya awoodda diidmada qayaxan.

Faa'iidooyinka fursadda/ikhtiyaarka nooca C	Caqabadaha Fursadda/nooca C
<p>Nidaam aad awoodda loo baahiyey ayaa wax ka qaban kara baahiyaha maamullada soo if-baxaya</p> <p>Qaab-dhismeedka fursadda/ikhtiyaarka noocan ahi waxaa uu Soomaaliya awood u siinayaa in ay maamullada soo ifbaxaya siiso taageerada ay ugu baahan yihiin xoojinta horumarkooda siyaasadeed / dhaqaale, isaga oo Somaliland ama Puntland siinaya is-maamul-hoosaad ka badan midka ay ku dhex helayaan nooc kasta oo kale oo midnimo ah.</p> <p>Noocyada wax laga beddeley ayaa u fududaynaya dowladaha xubinta ka ah midnimada in ay qaataan qaabab kala duwan oo ku lahaadaan midnimada qaran dhexdeeda</p> <p>In kasta oo Puntland ay sheegtay doonisteeda ah in ay ka sii mid ahaato Jamhuuriyad Federaal ah, haddana fursadda/ikhtiyaarka noocan ah waxaa uu Puntland siinaya fursad ay dib ugu sii eegaan mowqifkooda iyo danahooda. Puntland waxaa ay qayb ka noqon kartaa dhinaca Soomaaliya ee midnimada qaran, ama goonideeda ayaa ay isu taagi kartaa iyada oo ay dowlad xubin ka ah midnimada qaran.</p> <p>Is-xukun hoosaad iyo u fudududaanta qaabka ay u dhisayaan maamulkooda dowladeed ee hoose</p> <p>Nidaam awood-baahintiisu ay sidan u ballaaran tahay, ayaa mid kasta oo ka mid ah dowladaha dhinaca ka ah midnimada qaran waxaa ay qaabka maamulkeeda dowladeed ee hoose u dhisan kartaa sida ugu wanaagsan ee ka tarjumeysa danaha dadkeeda. Dowladaha xubinta ka ah midnimada qaran waxaa ay is-dhexgelin karaan tilmaamo u dhow qaab maamul oo awoodda la baahiyay, dowlad dhexe oo xooggan ama qaab ka sii federaalsan. Dowladda midnimada qaran waxaa ay lahaaneysaa shakhsiyad caalami ah oo mid keliya ah, iyada oo mataleysa danaha kala duwan ee dowladaha xubinta ka ah midnimada qaran.</p>	<p>Qaab-dhismeedka kakan oo kharashkiisu badan yahay</p> <p>Qaabkan waxaa uu u baahan yahay ugu yaraan saddex heer dowladeed, taas oo ay ka dhalaneyso kharashaad maaliyadeed iyo mid hay'adeed oo ka badan qaababka kale oo midka keliya ka kooban. Heer kasta oo dowladeed oo lagu daro kuwii hore waxaa uu u baahanayaa maaliyad iyo kormeer, waxaana uu sii kordhiyaa tirada hay'adaha maamul ee komeeraya oo isuna duwaya hirgelinta siyaasadda iyo adeeg-bixinta.</p> <p>Maamul-dowladeed fadhiid ah oo aan waxqabad lahayn</p> <p>Dhisidda dowlad midnimo qaran oo ka kooban wax ka badan laba dowladood oo midoobey waxaa ay dhibaato weyn ku noqon kartaa hufnaanta. Haddii nidaamku yahay mid aqlabiyad is-barbar socota go'aamada lagu gaarayo, waa in aqlabiyad lagu yeeshaa mid kasta oo ka mid ah dowladaha xubinta ka ah midnimada qaran si sharuucda loo dejiyo. Sidaa daraaddeed, tiro sii kordheysa oo dowlado xubin ka noqonaya midnimo qaran waxaa ka dhalanaya geeddi-socod sharci-dejin oo marba marka ka sii dambeyna sii cuslaanaya.</p> <p>Dadaallo la isku waafajinaya dowladaha xubinta ka ah midnimada ayaa lagamamaarmaan ah</p> <p>Dadaallo is-waafajin siyaasadeed oo heer midnimada qaran ah ayaa aad ugu xirin dadaallo is-waafajin oo goonideeda loogu dhex sameeyo dowlad kasta oo xubin ka ah midnimada, gaar ahaan haddii xubnaha baarlamaanka midnimada qaran loo soo dooranayo si aan toos ahayn. Haddii ay dhacdo in qaar ka mid ah danaha siyaasadeed aaney matalaad ku dhex helin dowladda xubinta ka ah midnimada qaran dhexdeeda, waxaa ay taasi keeneysaa in aaney sidoo kale matalaad ku helin heerka qaran.</p>

Daraasadeed-xaaladeedyada caalamiga ah ee fursadda/ikhtiyaarka nooca C

Dowladda Midnimada Serbia-Montenegro (2003-2006) waxaa dhisey laba dowladood oo xubin ka noqdey: Jamhuuriyadda Montenegro iyo Jamhuuriyadda Serbia.

- Mas'uuliyad-qaybinta: Dowladda dhexe ayaa awood u leh in ay go'aamiso siyaasadda ayna sameeyso shuruuc la xiriira arrimaha dibadda, gaashaandhigga, dhaqaalaha, wada-tacaamulka dowladaha ku wada jira midnimada, iyo xuquuqaha aadanaha. Haseyeeshee, hoggaanka dowladda dhexe waxaa ay hirgelinta arrimahaasi ugu marti ahaayeen maamulayaasha dowladaha xubinta ka ah midnimada. Dowladaha xubinta ka ah midnimada ayaa lahaa awood ay xiriirro caalami ah ay cid kale kula yeelan kareen iyaga oo la galaya mucaahaddooyin iyo heshiisyo, intiiba aaney kuwaasi faragelineynin arrimaha dowladaha kale ee ay midnimada ku wada jiraan iyo dowladda midnimada qaran.¹⁷⁶
- Maareynta maaliyadda: Dowladaha xubinta ka ah midnimada iyaga ayaa mas'uul ka ahaa ururinta dakhligooda waxaana ay bixinayeen maaliyad lagu maamulo dowladda midnimada qaran.¹⁷⁷ Dowladda midnimada qaran ma lahayn awood cashuur ama dakhli ururin.
- Sharci-dejinta: Ka wada heshiin labada dhinac ah ayaa loogu baahnaa in sharci la dejiyo; golaha sharci-dejinta waxaa uu u baahnaa in uu helo aqlabiyad guud iyo aqlabiyad uu ku dhex helo dowlad kasta oo xubin ka ah midnimada qaran.¹⁷⁸
- Amniga: Golaha Sare ee Hoggaaminta/*The Supreme Command Council* ayaa kormeerayey ciidamada qalabka sida ee midnimada qaran iyo istiraatiijiyadda difaaca/gaashaandhigga, kaas oo ka koobnaa saddex xubnood – Madaxweynayaasha dowladda dhexe ee midnimada qaran, Sebiya, iyo Montenegro. Go'aamada golaha ayaa ku dhisnaa isu-tanaasul.¹⁷⁹

Imaaraadka Carabta ee Midoobey waa federaal ka kooban toddoba imaaradood.

- Laanta fulinta: Awoodda fulinta waxaa wadaaga Golaha Sare ee Hoggaamiyeyaasha, Madaxweyne/Madaxweyne ku-xigeen, iyo Ra'iisul Wasaare/Gole Wasiirro (oo awooddoodu ay u kala hooseeyo sida ay isugu xigaan. Golaha Sare ee Hoggaamiyeyaasha waxaa uu ka kooban yahay hoggaamiyeyaasha toddobada imaaradood. Go'aamada waxaa lagu gaaraa cod aqlabiyad ah waxaana hoggaamiyeyaasha Abu Dhabi iyo Dubai ay leeyihiin awoodo diidmo qayaxan.¹⁸⁰
- Soo-xulidda/doorashada sharci-dejiyeyaasha: Laanta sharci-dejinta waa mid aql keliya ka kooban oo ay ka mid yihiin 40 xubnood; Dastuurka Imaaraadka Carabta ee Midoobey waxaa uu imaarad kasta u oggol yahay in ay go'aan ka gaarto sida lagu soo xulayo wakiilladooda.¹⁸¹ Waqtigaan hoggaamiyeyaasha imaaradaha ayaa soo xula 20 xubnood xubnaha soo hareyna waxaa soo xula ergo doorasho (*electoral college*) oo la soo magacaabey.¹⁸²
- Is-xukun-hoosaad-ka dowladaha xubinta ka ah: qaab-dhismeedka siyaasadeed ee imaarad kasta si madax bannaan ayaa ay iyadu go'aan uga gaartaa. Natiijada taasi ka dhalateyna waxaa ay tahay in imaaradaha ay leeyihiin qaabab dowladeed oo kala duwan, oo u dhexeeya min golayaal fulineed ilaa wakiillo mid keliya ah.¹⁸³

¹⁷⁶ AXDIGA DASTUURIGA AH EE MIDNIMADA QARAN EE SERBIA IYO MONTENEGRO, Feb. 4, 2003, qod. 15.

¹⁷⁷ Ibid. Qodobka 18.

¹⁷⁸ Ibid. Qodobka 23.

¹⁷⁹ Ibid. Qodobka 56.

¹⁸⁰ DASTUURKA IMAARAADKA CARABTA EE MIDOUBEY, Dis. 2, 1971, qod. 46, 49.

¹⁸¹ Ibid. Qodobbada 68 iyo 69. Kala-qoondaynta kuraasta - Abu Dhabi 8, Dubai 8, Sharjah 6, Ras al-Khaimah 6, Ajman 4, Fujairah 4, Umm al-Quwain 4.

¹⁸² Economist Intelligence Unit, *Country Profile 2008: United Arab Emirates* (London: Economist Intelligence Unit, 2008), 7.

¹⁸³ Christopher M. Davidson, *The United Arab Emirates: A Study in Survival* (Boulder: Lynne Rienner Publishers, 2005), 198.

5.1.4 Fursadda/ikhtiyaarka Nooca D: is-sheegasho khiyaari ku dhisan (Free association)

Is-sheegasho khiyaari ku dhisan (*Free association*) waxaa uu dhalin karaa is-waafajinta dano siyaasadeed marka siyaadada (madax-bannaanida) lagu muransan yahay, waxaana ay u dhaxaysaa madax-bannaani iyo midoobid (iskubiiris).¹⁸⁴ Halka madax-bannaanida iyo midoobistu wax ka beddelka lagu sameyn karo uu aad u yar yahay, is-sheegashada khiyaariga ku dhisan si weyn ayaa wax looga bedbeddeli karaa marka laga hadlayo dowladda weyn ee siyaasada leh ee la sheeganayo iyo dowladda yar ee sheeganaysa, taas oo sababi karta madax-bannaani hoose oo darajooyinkeedu ay aad u kala duwan yihiin. **Is-sheegashadu ma ahan khasab in ay ahaato fursad/ikhtiyaar nooc gaar ah oo keligeeda dowlad lagu dhiso; waxaa la dhexgelin karaa mid kasta oo ka mid ah fursadaha/ikhtiyaarada noocyada kala duwan.**

Wada-hadallada u dhexeeya Dowladda la sheeganayo iyo dowladda sheeganaysa ayaa xaddidaya heerka is-maamul iyo mas'uuliyadaha gaarka ah oo noqonaya qaab-maamul is-sheegasho khiyaari ku dhisan. Caadi ahaan, qaababkan waxaa ka mid ah tilmaamahan soo socda:

- Hay'ad sharci-dejin oo degaanka laga soo doortey oo leh wax xoogaa awoodo sharci ah oo aaney dowladda la sheeganayo aaney diidmo qayaxan kala hor imaan karin haddii ay dhaafsiisan tahay mas'uuliyadihii uu markii hore sharcigu u oggola ma ahee.¹⁸⁵
- Madaxa laanta fulinta oo degaanka laga soo xulo oo laga yaabo in uu mas'uuliyad ku lahaado maamulka shuruucda degaanka, iyo sidoo kale shuruucda qaranka.¹⁸⁶
- Garsoor degaan oo madax-bannaan oo mas'uuliyad buuxda ay ka saaran tahay fasiraadda sharciyada degaanka.¹⁸⁷
- Badanaaba, gaashaan-dhigga iyo siyaasadda arrimaha dibadda ayaa gacanta ugu jiraya dowladda weyn ee la sheeganayo.

Haddii si kooban loo sheego, is-sheegashada khiyaariga ah waxaa ay oggolaaneysaa in is-xukun-hoosaad mug leh la bixiyo halka mas'uuliyadaha qaar loo dhaafayo Qaranka la sheegtey. Qaabka noocaas ah waxaa uu u baahan yahay iskaashi ay yeeshaan Qaranka la sheegtey in kan dad sheegtey, gaar ahaan isuduwidda mas'uuliyadaha uu haynayo Qaranka la sheegey, midda loo wareejiya cidda dad soo sheegatey, ama ay ka dhaxaysa labada dowladood.

Heshiisyada is-sheegashada khiyaariga ah waxaa sidoo kale ka mid ah qodobbo cad iyo kuwo daahsoon oo tilmaamaya in mustaqbalka ay suuragal tahay xornimo la siin doono qaranka dad sheegtey. Qaramada dad sheegtey waxaa ay sidoo kale geli karaan heshiisyo dhaqaale iyo kuwo kale, intiiba heshiisyadaasi aaney wax u dhimmeynin xiriirka ay la leeyihiin dowladda ay sheegteen ama haddii kale aaney faragelinaynin xiriirka caalamiga ah ee Qaranka la sheegtey.

¹⁸⁴ Macnaha is-sheegashada khiyaariga ku dhisan waxaa lagu sameeyey Qaraarkii Golaha Guud ee Qaramada Midoobey ee 1541 (XV) Mabada VI. In kasta oo fikradda is-sheegashada khiyaariga ku dhisan ay ka soo if-baxdey dadaalladii meesha looga saarayey gumeysashada, is-sheegashada khiyaariga ah uma baahna in ay aqoonsi rasmi ah ka hesho Qaramada Midoobey.

¹⁸⁵ Samuel J. Spector, "Negotiating Free Association between Western Sahara and Morocco: A Comparative Legal Analysis of Formulas for Self-Determination," *International Negotiation* 16 (2011), 115, doi: 10.1163/157180611X553890.


¹⁸⁶ Ibid.

¹⁸⁷ Ibid.

Attributes of Option Category D

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	To be determined by the principal State and associated state.
2. Nidaamka doorashada	To be determined by the principal State and associated state.
3. Laanta fulinta	To be determined by the principal State and associated state.
4. Laanta sharci-dejinta	To be determined by the principal State and associated state.
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	To be determined by the principal State and associated state.
6. Arrimaha dhaqanka	To be determined by the principal State and associated state.

Jaantuska 7aad - Fursadda/ikhtiyaarka nooca D: Is-sheegasho khiyaari



Tilmaamaha Caanka ah ee Iskubiirista Khiyaariga ah

In kasta oo is-sheegashada ay qaabab badan yeelan karto, haddana tilmaamahan oo socda ayaa ka wada dhexeeya:

- **Awood/xukun-baahin:** Dowladda/qaranka la sheeganayo ayaa lahaanaya awoodda gaashaandhigga iyo siyaasadda arrimaha dibadda.
- **Laan sharci-dejin:** Dowladda cid sheegatey ayaa lahaaneysa laanteeda sharci-dejinta ee u gaarka ah taas oo leh awood ay si madax-bannaan sharciyo ugu dejiyaan si waafaqsan hadba sida ay ugu heshiiyaan Qaranka la soo sheegtey iyo xukuumadda dad sheegatey. Laanta shari-dejinta waa in aan diidmo qayaxan uusan kala horimaan karin Qaranka la sheegtey haddii aaney dhaafeynin awoodihii loo igmadey ee ku qeexan heshiiska.
- **Laanta fulinta:** Dowladda cid sheegatey waxaa ay leedahay laan fulin oo ka mas'uul ah maamulka xeerarka ee dowladda dad sheegatey.

Isha lag asoo qaatey: Samuel J. Spector, "Negotiating Free Association between Western Sahara and Morocco: A Comparative Legal Analysis of Formulas for Self-Determination," *International Negotiation* 16 (2011), 115.

Faa'iidooyinka Fursadda/ikhtiyaarka nooca D	Caqabadaha fursadda/ikhtiyaarka nooca D
<p>Madax-bannaani hoose oo mug leh oo ay helaan dalal is-sheegtey</p> <p>Is-sheegashada ikhtiyaariga ah, Dowladda qaranka la sheegtey waxaa ay leedahay awood yar oo ay ku xukunto dalka soo sheegtey. Mas'uuliyad-qaybsigan waxaa lagu qori karaa dastuurka sidaana waxaa lagaga ilaalinayaa in dib loogu noqdo, dib-ugu-noqoshadaas oo shuruud looga dhigayo in ay taageeraan dadka dowladda dad soo sheegatey..</p> <p>Siyaasadeeda ayaa ay heli kartaa dowlad cid sheegatey</p> <p>Qaar badan oo ka mid ah heshiisyada is-sheegashada waxaa ku jira in cidda dad soo sheeganeysa ay ugu dambeynta hesho siyaasadeeda (sida, cod loo qaado madax-bannaani oo la dib dhigeysa dhowr sano ama ilaa arrimo gaar ah laga xaqiijinayo). Tani waxaa ay u habboonaan kartaa xaaladda Soomaaliya, maaddaama ay saamaxayso in la helo waqti lagu dhaliyo xasilooni laguna dhiso hay'adaha dowladeed ee Soomaalida, ka hor inta aan laga hadlin arrinta la xiriirta siyaadada/madax-bannaanida.</p> <p>Fudududaan iyo hufnaan</p> <p>Habka is-sheegashada ikhtiyaariga ah waa mid aad u fudud oo oggol in wax laga beddelo si uu ugu habboonaado baahiyaha kala duwan. Mas'uuliyad-qaybsigan ayaa noqon kara noocyo badan waxaana ka dhalan kara natiijooyin hufan oo kharashaadka loo qaybsado. Tusaale ahaan, waxaa suuragal ay in ay faa'iido u leedahay in dal cid sheegtey iyo Dalka la sheegtey ay wadaagaan kharashaadka ku baxa ammaanka iyo ciidamada qalabka sida.</p>	<p>Sheegasho badan waxaa ay jilcineysaa dowladda dhexe</p> <p>Haddii dhowr dowladood oo ka hooseeya heerka qaran ay doonaan habkan is-sheegashada ikhtiyaariga ah, waxaa laga yaabaa in ay awood-darro badan ay ku keenaan Qaranka ay sheeganayaan, gaar ahaan haddii dowladaha cid sheeganaya ay leeyihiin ilo waaweyn oo dakhli ka soo galo (t.a. kheyraad dabiici ah, ganacsi). Marka ay ugu xun tahay, Qaranka la sheeganayo ayaa noqon kara mid maaliyad ku filan aan haysan sidaa daraadeedna uu noqdo mid aan ka soo qaad lahayn.</p> <p>Siyaadada/madax-bannaanida oo la daahiyo ayaa laga yaabaa in ay keento in aan marka dambe la helin</p> <p>Daahin la daahiyo siyaadada/madax-bannaanida, ayaa cidda dad sheeganeysa waxaa ay halis ugu jirtaa suuragalnimada ah in afti loo qaado xornimo aad loo daahiyo amaba aan la qaban dhibaatooyin siyaasadeed iyo kuwo kale daraaddood.</p> <p>In aan xoog la saarin awood-qaybsi; niyadda la gashado in isku dan la yahay</p> <p>In kasta oo is-sheegashada khiyaariga ku dhisan ay cidda dad sheeganeysa siineyso is-xukun-hoosaad weyn, haddana waxaa jirta in aan xoogga la saarin hababka awood-qaybsiga marka la barbardhigo ikhtiyaarada kale qaarkood (t.a. awoodda laanta fulinta lama wadaagayo mana ahaaneyso mid kaltan loo qabto sida nooca C). Arrintan waxaa ka dhalan karta in guud ahaan aaney saameyn yeelan, marka laga hadlayo mas'uuliyadaha Qaranka la sheeganayo, sida gaashaandhigga iyo arrimaha dibadda.</p>

Daraasadeed-xaaladeedyada caalamiga ah ee fursadda/ikhtiyaarka nooca D

Bougainville ayaa sheegatey Papua New Guinea (arrintan waxaa la sameeyey 2001)¹⁸⁸

- Qaybsiga mas'uuliyadaha: Dowladda Papua New Guinea waxaa ay leedahay awoodaha gaashaandhiga, amniga, xiriirka dibadda, iyo arrimaha la xiriira maareynta dhaqaalaha qaranka.¹⁸⁹ Haddii kale, dowladda dhexe waxaa ay mas'uuliyado ku wareejin kartaa dowladda Bougainville, ama waxaa ay sameyn kartaa qaab awoodaha la wadaago.¹⁹⁰
- Fursad siyaado/xornimo: Bougainville waxaa ay qaban kartaa afti dadweyne oo la xiriirta xornimo-qaadasho 10 ilaa 15 sano ka dib marka la dhiso dowladdeeda xukun-hoosaadka leh.¹⁹¹

New Caledonia oo sheegatey Fransiiska (arrintan waxaa la sameeyey 1998)¹⁹²

- Qaybsiga awoodaha: Faransiiska waxaa uu leeyahay awood uu ku hago xiriirka dibadda, arrimaha maaliyadda, hirgelinta sharciga, iyo dugsiyada sare iyo tacliinta sare ee New Caledonia.¹⁹³ Muudo 15-20 sano ah, ayaa Faransiisku uu mas'uuliyadaha maamul dowladeed uu ku wareejin doonaa New Caledonia. Mar haddii awoodaha sharci-dejinta uu wareejiyo, Faransiisku dib uma soo ceshan karo.¹⁹⁴

5.1.5 Fursadda/ikhtiyaarka nooca E – Midow qaabeysan oo ay yeeshaan Dalal xor ah

Fursadda/ikhtiyaarka nooca E waa midow qaabeysan, waa nooc konfedereshan ah, oo ay yeeshaan Dalal madax bannaan oo laba ama ka badan ah ('Dalalka xubnaha ka ah'). Waa uu ka duwan yahay qaran mid ah oo aad awoodda loo baahiyey (eeg *fursadda/ikhtiyaarka nooca C*), Dal kasta oo xubin ka ah midowgan qaabeysan waxaa uu leeyahay shakhsiyad caalami ah. Midowga 'qaabeysan' waxaa loola jeedaa jiritaanka hay'ado iyo qaabab rasmi ah oo fududeynaya wada-tacaamulka siyaasadeed iyo kan dhaqaale ee Dalalka madaxa bannaan. Marka laga soo tago in ay bixinayaan matalaadda 'Gole Fulineed iyo Gole La-talin' oo madax-bannaan.

Si loo ixtiraamo siyaadada Dalalka xubnaha ka ah iyo madax-bannaanida hoose ee dowladaha ka tirsan Jamhuuriyadda Federaalka ah, go'aamada uu gaaro Golaha La-talinta ma ahan kuwo waajib ah. Go'aamadu waa in ay ka fekeraan ayna ansaxiyaan Dowladaha xubinta ka ah iyo sharci-dejinta dowladahaas, markaa oo Golaha Fulintu uu bilaabayo in uu korjoogteeyo hirgelinta qodobbada la ansaxiyey, iyada oo hirgelintuna ay badideedu maareynayaan Dalalka xubnaha ka ah.

Wax ka beddelidda Ikhtiyaarka nooca E waxaa uu ku xiran yahay kala duwanaanshaha dhinacyada (1) hay'adda soo saarta go'aamo ay hirgelintoodu waajib tahay iyo (2) xubinnimada. Tusaalaha hoos lagu sharxay, dowladda midowga qaabeysan waxaa ay bixineysaa qaab wadatashi oo ay qayb ka yihiin wakiillo ka socda Dalal madax-bannaan oo xubin ka ah oo keliya, halka kan wax laga beddeley, hay'adda ay xubnuhu wada dhistaan (*supra-national body*) waxaa ay awood u leedahay in ay soo saarto go'aamo ay waajib tahay fulintooda waxaana xubnaha Hay'adda ay yihiin wakiillo ka socda Dalalka iyo sidoo kale dowladaha xubinta ka ah Soomaaliya.

¹⁸⁸ Heshiiska Nabadda ee Bougainville ayaa dhigaya in la sameeyo Dowladda Bougainville ee Madax-bannaanida Hoose haysata, barnaamij hub-ka-dhigid, iyo afti dadweyne oo mustaqbalka loo qaado madax-bannaani buuxda.

¹⁸⁹ Anthony Regan, *Bougainville/Papua New Guinea*, (Kreddha Autonomy Mapping Project, January 2008).

¹⁹⁰ Ibid. Dastuurka Papua New Guinea ayaa faahfaahinaya mas'uuliyadaha la wareejin, eeg CONSTITUTION OF THE INDEPENDENT STATE OF PAPUA NEW GUINEA, Sept. 16, 1975, art. 209 (2).

¹⁹¹ Spector, "Negotiating Free Association," 123.

¹⁹² Heshiiskii Noumea Accord (1998) waxaa uu dhisyaaa is-sheegashada khiyaariga ah ee u dhexeeya New Caledonia iyo Faransiiska. Accord sur la Nouvelle-Calédonie signé à Nouméa le 5 mai 1998 [Noumea Accord], Fr.-New Caledonia, May 5, 1998.

¹⁹³ Nic MacLellan, "Political Chronicles: The Noumea Accord and Decolonisation in New Caledonia," *The Journal of Pacific History* 34, no. 3, (1999). doi:10.1080/00223349908572908.

¹⁹⁴ Heshiiska Noumea Accord, Qodobbada 3.1 iyo 3.2; Spector, "Negotiating Free Association," 122.

Is-waafajinta siyaasadeed ee heerarka Dalka xubinta ka ah iyo dowlad-goboleedyada: In kasta oo go'aamada ay soo saarto Hay'adda La-talinta aaney waajib ahayn fulintooda, haddana in Golaha Fulinta iyo Golaha La-talinta wakiillo lagu wada leeyahay ayaa muhim ah. Geeddi-socodka lagu magacaabay xubnaha Golayaashani waxaa ka mid ahaan kara qodobbo lagu hubinayo in la tixgeliyo danaha kala duwan ee qaybaha xubinta ka ah. Fursado kale oo intaa ka badan oo lagu sameyn karo is-waafajin siyaasadeed waxaa ay ka dhex jiraan Dowladda xubinta ka ah dhexdeeda iyo Sharci-dejinta Dowlad-goboleedka ansaxinaya go'aamada Golaha La-talinta, oo ay ka mid yihiin kuwa lagu sheegey nidaamyada doorashooyinka iyo qaab-dhismeedka dowladeed ee fursadaha/ ikhtiyaarrada nooca A, B, iyo C.

Wada-tacaamulka dhinacyada/strands


Maaddaama dhammaan wakiillada fursadda/ikhtiyaarka noocan ahi ay yihiin kuwo la soo magacaabey, waxaa jira wada-tacaamul muhiim ah oo u dhexeeya (1) *qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta* iyo (5) *ka-qaybgalka dadweynaha*. Qodobbada ku dhex jira dhinacyada/strands waxaa ay saameyn ku yeelan karaan awoodda uu nidaam konfederaal ah uu kor ugu qaadi karo heshiisiinta.

Si dhinacyada kala duwan ay hay'adda dalalka wada dhisteen ay ugu lahaadaan wakiillo matala danahooda, waa in danahaasi ay matalaad ku helaan Dalalka xubinta ka ah iyo dowladaha xubinta ka ah *dhexdooda*. Haddii aaney jirin habab matalaad iyo xisaabtan oo dad ku filan, waxaa laga yaabaa in danaha qaar la fogeeyo. Ka-qaybgalka dadweynaha ayaa bixinaya fursado kale oo lagu sameyn karo is-waafajin. Marka u-qareemeynta danaha kuwa xubinta ka ah ay dad ku filneyn, ka-qaybgalka dadweynaha ayaa laga yaabaa in uu gacan ka geysto oo uu galo halkii ay matalaaddu ka maqneyd. Marka muwaadiniinta la siiyo awood ay kula tacaamulaan xubnaha Golaha Fulinta iyo Golaha La-talinta ama ay si toos ah codsi ugu jeedin karaan sharci-dejintooda ayaa sidoo kale gacan ka geysan karta kor u qaadista matalaadda iyo xisaabtanka.

Tilmaamaha fursadda/ikhtiyaarka nooca E

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	Qaab konfederal ah oo ay matalaad ku leeyihiin Dalalka xubnaha ka ah; go'aamada uu gaaro Golaha Wada-tashiga waajib ma aha fulintooda.
2. Nidaamka doorashada	Xubnaha Golaha Fulinta iyo Golaha Wada-tashiga waxaa soo doorta Dalalka xubnaha ka ah (Dalalka xubnaha ka ah ayaa go'aaminaya geeddi-socodka doorashada).
3. Laanta fulinta	Gole Fulin oo leh guddoon kaltan ah waxaa hal wakiil ku leh Dal kasta oo xubin ka ah.
4. Laanta sharci-dejinta	Gole Wada-tashi waxaa ka mid ah wakiillo ka socda Dal kata oo xubin ka ah; kuraasida waxaa lagu qoondeeya tirada dadka.
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	Habab lagula tacaamulo wakiillada Golaha Fulinta iyo xubnaha Golaha Wada-tashiga.
6. Arrimaha dhaqanka	Guddi la-talin dhaqan oo la magacaabo iyo shirweynayaal dhaqan oo di-iradda lagu saarayo kobcinta Dhaqanka iyo huwiyadda Soomaaliyeed.

Jaantuska 8aad - Fursadda/ikhtiyaarka nooca E: Midow qaabeysan ee Dalal Madax-bannaan



Fursadda/ikhtiyaarka nooca E

Halka ugu muhiimsan ee wax laga beddelayo fursadda/ikhtiyaarka noocan ah waxaa ay la xiriirtaa awoodda go'aan soo saarista. Hay'adda ka dhaxaysa dalalka (*supra-national body*) ee qaabkan kore waxaa ay leedahay oo keliya sharci-dejin watashi, halka nooca wax laga beddeley uu abuurayo hab si weyn loo qaabeeyey oo leh awood go'aamadu uu soo saaro ay fulintoodu waajib noqoneyso.

Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta:

- Qaab konfederal ah oo ay xubno ka yihiin Dalal siyaado leh oo leh shakhsiyad caalami ah oo sidoo kale xubno ku leh hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; go'aamada uu gaaro baarlamaanka dalalka ka dhexeeya waxaa ay waajib ku yihiin dhammaan Dowladaha xubinta ka ah.

Faa'iidooyinka fursadda/ikhtiyaarka nooca E	Caqabadaha Fursadda/ikhtiyaarka nooca E
<p>Wada-tacaamulka oo sii wanaagsanaada maamullada dhexooda iyo dibaddooda</p> <p>Qaabkan waxaa uu aasaaska u dhigi karaa in uu sii wanaagsanaado xiriirka dowladaha Soomaaliyeed (kuwaas oo aan hadda si rasmi ah u wada shaqeynin) waxaana uu dhisi karaa xiriir qaabeysan oo dhex mara Soomaaliya iyo Somaliland iyo kuwo kale. Kaas oo abuuraya qaab-dhismeed bixinaya madax-bannaani oo dhiirrigelinayana wada-tacaamul oo lagana yaabo in uu dhaliyo iskaashi ka wanaagsan kan hadda jira.</p> <p>Waxaa jirta fududaan (jajabnaan) iyada oo weli madax-bannaanina ay jirto</p> <p>Qaab konfederaal ah waxaa uu bixinayaa ikhtiyaaro kala duwan oo loo sameyn karo iswaafajin siyaasadeed iyada oo la joogteynaya himilo ah iskaashi wadashaqeyn Soomaaliyeed iyo suuragalnimada in mustaqbalka la midoobo. Qaab-dhismeedka rasmiga ah ayaa laga yaabaa in uu gacan ka geysto dhiirgelinta iskaashi, isaga oo weli joogteynaya kala madax-bannaani iyo in uu dowladaha kala duwan ee Soomaaliyeed uu awood u siiyo in ay xoogga saaraan dejinta waxyaabaha mudnaanta u leh mid kasta. Halka, marka ay jirto hal hay'ad/maamul, maamullada kala duwan ee Soomaaliyeed ay midba midda kale ay ku xiran tahay oo ay u jilib-xiran tahay si ay u dejiyaan siyaasad qaran oo isla jaanqaadeysa.</p> <p>Waxa ay dhiirrigelineysaa midnimo dhaqaale iyo mid dhaqan</p> <p>Fursadda/ikhtiyaarka noocan ah waxaa uu gacan ka geysanayaa hubinta in dadka Soomaaliyeed ay awoodaan in ay ku ganacsadaan guud ahaan dhulka konfederaalka ayna dhistaan xiriirro dhow oo dhinacyada dhaqanka iyo isboortiga ah. Hay'adaha rasmiga ah waxaa ay gacan ka geysan karaan kobcinta siyaasad is-waafaqsan oo lagu maamulo xiriirrada dhinacyada kala duwan; sidaas daraad-deedna waxaa ay aqoonsaneysaa iskuxirnaanta iyo taariikhda ay wadaagaan dadka Soomaaliyeed.</p>	<p>Qaab-dhismeed dowladeed oo kakan</p> <p>Sida lagu muujiyey fursadda/nooca C, qaab-dhismeedka maamul dowladeed ee heerarka badan ka kooban waxaa ka dhalan kara kharash badnaan. Intaa waxa dheer, marka lagu daro qaab-dhismeed konfederaal ah waxaa ay taasi sii adkeyn kartaa ka-qaybgalinta dadweynaha, maaddaama laga yaabo in aaney si buuxda u fahmin heerarka dowladeed iyo hawlaha ay kala leeyihiin. Tusaale ahaan, qaabkan waxaa soo hoos-geli kara maamul degmo, maamullo gobol, iyo dowlad-goboleed ka mid ah Dal federaala ah, oo lagu darey qaab-dhismeedka konfederaalka.</p> <p>La-jaanqaadidda xaaladda Jamhuuriyadda Federaalka</p> <p>Ka-qaybgalka wakiillada ka socda dowladaha Jamhuuriyadda Federaalka ka tirsan ayaa laga yaabaa in ay timaaddo in ay is-waafaqi waayaan siyaasadaha heerarka federaalka iyo heerka dowlad-goboleed, gaar ahaan halka go'aannada Golaha Wadatashigu uu ka jiro dowlad-goboleedyada qaar oo uusan qaar kalena ka jiran. Tixgelinta isla-jaanqaadidda Jamhuuriyadda Federaalka dhexdeeda ayaa laga yaabaa in ay yareyso kala-duwanaanshaha.</p> <p>Colaad hubaysan oo ay arrintu ku dambeyso</p> <p>Qaabka leh maamullada badan waxaa uu abuurayaa tiro Dowlado Soomaaliyeed oo madax bannaan, oo leh hay'adahooda xiriirka dibadda iyo amni. Haddii Dowlad ka mid ah kuwaas aan danaheeda ka helin meesha, waxaa halkaa ka dhalan karta colaad. Waxaa laga yaabaa in Golaha Wadatashigu ay taxaddar gaar ah siiyaan arrimaha ammaanka</p>

Daraasad-xaaladeedyo caalami ah oo ku saabsan fursadda/ikhtiyaarka nooca E

Masar iyo Suudaan: Axdiga Is-dhexgalka (1982) ayaa isku dayayey in uu rasmiyeeyo tacaamulka dhaqaale iyo kan siyaasadeed ee labada Dal ee xubnaha ka ah.

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed: Gole Sare ayaa dusha kala socdey oo hirgeliyeyna siyaasado dhiirrigelinaya is-dhexgalka; xubnaha waxaa ka mid ahaa madaxweynayaasha Masar iyo Suudaan, iyo sidoo kale afar xubnood oo uu magacaabey mid kasta oo ka mid ah labada madaxweyne.¹⁹⁵ Baarlamaanka waxaa uu ka koobnaa 20 xubnood oo wakiillo uu soo magacowdey sharci-dejinta mid kasta oo ka mid ah labada Dal ee xubnaha ka ah iyo 10 xubnood oo uu soo magacaabey mid kasta oo ka mid ah labada madaxweyne.¹⁹⁶ Baarlamaanka ayaa aasaasiyan ansaxinayey go'aamada uu gaaro Golaha Sare, iyada oo go'aamada iyo talooyinka lagu go'aansanayey cod aqlabiyad hal-dheeri ah.¹⁹⁷
- Afar xorriyadood: Axdigu waxaa uu isku dayey in uu meesha ka saaro caqabadaha is hor taagi kara tacaamulka dhaqaale iyo kan maaliyadeed, waxaana uu sidaa daraaddeed dhiirrigeliyey (1) xoriyadda safarka shakhsiyaadka iyo hantida; (2) xoriyadda alaabo isku-beddeleshada; (3) xoriyadda degganaan-shaha, shaqada, iyo xoriyadda ku lahaanshaha hawlo dhaqaale (shaqo); iyo (4) xoriyadda gaadiidka iyo adeegsiga dekadaha iyo garoomada diyaaradaha ee rayidka.¹⁹⁸

Midowga Benelux Union waa is-bahaysi aad isu dhexgaley oo ay xubno ka yihiin saddex Dal (Belgium, The Netherlands, iyo Luxebourg). Arrimaha ugu waaweyn ee ay iska kaashanayaan waa arrimaha dhaqaalaha, jiritaanka/waaridda (sustainability) iyo caddaalada/arrimaha gudaha.

- Awoodda go'aamada: Guddi Wasiirrada ayaa ah hay'adda ugu weyn ee go'aamada u gaadha Midowga. Guddiga waxaa uu ka kooban yahay min hal wakiil heer wasiir ah oo ka socda Dal kasta oo xubin ka ah waxaana go'aamada lagu gaari karaa marka la wada oggolaado.¹⁹⁹ Guddigu waxaa uu go'aamo ay waajib tahay fulintoodu ka soo saari karaa oo keliya arrimaha la xiriira dhaqangelinta heshiiskii lagu aasaasey midowga oo keliya. Sida kale, Guddigu waxaa uu soo saaraa heshiisyo aaney fulintoodu waajib ahayn laakiin ay tahay in uu ansaxiyo Dalka xubinta ka ah si loo hirgeliyo.²⁰⁰
- Sharci-dejinta: Baarlamaanka Benelux waxaa uu Guddiga Wasiirrada iyo dowladaha Dalalka xubnaha ka ah kala taliyaa iskaashiga dhaqaale iyo arrimo kale oo ka wada dhexeeya. Talooyinka rasmiga ah waxaa lagu go'aamin karaa cod aqlabiyad saddex-meelood laba ah.²⁰¹ Baarlamaannada Dalalka xubinta ka ah ayaa gudahooda ka go'aansada wakiillada ay ku lahaanayaan Guddiga Wada-tashiga ee Baarlamaannada ka dhaxaysa.²⁰²

Midoga Yurub waa midow dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo si ballaaran la isugu duwey oo ka kooban 28 Dal oo Xubin Ka ah. Mas'uuliyadaha Midowga Yurub waxaa ka mid ah arrimaha dhaqaalaha iyo lacagaha, ganacsiga, iyo shaqaaleynta.

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed: *Golaha Reer Yurub (European Council)* ayaa dejinaya siyaasadda guud ee hageysa Midowga waxaana golahaasi uu ka kooban yahay madaxda dalalka/dowladaha ee Dalalka

¹⁹⁵ Axdiga Is-dhexgalka Masar iyo Suudaan, Egypt-Sudan., Waaxda II, Qaybta. I, Qodobbada 5, 6, 9, Okt. 12, 1982, 307 U.N.T.S. 1331.

¹⁹⁶ Ibid. Waaxda II, Qaybta II, Qodobka 15.

¹⁹⁷ Ibid. Waaxda II, Qaybta II, Qodobbada. 20 iyo 21.

¹⁹⁸ Ibid. Waaxda I, Qaybta IV, Qodobka 1.

¹⁹⁹ Traite portant révision du Traité instituant l'Union Economique Benelux signé le 3 février 1958 [Heshiiskii naqtiimey heshiiskii lagu dhisey Midowga Dhaqaale ee Benelux Economic Union oo la saxiixay 3 Febraayo 1958] Qodobbada 7, 8 June 17, 2008, 381 U.N.T.S. 5471.

²⁰⁰ Ibid., Qodobka 6(2).

²⁰¹ Eeg Convention instituant un Conseil consultatif interparlementaire de Benelux [Heshiiska dhisaya Gole Wasatashi oo ka Dhexeeya Baarlamaannada Benelux, Nof. 5, 1995. "Benelux Parliament," Benelux Parliament, la booqdey Nofember 6, 2013, http://www.benelux-parlement.eu/en/parlement/parlement_intro.asp.

²⁰² Ibid.

Xubnaha ka ah iyo Madaxweynaha Guddiga.²⁰³ *Baarlamaanka Reer Yurub* ayaa si toos ah u matalaya danihaha muwaadiniinta Midowga Yurub; matilaadda waxaa ay ku dhowaad gebi ahaanba ku fadhidaa tirada dadweynaha dalka xubinta ka ah.²⁰⁴ *Golaha* waxaa uu matalaa dowladaha Dalalka xubinta ka ah; xubnaha Golaha waxaa loo soo magacaabaa si degdeg ah (*ad hoc*/aan la sii qorsheyn), oo ku fadhida siyaasadda markaa laga doodayo.²⁰⁵ *Guddiga Reer Yurub* waxaa uu matalaa danaha Midowga oo isu dhan waxaana xubno ka mid ah min hal wakiil oo ka socda Dal kasta oo xubin ka ah, waxaana uu ka dhigan yahay shaqaalaha rayidka ah ee Midowga.²⁰⁶

- **Awoodda go'aan-qaadashada:** Waxaa jira habraacyo afar ah oo loo maro soo saarista sharci, laakiin sharci-dejinta badideed waxaa lagu go'aansadaa geeddi-socod loo yaqaanno 'codecision.' *Codecision* waxaa uu u baahan yahay in uu aqlabiyad oggolaansho ah uu ka helo Baarlamaanka Yurub iyo Golaha Midowga Yurub labadaba.²⁰⁷
- **Maareynta maaliyadda:** Isha ugu weyn ee maaliyadda Midowga Yurub waa (1) qaaraanka looga jaro wadarta dakhliga guud ee dalalka xubnaha ka ah, (2) cashuuraha soo waaridda badeecadaha ka yimaada dibadda Midowga Yurub, iyo (3) qayb ka mid ah dakhliga cashuuraha qiimaha sheyga lagu daro (VAT) oo dalba soo gala.²⁰⁸ Miisaaniyad-sanadeedda waxaa qora Guddiga waana in laga ansaxiyaa Baarlamaanka iyo Golaha.²⁰⁹

Beesha Bariga Afrika/East African Community (EAC) waa midow siyaasadeed iyo mid dhaqaale oo ay leeyihiin shan dal (Kenya, Uganda, Tanzania, Rwanda, iyo Burundi)> Beesha EAC waxaa ay sameysey suuq ka dhexeeya waxaana ay mideeyeen kastammada waxaana ay xoogga saaraan iskaashi dhinacyada ganacsiga, amniga, gaadiidka, iyo socdaal ah.²¹⁰

- **Qaab-dhismeedka siyaasadeed:** Madaxda u sarreysa (*The Summit*) waxaa ku jira hoggaamiyaha dalka ee mid kasta oo ka mid ah dalalka xubnaha ka ah; dhammaan go'aamada waxaa loo gaaraa qaab lagu wada heshiinayo.²¹¹ Madaxda u sarreysa (*the Summit*) ayaa waddada u jeexaya EAC waxaana caawinaya Gole, ay ku jiraan Xeer-ilaaliyaha Guud iyo wasiirro ka socda Dal kasta oo xubin ka ah.²¹² Go'aamada Golaha waxaa lagu gaaraa ka wada heshiin waana kuwo hirgelintooda waajib ay ku tahay mid kasta oo ka mid ah Dalalka xubinta ka ah.²¹³ Golaha Sharci-dejinta ee Bariga Afrika/*The East Africa Legislative Assembly* waxaa uu ka kooban yahay 52 xunbood (9 xubnood oo cod leh oo ka socda mid kasta oo ka mid ah dalalka xubnaha ka ah iyo 7 xubnood oo ku yimid xafiis ay hayaan daraaddii (*ex-officio*); xubnaha waxaa si dadban u soo doorta laamaha sharci-dejinta ee dalalka xubnaha ka ah.²¹⁴
- **Taageero farsamo:** Guddiyo waaxeedyada (*sectoral committees*) waxaa ku jira khubarro ku takhasusey waaxaha kala duwan oo diyaariya barnaamijyo hirgelin oo faahfaahsan oo kormeerana sida looga hirgeliyo EAC dhexdeeda. Guddiyadu waxaa ay u shiraan hadba sidii loogu baahdo.²¹⁵

203 Nuqul la ururiyey oo ah Heshiiska ku saabsan Sida uu u Shaqeeyo Midowga Yurub, qod. 15, Maarso 10, 2010/ O.J. (C83) 47 [wixii halkaan ka dambeeya loogu yeeri doono TFEU].

204 Ibid. Qodobka 14.

205 Ibid. Qodobka 16.

206 Ibid. Qodobka 17. Hay'adaha kale ee Midowga Yurub waxaa ka mid ah Maxkamadda Caddaalada, Bankiga Dhexe ee Reer Yurub, iyo Guddiga/Maxkamadda Hantidhowrka (*the Court of Auditors*).

207 Ibid. Qodobbada 289 iyo 294.

208 European Union, "Where does the money come from?" European Uion, oo la booqdey Nofembar 6, 2013, http://europa.eu/about-eu/basic-information/money/revenue-income/index_en.htm.

209 ITFEU, Qodobka 314.

210 Heshiiska Lagu Dhisey Beesha Bariga Afrika, qod. 5(1), Nof. 30, 1999. , 2144 U.N.T.S. 255.

211 Ibid. Qodobbada 10, 11(1), iyo 12(3).

212 Ibid. Qodobka 13.

213 Ibid. Qodobka 15 iyo 16.

214 Ibid. Qodobka 48.

215 Ibid. Qodobka 21.

5.1.6 Fursadda/ikhtiyaarka nooca F: Tacaamul dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo ay yeeshaan Dalal madax-bannaan oo siyaado leh

Fursadda/ikhtiyaarka nooc F waxaa uu bixinayaa qaabab ay u tacaamulaan Dowlado madax-bannaan oo siyaado leh si loo fududeeyo ganacsiga, socdaalka, amniga, iyo arrimaha kale ee khuseeya dhinacyada kala duwan ee xuduudaha. Tacaamulka ugu weyn ee dhex mara Dalalka waa kan heshiis laga wada xaajoodey, kaas oo heshiisyada lagu gaaro ay waajib tahay in ay ansaxiyaan dowladaha Dalalka xubnaha ka ah. Fursaddan/ikhtiyaarka ma tilmaameyso qaab-dhismeed rasmi ah oo ka baxsan shirar heer sare ah oo ay yeeshaan madaxda Dowladaha iyo wakiillada wasaaradaha ee u habboon.

Wax ka beddelka lagu sameyn karo fursaddan/ikhtiyaarkan waxaa uu gaari karaa geesta kale ee kala fogaanshaha xiriirka, kaas oo Dowladaha aan lahayn xiriirro rasmi ah waxaana keliya ay u tacaamulaan si aan rasmi ahayn iyada oo loo marayo hay'adaha caalamiga ah ama kuwa goboleed iyo heshiisyada labada-geesoodka ah.

Sida ay u wada tacaamulaan dhinacyada/strands

Qaababka ku jira fursaddan/ikhtiyaarkan waxay u baahan yihiin in is-waafajinta siyaasadeed laga fiiriyo Dowlad kasta gudaheed, lixda dhinacba. Hababka is-waafajinta waxaa ka mid ahaan kara mid kasta oo ka mid ah qodobbada lagu sheegey fursadaha/ikhtiyaarada A, B, C, ama D, maaddaama matalaadda danaha ay ka dhacayso qaab-dhismeedka dowladeed ee heer Dal.


Tilmaamaha fursadda/ikhtiyaarka nooca F

1. Qaab-dhismeedka siyaasadeed iyo awood-baahinta	Shirar degdeg ah oo aan la sii qorsheyn oo ay yeeshaan madaxda dowlad-goboleedyada iyo wasiirro si ay uga munaaqashoodaan ganacsiga, socdaalka, amniga, iyo arrimaha kale ee isaga gudba xuduudaha. Heshiisyo leh qaab mucaahaddooyin fulintoodu waajib tahay oo dhex mara Dalal; oo ay tahay in ay ansaxiso Sharci-dejinta Dal kasta
2. Nidaamka doorashada	Doorashooyinka wakiillada oo ka dhaca heer Dal.
3. Laanta fulinta	Uma habboona
4. Laanta sharci-dejinta	Uma habboona
5. Ka-qaybgalka dadweynaha	In lagula xiriiro habab heer Dal ah, oo ay ka mid tahay in heshiisyada iyo mucaahaddooyinka la ansaxiyey ay eegaan sharci-dejinta dalalka.
6. Arrimaha dhaqanka	Shirweynayaal dhaqanka la xiriira oo diiradda lagu saarayo horumarinta dhaqanka iyo huwiyadda Soomaaliyeed.

Fursadda/ikhtiyaarka nooca F oo wax laga beddeley

The variation for this option category represents the very end of the spectrum for multi-entity configurations, where the sovereign States remain in mutual isolation of each other. This includes absolutely no formal bilateral interaction, only indirect interaction through international organizations (e.g. United Nations and African Union).

Jaantuska 9aad - Fursadda/ikhtiyaarka nooca F: Tacaamul dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo ay yeeshaan Dalal madax-bannaan oo siyaado leh



Faa'iidooyinka fursadda/ikhtiyaarka F

Heshiisyo sal u noqda wada-hawlgalka mustaqbalka

Fursaddan/ikhtiyaarka noocan waxaa ay sal u noqon kartaa qaabab kale oo rasmi ah oo dhex mara qaybaha Soomaaliya. Xiriirrada heshiiska ku dhisan waxaa ay fududeynayaan iskaashi iyo tacaamul dhex mara Dowladaha, oo keeni kara wada-xaajoodyo kale oo is-dhexgal iyo laga yaabee in mustaqbalka la midoobo ama lagu dhiso qaab hay'ad/maamul dhinacyo badan ay ku jiraan oo ka adag midkan.

Ballaarin shuraako lala sameeyo dalalka IGAD iyo dalalka Soomaaliyeed

Xiriirkan heshiiska ku dhisan waxaa uu keeni karaa in aanu ku koobnaan oo keliya dalalka Soomaaliya ahayn, ee waxaa sidoo kale ku soo biiri kara dalalka IGAD sida Jabuuti iyo kuwo kale. Tani waxaa ay fududeyn kartaa horumar dhaqaale iyo mid siyaasadeed waxaana ay horseedi kartaa hay'ado/maamullo ka adag kuwa hadda oo xiriirro rasmi ah lagu sameeyo.

Caqabadaha fursadda/ikhtiyaarka nooca F

Suuragalnimada in iskaashiga dhaqaale, bulsho, iyo siyaasadeed uu ka yaraado sida hadda

Marka la sameeyo qaab sidaan u tabar-darran, fursaddan/ikhtiyaarkan oo jira xagga ugu dambeysa maamullada dhinacyada badan ku jiraan loo dhiso. Fursaddan/ikhtiyaarkan ma bixinayo qaab-dhismeed rasmi ah oo uu u xiririnayo Dalal madax-bannaan waxaana uu yareyn karaa tacaamul iyo wada-hadal dhex mara Soomaalida gobolladeeda, taasoo ay ka dhalaneyso kala-qaybsanaanta qoysaska, hanti lunta, iyo huwiyadda Soomaalinida oo dhibaato soo gaadha.

Koboc iyo horumar dhaqaale oo aan sinneyn

Haddii uusan jirin qaabab/hay'ado rasmi ah oo dhisan iyo kheyraad-wadaagis la amrey, waxaa laga yaabaa in koboca iyo horumarka dhaqaaluhu aanu isku si uga dhicin guud ahaan gobollada Soomaaliya. Shuruucda la xiriira ganacsiga iyo tacaamulka dhaqaale waxaa ay ku imaan karaan oo keliya wada-hadallo laga galo heshiis waxaana laga yaabaa in ay waayaan dadaalkii loogu baahnaa in si dad ku filan loo wadaago kheyraadka, marka la barbardhigo qaar ka mid ah noocyada fursadaha/ikhtiyaarada ka qaab wanaagsan.

5.1.7 Fursadaha/ikhtiyaaraadka oo la isku-barxo iyo kuwo la kala dambeysiiyo/Hybrid options and sequencing

Ikhtiyaaraadka lagu gaarayo is-waafajin siyaasadeed ee lagu sharxay qoraalkan khasab ma ahan in mid walba goonideeda ay u taagnaato. Qaabab iyaga oo la isku barxay ah oo cunsurro kala duwan oo ikhtiyaarrada laga soo kala qaatey ayaa la sameyn karaa si loo waafajiyo baahiyo gaar ah.

Marka laga soo tago tixgelin fursadaha/khiyaarada la isku barxo, habab midba mar shaqeeyo ayaa sidoo kale gacan ka geysan kara is-waafajin ballaaran. Middan ayaa waxaa sii qiyaasayey Puntland, taas oo maskaxda gelisey in ay ku biirto federaal qaran marka nabad iyo xasilooni lagu helo guud ahaan dalka. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la hubiyo in maamullada ka soo if-baxaya koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya lagu soo biiriyo wada-hadallada.

5.2 Mowduucyada wada khuseeya

Fursadaha/ikhtiyaarrada waxaa ay bixinayaan sawir guud oo loo sameeyo maamul dowladeed iyo habab keeni kara is-waafajin siyaasadeed. Marka laga soo tago lixda dhinac (*strands*), tixgelin la siiyo mowduucyada wada khuseeya ayaa laga yaabaa in ay gacan ka geysato heshiisiin ka ballaaran, kana shaamilsan. Sharciga xisbiyada siyaasadda, qaababka amniga, dhexgelinta diinta, iyo nidaamka sharci ee rasmiga ah ayaa ah mawaadiic muhiim ah oo mudan in diiradda la sii saaro.

5.2.1 Shuruucda xisbiyada siyaasadda

Xisbiyada siyaasaddu waxaa ay noqon karaan kuwo matala danaha kala duwan, laakiin waxaa ay sii gun-dheereyn karaan kala-qaybsanaanta bulsho-dhaqan iyo dadeed ee bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, waa haddii aan la qorin shuruuc ku habboon lana hirgelin. Xeerarka lagu maamulo sameynta xisbiyada sidaasadeed waxaa caadi ahaan fara sharci-dejinta, sidaas oo ay tahay haddana waxaa lagu qaabeeyaa isla arrinta is-waaf-ajinta siyaasadeed dhexdeeda si la mid ah arrimaha kale ee maamulka dowladeed la xiriira ee ku jira dastuurka. In feker kale la geliyo sameynta xisbiyada siyaasadeed ayaa laga yaabaa in ay is-waafajiso danaha kala duwan ayna ka hortagto colaad timaadda muddada fog. Fursado/ikhtiyaarro lagu maamulayo xisbiyada siyaasadeed waxaa ka mid noqon kara:

- In kuraasi laga siiyo sharci-dejinta federaalka keliya xisbiyada sidaasadeed ee taageero ka haysta dalka oo dhan (t.a. in xisbiyada shuruud looga dhigo in ay taageero ka helaan dhowr dowladood oo xubin ka ha federaalka si ay wakiillo ugu yeeshaan Golaha Shacabka). Habkaan, ama mid u dhow oo dhiirrigelinaya in xisbiyada siyaasadeed loo dhammaado, ayaa gacan ka geysan kara dhiirrigelinta umad-dhisidda waxaana uu taageeri karaa kobcinta huwiyadda Soomaaliyeed.
- In xisbiyada siyaasadda shuruud looga dhigo in ay iska fogeeyaan waddo aan ahayn mid siyaasadeed oo lagu helo taageero. Arrintan waxaa ka mid noqon kara in waajib lagaga dhigo xeer-anshaxeed iyo heshiyo ay kaga fogaanayaan musuq-maasuq, laaluush, iyo rabshad, kaas oo ay la socoto ciqaabo ka dhalanaya ku-xadgudbidda shuruucda xisbiyada siyaasadda.

5.2.2 Qaababka amniga

Bixinta baahida ammaanka iyo hoggaanka ciidamada qalabka sida ayaa ah kuwo muhiim u ah kor u qaadidda xasiloonnida iyo talinta sharciga. Si gaar ah arrimaha ammaanka ayaa u baahan si taxaddar leh la isugu miisaa-mo kor-u-qaadidda midnimada iyo ilaalinta danaha dhinacyada. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu bixinayaa mabdaa'diida iyo qaab-dhismeedka guud ee lagu maamulo ciidamada ammaanka ee Soomaaliya, haddana kama hadlayo in dowladaha xubinta ka ah federaalka ama maamullada degaanka loo oggolaanayo in

ay lahaadaan maleeshiyaadkooda. Iyada oo wax laga baranayo wixii Soomaaliya soo marey, in loo oggolaano maamullada gudaha in ay lahaadaan maleeshiyaadkooda waxaa ay halis gelin kartaa xasiloonnida, haddii mali-ishiyaadkaas loo oggolaado in ay qaadaan tallaabo iyaga oo aan tixgelin dadka guud ee Soomaalida ugu jirta. Taas beddelkeeda, qaababk amniga waxaa ku jiri kara arrimahaan soo socda:

- In meel dhexe laga xukumo ciidamada qalabka sida, oo hoggaanku gacanta ugu jiro dowladda federaalka ah. Si loo hubiyo in si dad ku filin loo matalo danaha dowladaha xubinta ka ah federaalka, hoggaanka dhexe waxaa lagu dhisayaa habab ay shuruud u tahay in oggolaansho looga helo dowladda xubinta ka ah federaalka ama ay taageeraan aqlabiyadda aqalka sare ee baarlamaanka ama hay'ad kale oo matilaad leh.
- In la xadeeyo kharashaadka mileteri iyo in la sameeyo siyaabo kale oo lagu xakameeyo si loo hubiyo in aanu qofna ama gobol gaar ah uusan gacanta u gelin ciidamada qalabka sida iyo miisaaniyaddooda. Waxaa sidoo kale la tixgelin karaa in aan mileteriba la sameysan sida dalka Costa Rica oo kale.
- In dowladaha xubinta ka ah federaalka loo oggolaado in ay qabanqaabiyaan ciidamo boolis degaan oo mas'uuliyadaha la wadaaga ayna iskaashadaan ciidamada booliska ee federaalka. Dalka Ingiriiska (UK), degmo (*county*) kasta, koox kasta oo degmooyin ah, ama degaan magaalo waxaa ay leeyihiin ciidan boolis oo u gaar ah oo la shaqeeya dhowr ciidamada boolis oo dalka oo dhan ka dhexeeya ah, sida Ciidamada Booliska Gaadiidka ee Britain/*the British Transport Police* iyo Booliska Wasaaradda Difaaca. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la ogaado in qaybaha kala duwan ee ciidamada militeriga lala xiriiryo gobollo gaar ah.

5.2.3 Diinta

In Shareecada la dhex geliyo qaababka rasmiga ah ee maamulka dowladeed ayaa muhiimad sare ku leh dhaqanka Soomaaliyeed. Dhammaan afarta dastuur ee lagu muujiyey Qoraalkan Xog-warranka ah waxaa ay Shareecada u aqoonsanayaan in ay qayb aasaas ah u tahay maamulka dowladeed ayna sal u tahay sharci-dejinta. Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah waxaa uu si guud u dhigayaaa waajibnimada raacista Shareecada Islaamka,²¹⁶ haddana qoraalka ma cayimayo cidda mas'uulka ka ah fasiraadda Shareecada iyo sida go'aamada loo fulinayo. Haddii aan la caddeyn sida awoodaha loo qaybsanayo, dowladda federaalka iyo dowlad kasta oo xubin ka ah federaalka gaarkeeda ayaa ay u sameysan kartaa fasiraado iyada u gaar ah oo iska soo horjeeda. Si looga fogaado iska horimaadka caadooyinka, baaritaannada kale ee la sameyn karo waxaa ku jiri kara:

- In la dhiso gole culimo, oo la mid ah Golaha Culimada ee Somaliland, oo hawshiisu tahay in uu hago laamaha fulinta iyo sharci-dejinta ee dowladda federaalka ah iyo in uu xalliyo murannada la xiriira Shareecada.
- U magacaabidda culimo heer kasta oo dowladeed si ay isugu duwaan in si isku mid ah loo hirgeliyo Shareecada. Geeddi-socodka magacaabista waxaa mas'uuliyaddiisa qaadan kara laanta fulinta ee dowladda federaalka, ama waxaa hayn kara laamaha fulinta ee heer kasta oo ka mid ah dowladda

In mabaa'diisa Islaamka la dhexgeliyo nidaamka maamul ee dowladda ayaa sidoo kale muujineysa sida Shareecada si gaar ah saameyn ugu yeelan karto Muslimiinta Soomaalida ah, gaar ahaan maaddaama qaar badan oo ka mid ah hawlaha garsoor ee guud ahaan Soomaaliya hadda lagu maamulo hababka dhaqanka iyo midka diinta. In kasta oo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah uu farayo Maxkamadda Dastuuriga ah iyo nidaamka maxkamadaha dalka, haddana qoraalka kama munaaqashoonayo in caadada dhaqaka iyo diinta (xeerka iyo shareecada) lagu darayo nidaamka rasmiga ah ee caddaaladda ama in ay ahaanayaan kuwo gaar u taagan oo aan rasmi ahayn. Fursadaha/ikhtiyaarrada xeerka iyo shareecada lagu dhexgeliyo nidaamka caddaaladda ee dalka waxaa ay la mid noqon karaan sida:

²¹⁶ DASTUURKA KU-MEELGAARKA AH, Agoosto 1, 2012 (Som.), qodobbada 2, 3(1).

- Kenya, Malaysia, Imaaraadka Carabta ee Midoobey, iyo Itoobiya: Dalalkaan, maxkamado Shareecada ku shaqeeya ayaa qayb ka ah nidaamka rasmiga ah ee garsoorka iyaga oo u garqaadaya xubnaha muslimiinta ah ee bulshada, halka maxkamadaha cilmaaniga ah ay isla arrimhaas u maamulayaan kuwa aan Muslimiinta ahayn. Itoobiya ayaa sameysey nidaam shareeco oo saddex heer ka kooban oo ka barbar shaqeeya nidaamka maxkamadaha cilmaaniga ah.
- Indonesia, Itoobiya, iyo Puntland: Dalalkaan iyo hay'adahaan waxaa ay aqoonsan yihiin caadooyinka iyo xeerka intiiba aaney ka hor imaaneynin shuruucda kale ee jira. Dastuurka Puntland, go'aamada ay gaaraan odeyaasha dhaqanka waxaa laga diiwaangelinayaa nidaamka rasmiga ah ee maxkamadaha.

Dhexgelinta Shareecada waxaa ay muujineysaa keliya in mid ka mid ah cunsurrada badan ee ay tahay in la tixgeliyo marka la kobcinayo/sameynayo nidaamka caddaaladda ee rasmiga ah. Si loogu qaabeeyo looguna hirgeliyo si guul leh nidaam sharci oo cusub iyo si loo dhiirrigeliyo in si isku mid ah loo hirgeliyo sharciga ayaa waxaa dabcan ku jira wax ka beddelka amniga, la-shaqeynta dadweynaha, iyo habab taabagal ah oo loo kormeero.

6. Gebogebo

Soomaaliya iyo Somaliland waxaa u yaalla hawl muhiim ah oo ah in ay dhisaan qaabab dowladeed oo shaqeyn kara oo dhiirrigelinaya nabad waarta, korriimo, kuna saleysan dhaqanka Soomaaliyeed ee ay wadaagaan. Taariikhdiisii dhoweyd ee Soomaaliya iyo Somaliland ayaa madaxa isu gelisey qabaa'ilka waxaana ay sababtey is-aaminaad-darro iyo colaad ay maamullo ka-qaybgalayaan. Sida keliya ee looga gudbi karo waqtiga burburku ku sifoobey oo loogu gudbo mustaqbal nabad iyo barwaaqo leh waa in la helo nidaamyo iyo geeddi-socodyo ku xisaabtama danaha iyo ujeedooyinka kala duwan ee dhammaan dadka Soomaaliyeed. Habka is-waafajinta siyaasadda waxaa uu bixinayaa waddooyin gacan looga geysan karo qaabeyn nidaamyo dowladeed iyo geeddi-socodyo gacan ka geysan kara heshiisiin labada dhinac ah. In la qaado hab ku wajahan dhammaan nidaamka iyo in la raadiyo fursado lagu helo is-waafajin siyaasadeed ee guud ahaan lixda dhinac/*strands* waxaa ay kordhineysaa fursadda guul laga gaari karo. Geeddi-socodyo iyo nidaamyo diiradda saaraya keliya hal dhinac oo maamulka dowladeed ka mid ah, ama aan ku xisaabtamin danaha kala duwan ee ay leeyihin dadka iyo bulshoyinka Soomaaliyeed, ayaa ay fursadda uu ku keeni karo nabad waarta ay aad u xaddidan tahay.

Sida Qoraalkan Xog-warranku ogaadey, qaar badan oo ka mid ah sharuucda ka jira Somaliland iyo Soomaaliyaba, in kasta oo aaney si buuxda isu-waafajineynin danaha kala duwan, haddana waa kuwo la sii habeyn karo si ay uga muuqdaan heshiisyadi la gaarey – haddii ay yihiin Soomaaliya iyo Somaliland ama Soomaaliya dhexdeeda. Dastuuradiisii kala duwanaa ee kala ahaa Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, Dastuurka Somaliland iyo Dastuurka Puntland waxaa ay oggolaayeen in wax laga beddelo oo xaaladda la waafajiyo si loo kordhiyo fursadaha lagu heli karo is-waafajin siyaasadeed oo u dhaxaysa dastuurradaa, iyo mid u dhaxaysa hay'adaha/maamullada kala duwan.

Qaabka ay xushaan dadka Soomaaliyeed waxa uu doono ha ahaadee, waxaa ay u baahan yihiin in ay dib u eegaan taariikhda, dhaqanka iyo caadooyinka dadka Soomaaliyeed. Xaaladaha kale waxaa ay bixinayaan fikrado laakiin si loo guuleysto xalalka ay dadka Soomaaliyeed qaadanayaan waa in ay ahaadaan kuwo ku qoto dheer waayo-aragnimada Soomaalida.

Marxalad lagamaarmaan ah oo ku xigta middan kana mid ah geeddi-socodkan waa wada-hadal arrin diiradda lagu saarayo, taas oo ay hagayaan xaaladda dhabta ah ee ka jirta Soomaaliya iyo fikrado laga helo meelo kale oo dunida ka mid ah, si loo helo habab la isu waafajiyo danaha siyaasadeed ee Somaliland iyo Soomaaliya iyo kuwa gobollada kale ee Soomaaliya gudaheeda iyo mid kasta goonidiisa, kuwaas oo ay ka mid yihiin Puntland iyo bulshooyinka gobollada koonfurta iyo bartamaha dalka. Maamullada gobollada iyo maamulka dhexe ayaa ay tahay in ay ka heshiyaan geeddi-socod lagu dhisayo hay'ado cuusb, iyo siyaabihii lagu xallin lahaa khilaafaadka dhuleed ee u dhexeeya maamullada soo if-baxaya iyo kuwii jirey.

Lixda nooc fursado/ikhtiyaaro ee ay dadka iyo hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed ay u arki karaan in ay mudan yihiin tixgelin. Kuwani waxaa ay u dhexeeyaan oo dhinaca shishe u xiga dowlad dhexe oo xooggan oo xukunka la baahiyey, iyada oo geeska kalena uu u jiro dalal kala gaar ah oo ku wada tacaamulaya mucaahaddooyin iyo hay'ado caalami ah. Marka la daraaseynayo is-waafajinta siyaasadeed ee ku jirta noocyadan fursadaha/ikhtiyaarrada ah waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in is-waafajintu aan looga baahneyn oo keliya in ay ka dhex dhacdo Soomaaliya iyo Somaliland balse sidoo kale looga baahan yahay in ay ka dhex dhacdo dhammaan qaybaha/unugyada (gobollada) siyaasadeed. Noocyada fursadaha/ikhtiyaarada waxaa ay muujinayaan in ay jiraan siyaabo badan oo la isu waajin karo danaha kala duwan ee xataa tartanka ku jira (iska soo horjeeda) iyo oggolaanshaha in xalku uu ku jiri karo habab kala duwan oo bulshooyin kale horey gacan uga siisey sidii ay u dhisi lahaayeen maamullo siyaasadeed oo adag oo waxqabadna leh. Xasiloonni waarta waxaa ay u baahan tahay in ay sii socdaan wada-hadallada iyo dib-u-heshiisiinta Soomaaliya iyo Somaliland dhexdooda iyo mid walba gudaheeda. Noocyada kala duwan ee fursadaha/ikhtiyaarrada ah ee lagu soo bandhigey Qoraalkan Xog-warranka

ah waxaa loo qaabeeyey in ay bixiyaan waxyaabo dheeri ah oo la taaban karo oo laga wada xaajoodo, iyada oo la rajeynayo in kuwa dhinaca ka ah wada-hadallada iyo doodaha ee guud ahaan Soomaaliya iyo Somaliland ay bilaabi karaan in ay waxyaabo ay wada qaadan karaan ka helaan qaybahan farsamo.

Maaddaama dadka Soomaaliyeed iyo hoggaamiyaashooda ay ka fekeraan mustaqbalkooda waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in qaabab maamul dowladeed uu sharciyad ku helo taageerada ay ka helaan dadka iyo sida la isugu halleyn karo talinta sharciga. Hoggaamiyeyaasha Soomaalida marka ay tixgelineyaan geeddi-socod lagu turxaan-bixiyo qaababka maamul dowladeed ee hadda jira, laguna abuuru kuwo cusub, waxaa loo baa-hanayaa in loo maro hab loo dhan yahay oo lagu celceliyo marar badan. Geeddi-socodyada hadda jira ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladda Puntland, iyo Hargeysa iyo Garoowe ama Garoowe iyo Muqdisho, geeddi-socodyada lagu doonayo in dowlado xubin ka noqda federaalka looga dhiso gobollada koonfur ka xiga Puntland waa kuwo aad isugu xiran waana kuwo saameyn isku leh. Hababka ugu wanaagsan ee lagu hubinayo in aaney tani ka dhalan colaad waa in la hubiyo in dhammaan geeddi-socodyadu ay yihiin kuwo muwaafaqo keenaya.

Qoraalkan xog-warranka ah waxaa uu bixineyaa fikrado wax ku biirinaya geeddi-socodyada Soomaaliya iyo Somaliland mid walba gudaheeda uga socda iyo mid labadooda ka dhexeeya, ma bixineyso talooyin laakiin waxaa ay soo bandhigeysaa habab keeni kara nabad intaan ka waarid badan.

Tixraacyadda

“Puntland Traditional Leaders Conference: Declaration.” UNDP Somalia, February 11, 2009. http://www.so.undp.org/index2.php?option=com_docman&task=doc_view&gid=152&Itemid=35.

“SOMALIA: Puntland Constitution Approved.” *Africa Research Bulletin: Political, Social and Cultural Series* 49, no. 4 (2012): 19231B-19232A. doi: 10.1111/j.1467-825X.2012.04427.x.

Accord sur la Nouvelle-Calédonie signé à Nouméa le 5 mai 1998 [Noumea Accord], Fr.-New Caledonia, May 5, 1998.

Adam, Stuart, Anoushka Kenley, and Carl Emmerson. *A Survey of UK Local Government Finance, Briefing Note no. 74*. London: Institute for Fiscal Studies, January 1, 2007.

Adan Mohamoud, Abdirahman. *Local Governments in Somaliland: Challenges and Opportunities* (Hargeisa: April 2012). http://wardheernews.com/Articles%202012/April/11_%20Local%20Governments%20in%20%20Somaliland_%20Challenges%20and%20Opportunities_abdirahman.pdf.

African Elections Database. “Elections in Somalia.” Last modified December 30, 2010. <http://africanelections.tripod.com/so.html>.

Aidid, Safia. “Haweenku Wa Garab (Women are a Force): Women and the Somali Nationalist Movement, 1943-1960.” *Bildhaan* 10 (2010): 103-124. <http://digitalcommons.macalester.edu/bildhaan/vol10/iss1/10>.

Artana, Daniel, Sebastian Auguste, Marcela Cristini, Cynthia Moskovitz, and Ivana Templado. *Sub-National Revenue Mobilization in Latin American and Caribbean Countries: The Case of Argentina, Working Paper Series, No. IDB-WP-297*. Inter-American Development Bank, March 2012.

Benelux Parliament. “Benelux Parliament.” Accessed November 6, 2013. http://www.benelux-parlement.eu/en/parlement/parlement_intro.asp.

Bradbury, Mark. *Becoming Somaliland*. Bloomington: Indiana University Press, 2008.

Bradbury, Mark, Adan Yusuf Abokor, and Haroon Ahmed Yusuf. “Somaliland: Choosing Politics over Violence.” *Review of African Political Economy* 30, no. 97 (2003): 455-478. <http://www.jstor.org/stable/4006988>.

Consolidated Version of the Treaty on the Functioning of the European Union art. 15, March 10, 2010 O.J. (C83) 47.

CONSTITUCIÓN NACIONAL [CONST. NAC.] Aug. 22, 1994 (Arg.).

CONSTITUTION OF PUNTLAND STATE OF SOMALIA, Dec. 2009 (Som.).

CONSTITUTION OF THE REPUBLIC OF SOMALILAND, May 31, 2001 (Som.).

THE CONSTITUTION OF THE SOMALI REPUBLIC, July 1, 1960 (Som.).

CONSTITUTION OF THE INDEPENDENT STATE OF PAPUA NEW GUINEA, Sept. 16, 1975.

CONSTITUTIONAL CHARTER OF THE STATE UNION OF SERBIA AND MONTENEGRO, Feb. 4, 2003.

Convention instituant un Conseil consultatif interparlementaire de Benelux [Convention establishing a Benelux Interparliamentary Consultative Council] Nov. 5, 1955.

Cotran, Eugene. “Legal problems arising out of the formation of the Somali Republic.” *International & Comparative Law Quarterly* 12, no. 3 (July 1963): 1010-1026. <http://www.jstor.org/stable/756301>.

Davidson, Christopher M. *The United Arab Emirates: A Study in Survival*. Boulder: Lynne Rienner Publishers, 2005.

DEPARTMENT FOR COMMUNITIES AND LOCAL GOVERNMENT, LOCAL GOVERNMENT FINANCIAL STATISTICS ENGLAND, 2012, no. 22 (U.K.).

DOUSTOUR JOURHOURIAT AL-IRAQ [THE CONSTITUTION OF THE REPUBLIC OF IRAQ] OF 2005, Oct. 15, 2005.

Economist Intelligence Unit. *Country Profile 2008: United Arab Emirates*. London: Economist Intelligence Unit, 2008.

Egypt and Sudan Charter of Integration, Egypt-Sudan, Part II, Sec. I, Arts. 5, 6, 9, Oct. 12, 198s, 307 U.N.T.S. 1331.

European Union. "Where does the money come from?" Accessed November 6, 2013. http://europa.eu/about-eu/basic-information/money/revenue-income/index_en.htm.

Fadal, Mohamed. *Institutionalizing Democracy in Somaliland*. Social Research and Development Institute, 2009.

FEDERAL CONSTITUTION, Aug. 31, 1957 (Malay).

Federal Research Division. *Somalia: A Country Study*. Whitefish: Kessinger Publishing, LLC, 2010.

Garowe Online. "Somalia: Puntland passes district electoral law." August 7, 2012. http://www.garoweonline.com/artman2/publish/Somalia_27/Somalia_Puntland_passes_district_electoral_law.shtml.

Garowe Online. "Somalia: Puntland State Constitution Adopted." April 18, 2012. <http://allafrica.com/stories/201204181369.html>.

Geopolicity. *Study on Sector Functional Assessments within Education, Health & WASH in Puntland*. April 2012. <http://jplg.org/documents/reports%5CSector%20Studies%5CPuntland%20-%20Sector%20Functional%20Assessment%20-%20FINAL%20REPORT%20-%20April%2018%202012.pdf>.

Government of Wales Act, 1998, c. 38 (U.K.).

Government of Wales Act, 2006, c. 32 (U.K.).

Hasan, Yusuf M. "Somaliland: Only Woman Guurti Member Resigns." *Somaliland Sun*. March 3, 2013. <http://somalilandsun.com/index.php/politics/2394-somaliland-only-women-guurti-member-resigns>.

House of Representatives Election Law (Law No. 20-2/2005) (Somaliland).

Initiative & Referendum Institute. *Final Report of the Initiative & Referendum Institute's Election Monitoring Team*. Washington: Citizen Lawmaker Press, July 27, 2001. <http://www.iandrinstitute.org/New%20IRI%20Website%20Info/I&R%20Research%20and%20History/I&R%20Studies/Final%20Somaliland%20Report%207-24-01%20combined.pdf>.

International Crisis Group. *Somalia: The Transitional Government on Life Support*. Africa Report No. 170. February 21, 2011.

International Republican Institute. *Parliamentary Election Assessment Report*. September 29, 2005. http://www.somalilandlaw.com/IRI_Parlection_2005.pdf.

Inter-Parliamentary Union. *Chronicle of Parliamentary Elections*. Geneva: Inter-Parliamentary Union, 1969.

Interpeace. "A Historic Moment: Puntland's Constitution Now Ratified." April 20, 2012. <http://www.interpeace.org/2011-08-08-15-19-20/latest-news/52-2012/282-a-historic-moment-puntland-s-constitution-now-ratified>.

Jama, Ibrahim Hashi. *Somaliland Electoral Laws*. Somalilandlaw.com, 2009. http://www.somalilandtimes.net/sl/2009/368/Somaliland_Electoral_Laws_Handbook_2008PP.pdf.

Jimcaale, Cabdirahman. *Consolidation and Decentralization of Government Institutions*. Hargeysa: Academy for Peace and Development, 2002.

Johnson, Pat, ed. *The Puntland Experience: A Bottom-up Approach to Peace and State Building*. Interpeace, 2008.

Law Concerning Regional Administration (Law No. 32/2004) art. 148 (Indon.).

Law on Government of Aceh (Law No. 11/2006) (Indon.).

Law on Local Administration and Local Council Elections (Law No. 19/1963) (Som.).

Law on Special Autonomy for Papua Province (Law No. 21/2001) (Indon.).

Law on Special Autonomy for the Province of Aceh Special Region as the Province of Nanggroe Aceh Darussalam (Law No. 18/2001) (Indon.).

Lewis, I.M. *Understanding Somalia and Somaliland*. New York: Columbia University Press, 2008.

Lewis, Ioan M., and James Mayall, *A Study of Decentralised Political Structures for Somalia: A Menu of Options*. London School of Economics and Political Science, August, 1995.

Local Government Act (Act No. 462/1993) (Ghana).

Local Government Act (July 2013) (Som.).

MacLellan, Nic. "Political Chronicles: The Noumea Accord and Decolonisation in New Caledonia." *The Journal of Pacific History* 34, no. 3 (1999): 245-252. doi:10.1080/00223349908572908.

Means, Gordon P. "Malaysia (The Federation of Malaysia)." In *Handbook of Federal Countries*, ed. Ann L. Griffiths, 184-197. Montreal: McGill-Queen's University Press, June 2005.

MINISTRY OF LOCAL GOVERNMENT, RURAL DEVELOPMENT AND ENVIRONMENT, INTERGOVERNMENTAL FISCAL DECENTRALISATION FRAMEWORK, 2008 (Ghana).

Northern Ireland Act, 1998, c. 47 (U.K.).

Northern Ireland Assembly, Research and Library Services. *A Background Paper on the Barnett Formula, Research Paper 12/01*. Research and Library Services for the Northern Ireland Assembly, September 2001. http://archive.niassembly.gov.uk/research_papers/research/1201.pdf.

Omar, Hamsa. "Somali Prime Minister Names New Cabinet, Including Two Women." *Bloomberg*, November 5, 2012. <http://www.bloomberg.com/news/2012-11-05/somali-prime-minister-names-new-cabinet-including-two-women.html>.

The Presidential and Local Elections Law (Law No. 20/2001) (Somaliland).

PROVISIONAL CONSTITUTION, Aug. 1, 2012 (Som.).

Regan, Anthony. *Bougainville/Papua New Guinea*. Kreddha Autonomy Mapping Project, January 2008.

The Regulation of Political Associations and Parties Law (Law No. 14/2011) (Som.).

Scotland Act, 1998, c. 46 (U.K.).

Somalia Conflict Early Warning Early Response Unit. *From the bottom up: Southern Regions - Perspectives through conflict analysis and key political actors' mapping of Gedo, Middle Juba, Lower Juba, and Lower Shabelle*. Somalia Conflict Early Warning Early Response Unit, September 2013, <http://hdr.undp.org/en/reports/national/arabstates/somalia/Somalia%20Report%202012.pdf>.

Somalilandlaw.com. "Somaliland Political Parties: Somaliland Political Parties and Associations." Accessed November 6, 2013. http://www.somalilandlaw.com/xeerka_xisbiyadda.htm.

Somaliland Press. "Somaliland parliament gets extension amid opposition and public objection." September 7, 2010. <http://somalilandpress.com/somaliland-parliament-gets-extension-amid-public-and-political-anger-18098>.

Spector, Samuel J. "Negotiating Free Association between Western Sahara and Morocco: A Comparative Legal Analysis of Formulas for Self-Determination," *International Negotiation* 16 (2011): 109-135.

Tommasi, Mariano, Sebastian Saiegh, and Pablo Sanguinetti. "Fiscal Federalism in Argentina: Policies, Politics, and Institutional Reform." *Economia* 1, no. 2 (Spring 2001): 157-211. <http://www.jstor.org/stable/20065407>.

Traite portant révision du Traité instituant l'Union Economique Benelux signé le 3 février 1958 [Treaty revising the treaty establishing the Benelux Economic Union signed on 3 February 1958] June 17, 2008, 381 U.N.T.S. 5471.

Treaty for the Establishment of the East African Community, Nov. 30, 1999, 2144 U.N.T.S. 255.

United Nations Development Programme Somalia. *Somalia Human Development Report 2012*. United Nations Development Programme Somalia, 2012.

Hay'adda Conflict Dynamics

Conflict Dynamics waa urur aan faa'iido-doon ahayn oo ka diwaan gashan Cambridge, MA, USA (Mareykanka). Ururka waxaa la-aasaasay sanadkii 2004tii si uu uga hortago una xalliyo khilaafaadka ka dhaca dal dhexdiisa ama dhex mara dalal, iyo in uu yareeyo silica dadka ka soo gaara colaadaha iyo dhibaatooyinka. Conflict Dynamics waxaa ay fulinta hawsheeda u martaa hawlo la xiriira xallinta khilaafaadka, taageeridda dhexdhexaadinta, iyo dejinta siyaasad xaalad bani'aadamnimo, waxaana ay taariikh cad u leedahay in kuwa ay arrintu khuseyso ee dalka iyo taageerayaasha caalamiga ah taageero ku siiso geeddi-socodyada wada-hadallada siyaasadeed. Is-waafajinta siyaasadeed ee bulshooyinka ka soo baxaya colaadaha ayaa ah arrin si aasaasi ah diiradda loogu saarey habkan.

Hababka Conflict Dynamics u marto is-waafajinta siyaasadeed waxaa lagu adeegsadey oo si guul leh uu gacan uga geystey is-waafajinta dano siyaasadeed, waxaana markii ugu dambeysey lagu adeegsadey Suudaan iyo Suudaanta Kuunfureed.

Tani iyo sanadkii 2009kii, Conflict Dynamics waxaa ay xiriirro shaqo oo adag la sameysey ka-qaybgalayaal badan oo Soomaali ah (si dhexdhexaadnimo iyo dhinac-u-xaglin la'aan ay ku jirto), waxaana ay sameysey koox yar oo waxterkeedu aad u sarreeyo, waxaana ay xiriir wada-shaqeyn la yeelatey dhowr urur oo kale.

Hawsha Conflict Dynamics ee ku saabsan is-waafajinta siyaasadeed ee Somaliland iyo Somalia gudahooda ama labada dhexdooda waxaa suurageliyey taageerada deeqsinimadu ku dheehan tahay ee laga heley Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Dawladda Norway iyo Waaxda Arrimaha Dibadda ee Federaalka Dawladda Switzerland.

Conflict Dynamics International

1035 Cambridge Street, Suite 10A
Cambridge MA 02141
USA

+1 617 661 1066 Phone

+1 617 661 1686 Fax

info@cdint.org

Paul Simkin, Country Director
Somali Program
psimkin@cdint.org

+254 706 396 948

www.cdint.org